XIGTAYSIGA XIKMADDA

“

Sida jidhkaaga oo kale ayay maskaxdaaduna u daashaa, ee ku nasi odhaahyada xikmadda leh!

— *Hazrat Ali*

Magaca Buugga: XIGTAYSIGA XIKMADDA
Isku-dubbaridkii: Cabdixaafid Mawliid & Cabdicasiis Guudcadde
© Bahda Xigasho, 2016

Lahaanshaha buugga iyo xuquuqdiisu dhowrsan oo xafidan. Sifo kasta oo xatooyo ka dhadhamayso loogama faa'idaysan karo waxqabadkan. Waxa aad ka garoocan kartaa odhaahyadii ku soo jiita, keliyaata haddii aad ilaalinaysid xuquuqdooda lahaansho.

Waxa la daabacay: 2016

Jeldiga buugga waxa qaabeeyay: Cabdixaafid Mawliid.

Cabbirka: 16cmx20cm

MAAMUUS

Buuggan *Xigtaysiga Xikmadda* waxa aannu ku maamuusaynaa Soomaali kasta oo jecel xikmadda, isla jeerkaasna ay wehel u tahay murtidu.

TUSMADA BUUGGA

MAAMUUS 4
ARAR 6
AFEEF 8

AKHRIS & QORAAL 9
AWOOD 16
CABSI 22
CADDAALAD 26
DAGAAL 31
DHIIRRIGELIN 40
FARXAD 65
GANACSI 74
GUUL 76
HABDHAQAN 90
HOGGAAMIN 116
HORUMAR 121
JACAYL 124
MAAD 138
MAAHMAAH 148
MURTI 154
MUSUQMAASUQ 183
NABAD 185
NACASNIMO 192
NAXARIIS 195
NOLOL 198
SAAXIIBTINNIMO 217
SHAQO 223
SIYAASAD 229
WADAJIR 235
WAQTI 244
WAXBARASHO 257
Ku Saabsan Xigasho 269
Warqad Furan 270

ARAR

Guud ahaan aadanuhu waxa uu wadaagaa dhawr wax. In uu bashar wada yahay, basharkuna nebi Aadam ku arooro, nebi Aadamna dhoobo laga sameeyay, ayaa u weyn waxa uu wadaago aadanuhu. Kan oo keli ah ma aha. Dadku waxa uu wadaagaa dhaxal guud. Dhaxal uu isagu iska dhaxlo, oo faca isbeddelaya dhex raacda. Dhaxalkan guud lama kala laha. Waa timir xabaal taalla oo ninkii soo gaadhaa uu ka istafiido. Aqoonta iyo ilbaxnimada guud ayaa kow ka ah liiskan. Siyaabaha ay aqoontu uga kala dhex gooshka hal jiil ilaa jiilka kale waxa u weyn iyada oo u sii dhex maraysa kaydka dhigaalka ah iyo kan dhegoodka ah. Cilmi-dhigaal iyo cilmi-dhegoodna waa ay dhahaan e. Midka koowaadi waxa uu raacaa gaadiidka la yidhaahdo waraaqaha, kan labadna waayeelka. Faracyo ay ku kala duwan yihiin labadan waddo ayaa jirta. Balse, dhanka kale, waxa jira wadiiqyo ay iskaga soo dhacaan oo ay ka midaysan yihiin. Kuwan danbe waxa u weyn oo horkacaysa in ay labada habba xambaarsan yihiin xikmado xeeldheer oo furdaamin u noqda cakirnaanta isa shaabahda ee xilliyada.

Xikmaddu, asalkeeda bannaanba, waa dhaxal uu ku abtirsado, sheegtana, qof kasta oo bini-aadan ahi. Waxa ay kaalinta koowaad ku cidhiidhsataa neefta Ogsijiinta ah ee dadka oo dhami wada neefsado. Sida ay yidhaahdaanna, murtidu waxa ay ku hadashaa hal af oo keli ah. Haa, hal af, halkaas afna waxa aynu ku micnayn karnaa in uu yahay mid ka dhashay xaqiiqada ah in idil ahaan xikmaduhu ka wada jawaabaan baahi. Waa halkan

meesha ay ka soo gelayso aas-aasnimada iyo caws jiilaal ahaansha ay daruuri tahay in dhaxalkaa aan laga qadin. Haddii aynu nahay dad Soomaali ah oo Muslimiin ka sii ahina waaba uga sii xaq mudannahay. Jirtoo aynu nidhi waa dhaxal aan la kala sheegan, haddana haddiiba la kala sheegan lahaa, adigaaga Muslimka ah in lagaa sheegtaa ma aha mid meesha le'eg.

Murtidu in ay baadi inaga maqan tahay, oo aragtidu inaga dhaxayso, ciddii doontaa gacanta ha ku hayso, afkii ay doontana ha ku qornaatee, annaga oo maskaxda iyo miyirkaba ku hayna ayaa aanu yagleelnay degelka **Xigasho.org**, kaas oo ah degel loogu talogalay in uu ka falceliyo baahida ay dadkeennu u qabaan xikmadaha ku kaydsan afaf aan kan Soomaaliga ahayn in ay helaan iyaga oo loo soo turjumay. Dhigahanahan *Xigtaysiga Xikmaddu* waa natiijada ka dhalatay dedaalka degelkaa ka bilawday ee Bahda Xigasho ku shuqlanaayeen. Waa buug dhawr hormo (volumes) ah oo ujeedka u dhaw ee uu beegsanayaa yahay in qof kasta oo Soomaali ah, waxna akhriyaa, agtiisa ka helo buug xikmado afaf kale laga soo haltebiyay ku qoran yihiin. Waa buug aanu rejaynayno in uu hawshaa furan doono.

Odhaahyada buuggan lagu soo ururiyay laguma ladhin wax sharraxaad ah. In akhristaha la siiyo fursad uu ku fekero oo uu isagu si iskii ah ugu weeleeyo weedh kasta ayaa ay sababtu tahay. Waa adiga cidda dheefsanaysa xikmadahani, sida oo kale, waa in ay isla adiga noqotaa cidda dhuuxaysa adeegsiga murti kasta. Sidaasi darteed, akhriste shifo ku ilsaar, oo shar kuuma leh!

Bahda *Xigasho*

AFEEF

Inaga oo ka duulayna xaqiiqada ah in murtiyuhu hal luuqad ku wada hadlaan, ayna yihiin hanti aadanahu iska dhaxlo oo aanay cidi gaar u sheegan, haddiiba ay u sheegatana aan inaga Muslimiin ah la inaga xigin, ayaa aynu isku xilqaannay uruurinta iyo haltebinta odhaahyaha xikmadaha ah ee aan afkeenna Soomaaliga ku kaydsanayn. Dhammaan weedhaha aad buuggan ugu imanaysaa waa kuwo aanu ka soo turjunnay af shisheeye, annaga oo aan u eegin cidda tidhi in ay madow ahayd iyo in ay caddaan ahayd toona, sidaas darteed akhristaha Soomaaliga ah ee jeclaan lahaa in aannu maahmaahyihii iyo murtiyihii Soomaalida buugga ku soo qaadanno, waxa aanu uga afeefaynaynaa in aannu filayno in walaalaha kale xilkaa gutaan, balse ay muhiimad taa ka culus noola eekoonaatay in aannu dadkeenna Soomaalida ah ka haqabtirno xikmadaha afafka kale ku qoran ee aannu aaminsannahay in ay si uun u saamayn doonto nolosha qofka Soomaaliga ah.

Jirtoo aannu dedaalnay, weedhahaas dhinacyada nolosha taabanayana meel isugu keennay, ma nusqaan la'aanayno, oo aadane ayaannu u nahay wixii gef ah; kolkaas akhriste waxa aad nagu kaalmaysaa wixii talo iyo turxaanbixin ah ee togan ha nagala masuugin, ee noogu soo hagaaji cinwaanka hoose. Mahadsanid.

Email*:* ***info@xigasho.org***

1
AKHRIS IYO QORAAL

Qoraa waliba wuu dhiman doonaa, wuxuu gamcihiisa ku qorayna wax ka danbeeya oo ka hadha ayay noqon doonaan; ha qorin wax aanad ku farxi doonin maalinta qiyaamaha in aad aragto!

— *Qoraha lama yaqaan*

Qofka inta uu wax curiyo dadka la wadaagaa waxa uu la mid yahay qof inta uu caqligiisii weel ku soo riday dadka la wadaagaya!

— *Xasan Xaydar*

Buugaagta iyo wax kasta oo la qoro waa ay argagax geliyaan kuwa raba in ay daboolaan runta.

— *Wole Soyinka*

Haddii aad rabto in aad dal barato, akhri qorayaashiisa.

— *Aminatta Forna*

Sida uu u jiro qoraal hal-abuur ah, ayuu u jiraa akhris ha-abuur ahina!

— *Ralph Waldo Emerson*

Hal buug oo aad u fiicani waxa uu u dhigmaa boqol saaxiib oo wanaagsan, balse hal saaxiib oo wanaagsani waxa uu u dhigmaa maktabad iska dhan!

— *Abdul Kalam*

Tani waa wax u gooniya buugaagta; waxa ay kuu oggolaanayaan in aad socdaasho adiga oo aan tallaabo qaadin.

— *Jhumpa Lahiri*

Akhristuhu waxa uu noolaadaa kun nololood!

— *Qoraha lama yaqaan*

Sababta aan wax u qoraa keliya waa dareenka i gubaya. Haddii aanan qori lahayn, ma aan awoodeen in aan xasilooni helo.

— *Ba Jin*

Wax kasta oo aad hammad u hayso waa in aad samaysaa. Haddii aad rabto in aad wax qorto, wax ka qor wax aad garanayso.

— *Jackie Collins*

Qoraaga waa in uu jiraa cod dhexdiisa ka leh, 'Runta sheeg.' Muuji waxoogaa siro ah.

— *Quentin Tarantino*

Buugaagtu waa markabyo kuwaas oo dhex maraya badaha ballaaran ee waqtiga.

— Francis Bacon

Meel kasta oo ay buugaag ku gubaan sidoo kalana, ugu danbeynta, dadka ayay gubi. *— Heinrich Heine*

Wax aan akhris ahayn ma samayn gacaliye. Hantida dadka kale waxa ay ku tiirsan tahay lacagta noodhka ah, hantidayduna waxa ay ku tiirsan tahay ladhadhka (cinwaannada) buugta. Qof hantiile ah ayaan ahay sida aad u jeeddid. Waa aan akhriyay wax kasta oo gacantayda soo galay, si la mid ah sida ay iyaguba u boobeen wax kasta oo gacantooda soo galay!

— Ahlam Mosteghanemi

Nin kasta oo wax badan akhriya maskaxdiisana in yar isticmaala wuxuu ku dhacaa caadooyinka caajis ee fekerka.

— Albert Einstein

Qofka aan rabin in uu wax akhriyo kama faa'iido badna qofka aan wax akhrin karin.

— Mark Twain

Dunida oo dhan ayaa isukay furtay markii aan bartay sida wax loo akhriyo.

— Mary McLeod Bethune

Haddii aanad ka helin qof sheekadiisa, adigu sheeko kuu gaar ah qor.

— *Chinua Achebe*

Ma aha in aad gubto buugaag si aad u burburiso dhaqan. Keliya dadka ka jooji in ay akhriyaan. — *Ray Bradbury*

Haddii uu jiro buug aad rabto in aad akhrido, laakiin aan weli cid qorin, markaas waxaa aad ku qasban tahay in aad adigu qortid.

— *Toni Morrison*

Mar allaale marka aynnu dhammayno akhrinta buug, waxa aynu ka dhigannahay sidii qof macasalaameeyay saaxiib qaali ku ahaa!

— *Dr. Cabdikarim Bakkaar*

Qoraagu waa in uu lahaadaa hal-adayga abwaanka iyo suuraynta (khiyaalka) saynisyahanka.

— *Vladimir Nabokov*

Buug kasta oo aad qaaddo waxaa ku jira cashar ama casharro u gooni ah, marar badanna buugta xumi waxa ay leeyihiin barid ka badan kuwa wanaagsan.

— *Stephen King*

Qoriddu waa fekerid. Si aad si fiican wax ugu qortid, waa in aad si cad u fekertaa. Waana taa sababta ay u adag tahay.

— *David McCullough*

La wadaag dadka aqoontaada. Waa habka lagu gaadho nolol weligeed ah.

— Dalai Lama XIV

Akhristaha wanaagsan, akhristaha sare, akhristaha firfircoon ee hal abuurka lihi, waa ka laba akhriya!

— Vladimir Nabokov

Hal cunug, hal bare, hal qalin iyo hal buug ayaa dunidan wax ka beddeli kara!

— Malala Yousafzai

Qofka aan akhriyin buugta wanaagsani waxba ma dhaamo qofka aan akhriyi karin.

— Mark Twain

Akhrinta buugta wanaagsan oo dhani waxa ay la mid tahay la-sheekaysiga dadkii ugu wanaagsanaa qarniyadii tegay!

— Rene Descartes

Ama qor wax u qalma in la akhristo, ama samee wax u qalma in wax laga qoro.

— Benjamin Franklin

Wax-akhrisku waxa uu ii yahay hab aan ku ballaadhiyo garaadkayga, ku kala furo indhahayga, kuna buuxiyo qalbigayga.

— Oprah

Caalamku waa sida buugga, qofkii aan safrin wuxuu la mid yahay qof buug hal bog oo keliya ka akhriyey. *– St. Augustine*

Bilaa buug haddii aan ahaan lahaa, beri hore ayaan waalan lahaa.

— Domien Echols

Buuggu waa maquuno (hadyad) aad mar kasta iska furanaysid.

— Garrison Keillor

Marka buug la qorayo qaybtee baa u wanaagsan? Dhammaystirka! *— Rick Riordan*

Haddii aad doonaysid in aad noqotid qoraa, waa in aad laba shay samaysaa ugu horrayntaba; wax badan akhridaa wax badanna qortaa. *— Stephen King*

Haddii uu jiro buug aad rabtid in aad akhridid balse aan weli la qorin, waa in aad adigu qortaa. *— Tani Morrison*

Waxaa jira dembiyo ka xun in buugaag la gubo. Mid ka mid ahi waa in aan la akhriyin iyaga. *— Joseph Brodsky*

Ma jiro saaxiib u daacad ah sida buuggu daacad u yahay.

— Ernest Hemingway

Qol buugaag la'aan ahi waa sida jidh bilaa naf ah.

— Marcus Tullius Cicero

Inta aanad hadlin ka hor, feker. Inta aanad fekerin ka horna, akhri.

— Fran Lebowitz

2
AWOOD

Kacdoonku wuxuu mar walba ku jiraa gacmaha dhallinyarada. Dhallinyaraduna had iyo jeer waxa ay dhaxlaan kacdoon.

— *Huey Newton*

Ma awoodo in aan dabaysha marin-habaabiyo, balse waxa aan awoodaa in aan shiraaca doontayda u hagaajiyo hadba dhanka aan doonayo.

— *James Dean*

Ii ballanqaad in aad mar kasta xasuusnaan doontid in aad ka geesisan tahay inta aad moodayso, ka xooggan tahay inta kuu muuqata, kana muddakarsan tahay inta aad u malaynayso.

— *A. A. Milne*

Ka ugu awoodda badani waa kan naftiisa xakameeya.

— *Lucius Annaeus Seneca*

Isbeddelku weligii ma immaanayo marka dadku aanay haysan awooddii iyo dhiirranidii ay iyagu ku arki lahaayeen cidda ay yihiin.

— *Bryant H. McGill*

Haddii aanan samayn karin wax aad u wanaag, waxa aan si aad u wanaagsan u samayn karaa waxyaabo yaryar.

— Martin Luther King, Jr.

Qofna badhi-taar kuma saari kartid sallaan ilaa uu isagu rabo in uu koro.

— Andrew Carnegie

Kuwa barakeysan waa kuwa awooda in ay wax bixiyaan dibna aan u xusuusan, sidoo kalana wax guddooma weligoodna aan hilmaamin.

— Bernard Meltzer

Muddakarnimadu waa awoodda qabatimidda isbeddel.

— Stephen Hawking

Meel kasta oo aan dhibaato ku arko, halkaasi waa meesha aan rabo in aad tago, kana qabto wixii aan awoodo.

— Princess Diana

Ninku waa in uu awoodo qirashada qaladaadkiisa, caqligiisu ku filan yahay in uu qaladaadkiisa ka fa'iidaysto, awooddiisuna ku filan tahay in uu saxo.

— John C. Maxwell

Kalinnimo, waxba ma ahi. Waxba ma haysto. Waxa aynu haysannaa awood. Laakiin weligeen ma ogaan doonno, weligeen ma arki doonno; ilaa aynu isu tagno si aynu uga shaqaysiinno.

— *Ayi Kwei Armah*

Hal nin ma awoodo in uu god hoos ugu hayo nin kale isaga oo aan isna godka kula jirin.

— *Booker T. Washington*

Warbaahintu waa awoodda ugu xoogga badan dhulka guudkiisa. Waxa ay haystaan awoodda qof bilaa denbi ah lagaga dhigo denbiile iyo awoodda qof denbiile ah lagaga dhigo bilaa denbi, taasina waa awood badni. Maxaa yeelay, waxa ay xukummaan maskaxda dadka.

— *Malcolm X*

In aad sameyso wax aan dadka kale sameyn karin waa karti. In aad sameyso wax aan kartidu sameyn karinina waa hanadnimo.

— *Will Henry*

Halkii mar waxa aan sameyn karaa hal wax, laakiin isku mar waxa aan awoodaa in aan ka dheeraado sameynta waxyaabo badan.

— *Ashleigh Brilliant*

Run ahaantii raggu ma ay aqoonsan awoodda ay haystaan.

— Confucius

Dedaalka joogtada ah – iyadoon lagu xisaabtamayn xoog iyo xeelad toona – waa furaha aynu ku balliqi karno awoodaheenna!

— Winston Churchill

Habeen keliya waxba kagama beddeli kartid meesha aad hadda joogto, laakiin habeen keliya waxa aad ku beddeli kartaa jihada aad u socoto.

***—** Jim Rohn*

Waa hadal dhab ah oo hore loo yidhi: Uma baahna awood weyn in aan wax sameyno, laakiin waxa ay u baahantahay awood weyn oo aan ku go'aansanno in aynu sameyno.

***—** Chow Ching*

Qofna ma awoodo in uu dib u noqdo oo uu soo bilaabo nolol cusub, laakiin qof kasta ayaa bilaabi kara oo sameyn kara dhammaad cusub.

***—** Maria Robinson*

Samee wixii aad awooddid, halka aad joogto, waxa aad haysato.

***—** Teddy Roosevelt*

Waxa aad tahay qof caqli badan haddii aad si fudud u awooddo ku toosinta feejignaantaada waxa u baahan in lagu toosiyo.

— Terence

Ma jiro qof awood u leh in uu laba tallaabo halmar wada qaado; waxa aad qaadi karta hal tallaabo markiiba.

— Osho

Awoodda ugu weyn ee qof haysto waa awoodda ah in uu wax doorto.

— Martin J. Kohe

Haddii beedka ay jebiso awood debadda kaga timi, nolol ayaa dhammaata. Haddii isla beedkii ay jebiso awood gudaha kaga timina, nolol ayaa bilaabanta. Wax kasta oo weyni gudaha ayuu ka bilaabmaa!

— Qoraha lama yaqaan

Weligaa ha quudhsan awoodda aad u leedahay in aad ruux kale noloshiisa wax tarto; xataa haddii aanad u war haynin awooddaa.

— Greg Louganis

Ma caawin karno cid kasta, balse cid kastaa cid uun bay caawin kartaa.

— Ronald Reagan

Dayaxu wuxuu fogeeya gudcurka jira, taas oo xiddiguhuna, inkastoo ay tiro badan yihiin, aanay sameyn.

— *Chanakya*

3
CABSI

Qaladka ugu weyn ee aad sameyn karto inta aad nooshahay waa ka cabsashada in aad qalad sameysid.

— Elbert Hubbard

Xabsiga keliya ee dhabta ahi waa cabsida, xorriyadda keliya ee dhabta ahina waa ka xorowga cabsida.

— Aung San Suu Kyi

Waxa keliya ee aan ka cabsadaa waa in aan berri dhinto aniga oo aan naftayda baran.

— Sadegh Hedayat

Feker rejo weyni la jirto waxa uu kaa saari karaa soonaha baqdinta wuxuuna ku gayn karaa soonaha mahadinta.

— Martha Beck

Khajilaaddaadu waxa ay ka dhalatay adiga oo ismoodsiiyay in aad tahay qof muhiim ah. Sida aad moodday ma aha. Marnaba ma tihid qof muhiim ah. Mana jiro ruux u shaqo la' si uu ula socdo khajilaaddaada iyo khaladaadkaaga!

— Ahmed Khaled Tawfiq

Mararka qaarkood ma aha waxyaabaha aynu ka cabsannaa kuwa inta badan ina jebiya, laakiin waxyaabaha aynu illownay in aynu ka cabsanno ayaa ah kuwa ina jebiya.

— *Chika Unigwe*

Markii aan soo korayay, **Mandela** magaciisu wuxuu la macno ahaa argagax. Waa aan ka cabsan jirnay isaga. Maad arki karayn sawir kiisa ah. Sawirkiisu wuxuu ku dhigi karayay jeelka.

— *Kenneth Bonert*

Dhiirranaantu waa farshaxanka ahaanshaha qofka keliya ee og in aad ka cabsaneysid dhimashada.

— *Earl Wilson*

Ka heesa waxaa cabsi awgeed ka orda xanuunkiisa.

— *Miguel de Cervantes*

Haddii ay dadku u wanaagsan yihiin keliya maxaa yeelay cabsida ciqaab, ama rejada abaalmarin, markaas waa aan ka xunnahay runtii.

— *Albert Einstein*

Cabsida wax-uuni waa xididka nacaybka loo qaado dadka kale, nacaybkuna mar uun buu ugu danbeynta baabbi'in doonaa ka wax neceb.

— *George Washington Carver*

Dagaalku waa cabsi dhiirranaan lagu dahaadhay!

— Qoraha lama yaqaan

Cabsidu dhimashada ma baajiso balse noolaanshaha ayay baajisaa.

— Najib Mahfouz

Cabsidu waa macquul, fulaynimase ma aha.

— Mahatma Gandhi

Waxa u weyn ee ay tahay in aynu ka cabsannaa waa cabsida laftarkeeda!

— Franklin D. Roosevelt

Si aynu ugu noolaanno nolol hal-abuur leh, waa in aynu luminnaa cabsida inna leh ‘waad khaldan tihiin.’

— Joseph Chilton Pearce

Noqo qof dhiirran iskuna day in aad wax u qortid qaab kaa cabsiin kara in badan.

—Holley Gerth

Khatartu waa wax dhaba oo jirta, lakiin cabsidu waa doorasho.

— Will Sminth

Waxa aan inta badan jecelahay in aan dhex socdo roobka oo da’aya, si aan qofna u arkin oohintayda.

— *Charlie Chaplin*

4
CADDAALAD

Ma jiraan dad aan waxba galabsan oo ku nool dal denbiile ah.

— *Nadeem Aslam*

Haddii aanad baabbi'in karin caddaaladdarro, ugu yaraan qof walba ogaysii caddaaladdarrada jirta.

— *Shirin Ebadi*

Xukuumadda iskama laha dad koobani, waxaa ay ka dhexaysaa guud ahaan dadka.

— *Narendra Modi*

Marka aad ruuxa dulmiga wada ku leedahay 'caddaalad same,' waxa aad la mid ah adiga oo ku leh nin waalan 'caqli yeelo;' waayo ninka waalani waxa uu isu haystaa in uu dadkaba ugu caqli wanaagsan yahay!

— *Cali al-Wardi*

Waxa aan si xooggan u aamminsanahay caddaalad-la'aan in aanay nabad jirayn. Nabad waartaa ma jiri doonto, si kastoy ahaataba.

— *Angelina Jolie*

Baraha bulshadu waa dad-simaha ugu dambeeyay. Waxa ay cod iyo minbar siiyaan qof kasta oo raba in uu ku lug yeesho.

— Amy Jo Martin

Dunidu ma aha mid caddaalad ah, oo inta badan nacasyada, fulayada, beenalayaasha iyo danaystayaashaa ayaa ku dhuunta meelaha sare.

— Bryant H. McGill

Ka bilow, ‘maxaa sax ah.’ halkii aad ka bilaabi lahayd, ‘maxaa la aqbali karaa.’

— Franz Kafka

Marka ay taagan tahay sharafta aadane, ma sameyn karno xal dhexdhexaad ah.

— Angela Merkel

Ma aha in waddaniyaddu ku indho-tirto oo aad wajihi kari weydo xaqiiqada. Qalad waa qalad, ciddii doontaa ha sameyso ama ha tidhahdo e.

— Malcolm X

Waxa aad raadsataa waa uu ku raadsadaa!

— Jalaala’ddiin AlRumi

Kuwa ugu oohinta dheer ma aha had iyo jeer kuwa waxyeelada ugu xumi soo gaadhay.

— Aesop

Qofku waa in uu raalli ku yahay in uu u dhinto caddaalad. Dhimashadu waa xaqiiq lama huraan ah maalin kastana dadku waa dhintaan, laakiin camalka wanaagsan weligiis wuu noolaanayaa.

— Jesse Jackson

Dalabaadka u horreeya ee ilbaxnimo rabtaa waa caddaalad.

— Sigmund Freud

Caddaalad bilaa ilaalo (awood) ahi waa bilaa tamar; awood bilaa caddaalad ahina waa bilaa arxan!

— Blaise Pascal

Nabadda runta ahi ma aha keliyaata maqnaanshiyaha dagaal, balse sidoo kale waa joogista caddaalad.

— Jane Addams

Qasku waxa uu dhalaa qas. Falal kasta oo qas ah la isna leeyahay caddaalad ku xoojiya, xuquuq ku soo dhiciya, ama nabad ku adkeeya, ma dhammeeyaan qaska. Waxa ay keliya sii diyaariyaan siina xoojiyaan waaridda qaska! *— Wendell Berry*

Nabad iyo caddaalad waa labada dhinac ee hal shilin.

— Dwight D. Eisenhower

Haddii aynaan caddaaladda daryeelin, caddaaladdu inama daryeelayso! *— Francis Bacon*

Meeshii caddaaladda la dafiro, meeshii saboolnimadu xoogaysato, meeshii aqoondarridu shaac-baxdo, meeshii hal dabaqad oo dadka ka mid ahi isdareensiiso in bulshadu tahay hilib u dayacan in la dulmiyo, la boobo lana sharaf-rido; meesha noocaas ah mood iyo nool toona ma badbaado!

— Frederick Douglass

Haddii aanad taxaddarin, wargeysyadu waxa ay kaa dhigi doonaan mid naca dadka la dulmiyay oo jeclaada dadka wax dulmiyay! *— Malcolm X*

Caddaalad-darrida hal meel ka jirtaayi waxa ay halis ku tahay caddaaladda meel uun ka jirta. *— Martin Luther king, JR.*

Haddii aad aaminsan tahay caddaaladda, run ahaan waxa aad aaminsan tahay Aakhiro; sababta oo ah adduunkan wax caddaalad ahi kama jirto! *— Moumin Ali Khan*

Sadaqadu waxa ay ka bilaabantaa guriga, caddaaladduna waxa ay ka bilaabantaa albaabka ku xiga albaabkaaga.

— Charles Dickens

Dadku marka ay saaxiib yihiin caddaalad uma baahna, balse marka ay caddaalad haystaan saaxiibtinnimo waa u baahan yihiin. — *Aristotle*

Waan xukumay, markaasaan caddaalad sameeyay, markaasaan ammaan helay, markaasaan seexday. — *Omer Bin Khaddaab*

5
DAGAAL

Meeshii lacag soo gasho, dagaal baa soo gala.

— *Marian Anderson*

Dagaalku waa barta dadka waaweyni dhallinyarta iyo doqmaha ay isku diraan si ay isu laayaan!

— *Niko Bellic*

Marka ay qaran ku hareeraysan yihiin quruumo hubaysan, waa in uu isna is-hubeeyaa.

— *A. P. J. Abdul Kalam*

Dagaal weligii **xal waara** umuu noqon dhibaato.

— *A. P. J. Abdul Kalam*

Marna isma dhiibayno. Ama waa aanu guulaysan ama waa aanu geeriyoon. Waa in aad u dagaalantaa faca danbe iyo kuwa ka sii dabeeya, aniga miyaa? Anigu kollayba waa aan ka cimri weynahay kan i deldelaya!

— Omar al-Mukhtaar

Carrabku waa sida mindi af badan… isaga oo aan dhiig kaa daadin ayuu ku dilaya.

— *Buddha*

Quudhso cadowga istraatiji ahaan, laakiin xeelad ahaan isaga si dhab ah u qaado. — *Mao Zedong*

Hanti-wadaaggu ma aha jacayl, balse waa dubbe aan u isticmaalno ku burburinta cadawga.

— *Mao Zedong*

Uma oggolaan doono ruux cago uskag leh dhigayaa in uu garaadkayga ku dul lugeeyo!

— *Mahatma* Gandhi

Hoggaamiyaha aan ka labalabayn inta aanu dalkiisa dagaal gelin ka hor uma qalmo in uu hoggaamiye noqdo.

— *Golda Meir*

Ciidan libaaxyo ah oo ay xukunto deero weligood ma noqon doonaan ciidan libaaxyo ah. — *Napoleon Bonaparte*

Dagaal ha gelin haddii aanad waxba ka helayn marka aad ku guuleysato. — *Erwin Rommel*

Mararka qaar waa in aad qori qaaddaa si aad qori kale hoos ugu dhigto. — *Malcolm X*

Xilliga dagaalka, ubad, dumar iyo cirroole midna ha dilina. Dhirta waxba ha u geysanina, hana gubina; dhirta midhaha leh weliba. Ha iska laynina xoolaha cadawga, daysta aad cunno ka

dhigataan e. Waxa idinka soo hor bixi doona dad naftooda u huray daboolidda baahiyaha aas-aasiga ah; far ha saarina!

— *Abu-Bakar as-Siddiq*

Haddii aad rabto in aad qaran burburiso adigoon la dagaalin, ka dhig sinada ama qaawanaanta wax iska caadi ah jiilka dhallintayarta ah dhexdooda.

— *Saladin*

Waa wax aan waxtar lahayn in aad ciidan ka dhan ah u dirto fekrado.

— *Georg Brandes*

Waa in aad digtooni u yeelataa cadowgaaga, waayo iyagu waxa ay yihiin kuwa ugu horreeya ee qaladkaaga ogaanaya.

— *Antisthenes*

Marka hodanku isdagaalayo, saboolka ayaa ku dhex dhinta!

— *Jean-Paul Sartre*

Ha u jahaadin sidii aad u guuleysan lahayd, laakiin door-bid sidii aad qiimo u yeelan lahayd.

— *Albert Einstein*

Weligaa dagaal haku qaadin dad fool-xun, wax ay waayaanba ma jiro.

— Robin Williams

Waxaa iska leh dabeecadda aadanaha in ay necbaystaan kuwa ay dhaawaceen. *— Tacitus*

Waddaniyiinta si iskood ah ugu dagaalama waddanka iyo xuquuqdiisa, ayaa sameeya askarta loogu kalsooni badan yahay adduunkan guudkiisa.

— Stonewall Jackson

Haddii aad rabtid in aad dagaalka joojisid, halka aad qoryo ka diraysid dir buugaag, halka aad taangiyo ka diraysid dir qalimaan, halka aad askar ka diraysidna dir macallimiin!

— Malala Yousafzai

Waa in aanad hal cadow dhawr jeer la dagaalamin haddii kale waxa aad isaga bari doontaa tabahaaga dagaal oo dhan.

— Napoleon Bonaparte

Farshaxanka sare ee dagaal waa in la jebiyo cadow iyada oo aan lala dagaalin.

— Sun Tzu

Ujeeddada dagaalku waa in nabad la helo… Ujeeddada nabadduna waa in dagaal la isu diyaariyo!

— Sun Tzu

U muuqo daciif marka aad adagtahay, una muuqo adayg marka aad daciifka tahay.

— Sun Tzu

Haddii aad raadineyso aargoosi, qod labo xabaalood – oo mid naftaada [ugu talo-gal]!

— Douglas Horton

Dagaalka ninka kaalinta labaad galay wax abaal-marin ahi uma diyaar aha!

— General Omer N. Bradley

Dagaalka kuma sugna wax sharaf ah oo u qalanta dhiigga uu qabo (in lagu illaawo).

— Dwight Eisenhower

Waxa jiray, oo weliba badnaa, da'yar badan oo aan weligood dagaal ka qayb qaadan, haddana damac la'aantooda ka qayb galka dagaalku aanu sidaa u sii fogayn.

— Thucydides

Waxa aan ka raadiyay cadawga meel kasta, waan ku guuldarraystay in aan ku arko hortayda!

— Steven Pressfield

Dagaalku wax lagu farxo ayuu u yahay kuwa aan wax khibrad ah ka haysan!

— *Desiderius Erasmus*

Sida ugu habboon ee dad loo baabbi'iyaa waa in la diido lana tirtiro garashada taariikhdooda.

— *George Orwell*

Haddii aanad naftaada ku kalsooneyn, labo jeer ayaa lagaa adkaaday loolanka nolosha.

— *Marcus Garvey*

Cadawgaaga cafi, laakiin waligaa ha illaawin magacyadooda.

— *John F. Kennedy*

Ka daciifka ahi marna wax ma cafin karo. Cafisku waa sifada kuwa xoogga badan.

— *Mahatma Gandhi*

Bambooyin iyo baaskoolado ma sameeyaan kacdoon. Middida kacdoonka waxa lisa (afeeya) afkaar sal adag leh!

— *Sardar Bhagat Singh*

Annagu ma danayno suurtagalnnimada guuldarrooyinka. Maba jiraan!

— Queen Victoria

Dagaalka waxna ma joojin karaan jeerooy dadku diidaan in ay ka qayb qaataan dagaalka. *— Albert Einstein*

Haka cabsan weligaa in aad u istaagto runta, xitaa haddii ay taasi kaa dhigayso keli.

— Dr. Bilal Philips

Habka ugu fiican ee cadow lagu baabbi'iyaa waa in saaxiib laga dhigto.

— Abraham Lincoln

Dadka waaweyni dagaalka uun bay ku dhawaaqaan, cidda ay tahay in ay dagaalamaan dhintaanna waa dhalinyarada!

— Herbert Hoover

Dadku badiyaa waxa ay dagaalka galaan marka ay leeyihiin, 'nabadda ayaannu jecelnahay.'

— David Herbert Lawrence

Kuwa dhintay oo keliya ayaa isha ka soo qaaday dhammaadka dagaalka!

— Plato

Fulayadu waxa ay dhintaan marar badan ka hor dhimashadooda; geesiyaduna hal mar uun mooye ma dhadhamiyaan geerida.

— William Shakespeare

Haddii aynaan dagaalka dhammayn, dagaalkaa innaga ina dhammayn doona. *— H. G. Wells*

Kuguma taageersani waxa aad leedahay, laakiin xaqaaga odhaansho waan difaacayaa aanba ku dhinto e.

—Voltaire

Haddii aanad daraaddeed u dhimanayn, erayga "Madax-bannaani," ka saar qaamuuskaaga.

— Malcom X

Had iyo jeer iska cafi cadowgaaga; ma jiro wax kaga cadhaysiin badan in la cafiyo. *— Oscar Wilde*

Waxa aan arkay ubad macaluuli hayso. Waxa aan arkay Hooyooyin iyo xaasas silcaya. Waan necbahay dagaalka.

— Franklin D. Roosevelt

In aad dagaalka isu diyaarisaa waa mid ka mid ah hababka ugu firfircoon ee nabad lagu dhalin karo. *— George Washington*

Si aad dal u qabsatid waa in aad hub-dhigis ku samaysaa shicibkiisa. *— Adolf Hitler*

Ma gaari doontid meesha aad u socotid haddii aad u istaagto dhagax-ku-tuuryeynta ey kasta oo ciya. — *Winston Churchill*

Waxaa nalagu salliday qoom isu haysta in iyaga mooyee aanu Ilaahay cid kale hadayn. — *Ibn Sīnā*

Labada dagaalyahan ee ugu xoogga badani waa Waqtiga & Samirka. — *Leo Tolstoy*

6
DHIIRRIGELIN

Keliya kuwa ku dhiirrada in ay si xun u jabaan ayuun baa awooda in ay ku guuleystaan guul weyn.

— *Robert Francis Kennedy*

Dhiirranidu waa iska caabbinta cabsida, diidista in cabsidu ku dabarto, ee ma aha in aan la cabsan.

— *Mark Twain*

Wax kasta oo maskaxda qofku ka fekerto oo ay aaminto, waa ay sameyn kartaa.

— *Napoleon Hill*

Qofka keliya ee si dhab ah kuu dhiirrigelin karaa waa adiga.

— *Shaq*

Wax ka baro guuldaradaada. Haka cabsan in aad qalad sameyso. Khibraddu waa macallinka ugu wanaagsan, anigu waxaan wax ka bartay guuldarrooyinkayga.

— *Erik Spoelstra*

Had iyo jeer dareenkaagu ha ku hoggaamiyo. Marnaba ha weyddiin naftaada in ay macquul tahay iyo in kale.

— Deepak Chopra

Quruxda gabadhu ma aha dharka ay xidhan tahay, sida ay u eeg tahay, ama sida ay timaheeda u shanleyso. *— Audrey Hepburn*

Waxa aynnu u baahannahay in aynnu mustaqbalka fog eegno oo aynnu shiishka saarno meel sare oo fog.

— Paul Biya

Waxa aan ogaaday nolosha meel kasta oo aad rabto in aad ka gaadho in ay jirto waddo loo maro, haddii aad adigu si dhab ah u rabto in aad halkaas gaadho.

— Langston Hughes

Waa in aad si ribban diiradda u saartaa hadafyadaada si aad ugu guulaysatid hawlgalkaaga.

— A.P.J. Abdul Kalam

Miyaynaan garowsan in kalsoonida naftu ka timaaddo ku tiirsanaanta naftaada?

— A. P. J. Abdul Kalam

Dhanbaalka aan u dirayo dhallinyartu waa in ay yeeshaan dhiirranaan ay si ka geddisan ugu fekeraan, dhiirranaan ay wax ku ikhtiraacaan, ku soo gaalaabixiyaan goobaha aan la helin, dhiirranaan ay ku daahfuraan ma-suurtgalayaasha, ku qabsadaan dhibaatooyinka iyo guusha. Kuwani waa astaamo heersare ah oo

ay tahay in ay u shaqaystaan! Waa kaa dhanbaalkaygii dhallinyartu.

— *A.P.J. Abdul Kalam*

Dhammaanteen ma wada lihin hibooyin isle'eg, balse waxa aynu haysannaa fursado isle'eg oo aynu ku kobcin karno hibooyinkeenna!

— *A.P.J. Abdul Kalam*

Marka rejooyinkaagii iyo yoolashaadii digaandigaha noqdaan, hadhaaga burburka fadhfadh; laga yaabaa in aad ka dhex heshid fursad dahabi ah e!

— *A.P.J. Abdul Kalam*

Waxa aad u muhiim ah in aynaan hilmaamin in waxa aynu nahay ka mudan yahay waxa aynu qabanno.

— *James HudsonTaylor*

Marar badan ayay dhib igu dhici; marar badan ayaan ka soo kaban. Layma jabin doono. Ma oggolaanayo in niyaddayda la jabiyo.

— *Banana Yoshimotoaato*

Filashooyin sarreeyaa waa furaha wax walba.

— *Sam Walton*

Haddii aad si dhab ah wax u rabto, waxa aad heli doontaa habkii aad ku hanan lahayd. Haddii aanad si dhab ah u rabinna, waxa aad heli doontaa cudurdaar.

— *Jim Rohn*

Xataa haddii aanad lahayn wax kalsooni ah, waa in aad isu eekaysid sidii ruux leh.

— *Ashton Kutcher*

Waxa keliya ee aad mararka qaar gacanta ku haysaa waa aragtida. Adigu xaaladahaaga gacanta kuma haysid. Laakiin waxa aad dooran kartaa sida aad xaaladdaas u arkaysid.

— *Chris Pine*

Muhiimaddu ma aha xaaladda, laakiin waa sida aad uga falceliso xaaladda.

— *Zig Ziglar*

Bar iftiimaysa ayaa ku taal daruur kasta oo mugdi ah.

— *Bruce Beresford*

Waa in aynu nafaheenna ka xoraynaa rejada ah in baddu degi doonto. Waa in ayu barano sidii aynu badda ugu socdaali lahayn dabaysha oo kacsan.

— *Aristotle Onassis*

Ha sugin fursado aan caadi ahayn. Qaabee munaasabadaha caadiga ah oo ka dhig iyaga wax aad wanaag.

— Orison Swett Marden

Duruufta aad hadda ku jirto ma go'aamiso meesha aad tegi kartid; waxa keliya ay go'aamisaa meesha aad ka bilaabaysid.

— Nido Qubein

Marka aad guusha ugu baahato sida aad neefta ugu baahan tahay oo kale, markaas waa aad guuleysan doontaa.

— Eric Thomas

Jooji in aad si yar u hawlgashid. Waxa aad tahay koon guuraya e!

— Jalaala'ddiin AlRumi

Shalay waxa aan ahaa **xariif** waxa aanan isku deyayay in aan adduunka wax ka beddelo, maantase waxa aan ahay **xakiim** oo waxa aan beddelayaa naftayda!

— Jalaala'ddiin AlRumi

Kuma lihi waa ay fududaan doontaa – waxa aan ku leeyahay waa ay u qalmi doontaa dhib kasta oo loo maro. *— Arthur Williams*

Habeen kasta oo madow, waxaa ka danbeysa maalin ifaysa.

— Tupac Shakur

Ha rejo-dhigin. Marka qorraxdu dhacdo, dayaxa ayaa soo baxa.

— Qoraha lama yaqaan

Haddii aad oroddo, laga yaaba in aad fashilanto. Haddiise aanad ordin, hubaal waa aad fashilmi!.

— Jesse Jackson

Madaxa sare u qaad, shafka taag. Mararka qaar waxa ay noqotaa mugdi, laakiin waagu wuu beryi.

— Jesse Jackson

Waa in aad wax hurtaa si aad wax wanaagsan u sameyso!

— Zora Neale Hurston

Ilaali ballan kasta oo aad qaaddo; keliya ballanqaad ballanta aad ilaalin karto.

— Anthony Hitt

Qorshe wanaagsan oo hadda la qabto ayaa ka fiican qorshe dhammaystiran oo toddobaadka soo socda la qorsheysto.

— George S. Clason

Ma jiro wax aanad noqon karin, ama aanad samayn karin, ama aanad heli karin. Waxa aad tahay abuure heer sare ah.

— Esther Hicks

Tallaabada ugu horreysaa waa in ay gabi ahaanba kuu caddahay waxa aad rabto. — *John Assaraf*

Ma jiro wax la yidhahdo gefaf ama guuldarrooyin; keliya waa casharo wax laga barto.

— *Denis Waitley*

Haddaba soco. Dhac. Adduunku wuxuu u eeg yahay si kale marka aad hoos ka soo eegeysid.

— *Oprah Winfrey*

Marka wax dhacaan, way dhaceen. Dib ha u eegin. Hore uga soco hadafkaaga kan xiga.

— *George C. Marshall*

Walxuhu laga yaabaa in ay u yimaaddaan kuwa iska suga, balse waxa u yimmaada walxaha kuwa turunturrooday.

— *Abraham Lincoln*

Marka aan wax qorshaynayo, ma sii saadaaliyo guuldarada, sida ay doonto cimiladu ha ahaatee. — *Jay Mullings*

Marna kama aad daahin in aad noqoto wixii aad noqon lahayd.

— *George Elliott*

Dhammaystirku ma aha wax la gaadhi karo, laakiin haddii aynu eryanno dhammaystir, waxa aynu gaadhi karnaa heer sare.

— Vince Lombardi

Waxaa laga yaabaa in aanad ogaan natiijada ka imanaysa ficilkaaga, laakiin haddii aanad waxba samayn, ma jiri doonto wax natiijo ahi.

— Mahatma Gandhi

Tanna, sidoo kale, waa laga baxayaa.

— Napoleon Hill

Sida ay doonaan ha u badnaadaan yoolalka aad gaadhay, waa in indhahaagu sare eegaan.

— Jessica Savitch

Bari iyo galbeed toona eegi meyno: hore uunbaynu eegaynaa.

— Kwame Nkrumah

Wax kasta in aanay suuragal ahayn ayay ula muuqdaan dadka aan weligood waxba isku deyin.

— Jean-Louis Étienne

Haddii aan lagu dhalleecayn, waxa ay u badan tahay in aanad hayn wax guul ah. *— Malcolm X*

Waxa aad rabtaa in aad duusho… waa in aad iska dhigtaa wax yaabaha ku cuslaynaya.

— Toni Morrison

Bogsashadu waxa ay ka billaabmataa meesha dhaawacu ku gaadhay.

— Alice Walker

Ma noqon karno waxa aynnu rabno in aynnu noqonno innagoo iska joogna halkii hore.

— Max De pree

Sidee ayay noqon lahayd noloshu haddii aynaan haysan dhiirrani aynu wax (Waxa ay doonaan ha noqdaane) iskugu dayno?

— Vincent Van Gogh

Haddii aanad waxba halis gelin, markaas adiga ayaa halis geliyay wax walba. *— Geena Davis*

Wax dhib ah kaa soo gaadhi maayo in aad mustaqbalka ka filato wanaag. Had iyo goor oohintaada dib baad u dhigan kartaa.

— Lucimar Santos De Lima

Cudurdaarradu waa musmaarrada loo isticmaalo in lagu dhiso aqalka guuldarrada. *— Bill Rechin*

Reer galbeedku ma aha dad caqli badan, innaguna ma nihin doqommo. Keliya waxay dhiirrigeliyaan kooda fashilma ilaa iyo intuu ka guulaysanaayo, innaguna waxa aynu la dagaallannaa keena guulaystay ilaa iyo inta uu ka fashilmaayo.

— Ahmed Zewail

Haddii aad aragto waddo aan caqabado lahayn, waxa ay u badan tahay in aanay meelna kuu hoggaamineyn.

— Frank A. Clark

Sirta ka danbaysa in aad hore u socotaa waa tallaabada oo aad billawdo!

— Agatha Christie

Cidina ma burburin karto xadiidda (Iron), balse daxalaysigeedu waa burburin karaa. Sidaa oo kale, cidina ruuxa ma burburin karto, balse khayaaliga maskaxdiisa ayaa awooda in uu burburiyo!

— Mufti Abdul Rahman

Kan goor hore caawiyaa wuxuu caawiyey laba jeer.

— Tadeusz Mazowiecki

In aad ogaato waxa saxda ah oo aanad sameyn waa fuleynimada ugu weyn.

— Confucius

Ninka aan lahayn khiyaal-abuur, ma laha baalal.

— Muhammad Ali

Habka ugu fiican ee aad riyadaada ku rumayn kartaa waa in aad kacdo. *— J. M. Power*

Mid kasta oo raba in uu gaadho yool fog waa in uu qaado tallaabooyin yaryar oo badan.

— Helmut Schmidt

Si aad dadka u fahantid; naftaada fahan ugu horraynta!

— Maxamud Ciraaqi

Haddii aad naftaada ka shakidid, waxa aad ku istaagaysaa dhul gariiraya!

— Henrik Ibsen

Kuuma suurtogal aha in aad ka cabsatid guuldarradu, waayo waa jidka keliya ee kugu ridaya guusha!

— LeBron James

Naftaada waxa aad ka dhigi kartaa mid faraxsan ama mid murugeysan, waa ay isle'eg yihiin dedaalka kaaga baxaya labadaas.

— Ray Bradbury

Ha ku xaddidin maalgashigaaga dhaqaalaha adduun. Ku maalgeli naftaada wax uun, kadibna waxaa aad abaalmarin u heli doontaa hodantinimo.

— *Charles Schwa*

Go'aanso waxa aad rabto, go'aanso waxa aad diyaarka u tahay in aad ku beddelato si aad u hesho. Aasaas waxyaabaha aad mudnaanta siinayso kadibna u dhaqaaq sidii aad uga shaqayn lahayd.

— *H. L. Hunt*

Weligaa hoos ha u dhigin madaxaaga. Mar walba sare u qaad. Adduunka indhaha indhaha u saar.

— *Helen Keller*

Marna dib berri ha ugu dhigin wax aad maanta awooddo in aad qabatid.

— *Benjamin Franklin*

Wixii aanad maanta bilaabin, weligood ma dhammaan doonaan berri.

— *Johann Wolfgang von Goethe*

Marka wax walba ay u muuqdaan in ay adiga kaa soo hor-jeedaan, xusuuso in diyaaraddu ay kacdo iyadoo dabayshu kasoo hor-jeeddo, ma aha iyadoo dabayshu la jirto.

— *Henry Ford*

Waxaa ka fiican in aad saddex saacadood soo hor-dhacdo, intii aad hal daqiiqo dib u dhici lahayd.

— William Shakespeare

Ka bilow halka aad joogto. Isticmaal waxa aad haysato. Samee waxa aad awoodo.

— Arthur Ashe

Mustaqbalkaagu wuxuu ku xidhanyahay waxa aad maanta sameyso.

— Mahatma Gandhi

Waxaa jirta hal waddo oo keliya oo looga fogaan karo cambaaraynta: waxba ha sameyn, waxba ha dhihin, waxna ha noqon.

— Aristotle

Wax kasta oo aad sameyn karto, ama aad ku riyoon karto, bilow iyada. Indho la'aantu waxa ay leedahay hanadnimo, awood iyo indha-sarcaad. *— Johann Wolfgang von Goethe*

Had iyo jeer samee waxa aad ka cabsatid in aad sameysid.

— Ralph Waldo Emerson

Haddii aad sameysid wixii aad weligaaba sameyn jirtay, waxa aad heli doontaa wixii aad weligaaba heli jirtay.

— Tony Robbins

Macno ma sameyneyso meesha aad ka timi. Arrinka macnaha sameynayaa waa halka aad u socoto. — *Brian Tracy*

Waxa aan rumaysanahay geesinimada keliya ee qof kasta uu u baahan yahay waa geesinimada lagu daba-kaco riyooyinka adiga kuu gaarka ah. — *Oprah Winfrey*

Haddii aad ku riyoon karto, waa aad gaadhi kartaa.

— *Zig Ziglar*

Yool aan lahayn qorshe waa rabitaan keliya.

— *Larry Elder*

La soco riyoodayaasha, rumeeyayaasha, dhiirranayaasha, farxayaasha, qorsheeyayaasha, dadka guulaystay ee madaxoodu daruuraha joogo lugahooduna dhulka. U oggoloow in ruuxdoodu kugu daarto dab adiga si aad dunidan uga tegtid adiga oo ka wanaagsan markii aad heshay!

— *Wilferd Peterson*

Haddii aanad dhibaatooyinkaaga ku soo xallin tagtadaada, ilaa timaaddadaada ayay ku daba socon!

— *Qoraha lama yaqaan*

Marnaba lama gaadhin wax wanaagsan khatar la’aan.

— *Niccolo Machiavelli*

Qofna weligiis buurta kuma fuulin eegmo keliya.

— *Dr. Phillips*

Shalay waa ay tagtay. Berri weli lama gaadhin. Maanta oo keliya gacanta inoogu jirta. Ina keena aynu bilowno e. — *Teresa*

Marnaba ma fashilmi doonno marka aynu isku dayeyno in aan sameyno waajibkeenna, mar walba waa aynu fashilmayna marka aynu dayacno in aan waajibkeenna gudanno.

— *Robert Baden-Powell*

Qofna abid sabool kamuu noqon in uu wax bixiyo.

— *Anne Frank*

Isu-diyaarinta ugu wanaagsan ee berri waa u-sameynta maanta sida ugu fiican.

— *H. Jackson Brown, Jr.*

Weligaa haka niyad jabin wax aad maalin kasta ka fekertid.

— *Sir Winston*

Badi waxyaabaha muhiimka ah ee laga qabtay adduunkan waxaa qabtay dad, kuwaas oo aan joojin isku deyidda marka aanay muuqan in ay wax rejo ah yeelan karaan.

— *Dale Carnegie*

Niyadda ha iska jebin. Badanaa waa furaha ugu danbeeya xidhmada furayaasha ka furaya qafulka.

— Qoraha la ma yaqaan.

Ma jiraan wax ka sharaf badan in aad halis noloshaada u geliso dalkaaga dartood. *— Nick Lampson*

Haddii aanad diyaar u ahayn in aad halis u gasho wax aan caadi ahayn, waxa aad joogi doonta halkii iska caadiga ahayd.

— Jim Rohn

Haddii aanad qorsheysan nolosha adiga kuu gaarka ah, waxaa jiri doonta fursad ah in qof kale qorshihiisa aad ku dhacdo. Bal qiyaas waxa ay kuu qorsheeyeen? Ma badna. *— Jim Rohn*

Waxa ugu muhiimsan waa in aad isku daydo in aad dhiirrigeliso dadka si ay ugu wanaagsanadaan waxa ay rabaan in ay qabtaan.

— Kobe Bryant

Waxaa jira hab ka fiican oo loo sameeyo – soo hel.

— Thomas A. Edison

'*Suurtagal*' ma aha waa eray laga helo keliya qaamuuska doqommada. *— Napoleon Bonaparte*

Haddii aad hayso tufaax, aniguna aan haysto tufaax, misna aan isweydaarsanno tufaaxyadaas, weli mid kasto oo innaga mid ah waxa uu heystaa hal tufaax; balse haddaad heyso fekrad aniguna

aan hayo fekrad misna aan isweydaarsanno fekradahaas, ka dib mid kasto oo innaga mid ah waxa uu heystaa labo fekradood.

— *George Bernard Shaw*

Waxaan leeyahay falsafad aad u fudud: Buuxi wixii madhan. Bannee/faaruqi wixii buuxa. Xoq meesha cuncunaysa.

— *Alice Roosevelt Longworth*

Ma jiro habeen iska caabbin kara qorrax soo-baxa ama dhibaato iska caabbin karta rejada.

— *Bernard Williams*

Socodka kuma baratid xeerar la raaco. Waxa aad ku barata socosho, iyo kufkufid.

— *Richard Branson*

Samee waxa aad jeceshahay, kadibna lacagtu iyadaa ku soo daba kici doonta.

— *Marsha Sinetar*

Habka ugu fiican ee lagu ogaado in aad aamini kartid qof waa in aad aamintid.

— *Ernest Hemingway*

Waa inta lagu jiro waqtiga madow marka ay tahay in aynu diiradda saarno sidii aan u arki lahayn iftiinka.

— Aristotle Onassis

Rejadu waa awoodda lagu arko in uu jiro iftiin aanu saameyn dhammaan gudcurku. *— Desmond Tutu*

Mararka qaar hirarka isbeddelka dhexdooda, ayaynu ka heli karnaa dhinaca aynu u socono ee saxda.

— Qoraha la ma yaqaan

Haddii aanay adkayn, qof walba waa uu qaban lahaa. Adaygeeda ayaa ka dhigay wax weyn.

— Tom Hanks

Haddii ujeeddada ugu sarraysa ee kabtanku ahaan lahayd in uu ilaaliyo markabkiisa, wuxuu weligiis u oolli lahaa dekadda.

— Thomas Aquinas

Haddii aad naftaada kalsooni siisid, waxaad jiidi karta ku dhawaad wax walba.

— Katy Perry

Marka hal albaab xidhmo, miyaadan ogayn, mid kale ayaa furma.

— Bob Marley

Dhiirrigelintu waa sida quud (cunto) maskaxda la siinayo. Kagama dhergaysid hal fadhi, waa in aad ku soo noqnoqodka badisaa. *— Peter Davies*

Dadka qaar ayaa sheega in aanay dhiirrigelintu dhammaanin. Hagaag, sidoo kale hadda maydhashaduna ma dhammaato, sidaa darteed ayaa la inoogula taliyaa maalin kasta in aynu qubaysanno. *— Zig Zigler*

Ha isdhiibin. Maanta sii hawshood, berrina u nooloow sida hanad (geesi).

— Muhammad Ali

Haddii aanu wuxu kaa bajinayn, kuma beddelayo.

— Fred DeVito

Qofka keliya ee ay tahay in aad ka wanaagsanaatid waa qofkii aad shalay ahayd.

— Qoraha lama yaqaan

Naftaada ku kalsoonoow. Waxa aad taqaannaa wax ka badan waxa aad u malaynaysid in aad taqaannid.

— Benjamin Spock

Haddii aanad duuli karin, orod. Haddii aanad ordi karin, lugee. Haddii aanad lugayn karin, guurguuro. Balse si kasta oo aad samaysid, ha joojin horusocodka!

— Martin Luther King, Jr.

Ha joojin hawsha marka aad daashid, balse jooji hawsha marka aad dhammaysid! *— Qoraha lama yaqaan*

Xusuusnow, maanta waa berridii aad ka werwersaneyd shalay.

— Dale Carnegie

Qofka aan geesinimo uu khataraha ku qaato lahayn, weligii nolosha wax naf leh ma soo hooyo.

— Mohamed Ali

Wanaagga aad maanta sameyso berri waa la illaawi doonaja. Si kasta oo ay ahaato wanaag samee.

— Kent M. Keith

Ka feker waxyaabaha quruxda badan ee hareerahaaga ku hadhay oo ku farax.

— Anne Frank

Wax kasta oo aad qabataa farqi ayay keenaan, markaa waa in aad doorataa nooca farqi ee aad rabtid in aad samaysid!

— Jane Gooball

Had iyo jeer waxa ay u muuqataa mid aan suuroobeyn ilaa la arko iyada oo la sameeyey. *— Nelson Mandela*

Haddii aynu ku kalsoonnahay waxa aynu aaminsannahay, waa in aynnaan ka cabsan xorriyadda fekerka.

— Tayyip Erdogan

U sheeg guddida tabnaanta ee madaxaaga ku shirsan in ay fadhiistaan oo ay aamusaan!

— Kathy Kendall

Gefafku waa albaabbada daah-furka!

— James Joyce

Ma tihid sabool haddii aad tahay bilaa lacag, waxa aad sabool tahay haddii aad tahay bilaa riyo.

— Randy Gage

Uma baqo qofka fekera xataa haddii uu lumo, waayo xaqa dib ayuu ugu soo noqon. Balse waxa aan u baqaa qofka aan fekerin xataa haddii uu dhabbada xaqa ku dhaco, waayo wuxuu ahaan doonaa sida bal dabayluhu wataan.

— Sh. Mohamed Al-qasali

Haddii aanu mugdi jirin, weligeen meynaan aragneen xiddigaha.

— Stephenie Meyer

Ku hay indhahaaga xiddigaha, lugahaagana dhulka.

— Theodore Roosevelt

Yoolalkaaga meel sare ku laal, hana istaagin ilaa aad halkaas gaadho.

— Bo Jackson

Dhib ma leh sida aayarka ah ee aad u socoto haddiiba aanad istaagayn. *— Confucius*

Khaladka keliya ee aan sameeyay waa in aanan garwaaqsan in aan qof sare ahay!

— Muhammed Ali

Qofka ka baqa in uu buuraha fuulo, cimrigiisa oo dhan wuxuu ku noolaadaa booraan.

— Imaam Shaafici

Ma noqon doontid waxa aad doonaysid in aad noqotid adiga oo kusii sugnaada waxa aad iminka tahay.

— Zig Ziglar

Qofna kuma dareensiin karo in aad tahay qof liita, adiga oo aan u oggolaan.

— Eleanor Roosevelt

Haddii aanad shay jeclayn, beddel. Haddii aanad beddeli karin, beddel sida aad u aragtidid iyo dhanka aad ka eegaysid.

— Maya Angelou

Qofna kuma siinayo madaxbannaani. Qofka kuma siinayo sinnaan iyo wax kale toona. Haddii raggannimo kugu jirto, adiga ayaa goosanaya.

— Malcolm X

Naftaada oo aad ahaataa waxa ay kaa dhigaysaa in aad dunidan kusoo kordhisay cid aan hore ugu noolayn.

— Edwin Eliot

Daqiiqad kastaa waa bilow cusub.

— T.S. Eliot

Maanta waa maalintaadii, buurtaadiina waa ay ku sugaysaa, ee tag oo qaad marinkaaga. *— Dr Seuss*

Ha ka oggolaan waxyaabaha aanad samayn karin in ay kaa hor istaagaan qabashada waxyaabaha aad samayn kartid.

— John Wooden

Raynraynta u weyni waa samaynta waxa dadku ku dhahaan ma samayn kartid.

— Walter Bagehot

Macno ma laha inta uu qalbigaagu murugaysan yahay, haddii aanad joojin rumaynta riyada aad rabto in ay run noqoto.

— Walt Disney

Waa in aanad lumin kalsoonida dadnimada. Dadnimadu waa sida badweynta; haddii dhawr dhibcood oo ka mid ah badda ay wasakhaysan yihiin, badda oo dhani ma wada wasakhaysna.

— Mohandas Karamchand Gandhi

Dulqaad yeelo. Wax kastaa waa kakan yihiin inta ayna fudayd noqon. *— Saadir*

Keli keli waxa aynnu qaban karnaa waxyar; wadajir waxa aynnu qaban karnaa wax aad u badan. *— Helen Keller*

Dhammaan riyooyinkeennu waxa ay noqon karaan run haddii aynu ku dhiirranno in aynu raacdaysano. *— Walt Disney*

Qaar badan oo guuldarreystay waa kuwa aan ogsooneyn sida ay ugu dhawaayeen guusha markii ay faraha ka qaadeen.

— Thomas Edison

Haddii aad rabto in aad u iftiintid sida cadceedda, lahow kulaylkeeda oo kale.

— Adolf Hitler

Ninka keliya ee aan qalad sameeyn weligii waa ninka aan waxba sameyn. *— Theodore Roosevelt*

Mustaqbalku magacyo badan ayuu leeyahay. Kuwa daciifka ah waxa ay u yaqaannaan ‘lama gaadhaan’, kuwa cabsadaa waxa ay

yidhaahdaan ‘lama yaqaan’, kuwa dhiirranna waxa uu u yahay ‘xaqiiqda durugsan’. — *Victor Hugo*

In aad dhimatid adigoo taagan ayaa ka fiican in aad noolaatid adigoo jilbahaaga dhulka ku haya.

— *Ernesto Che Guevara*

7
FARXAD

Farxadi waxa ay u sugnaatay ninka jebiya silsiladaha garaadka dhaawaca, kana guulaysta werwerka mar iyo mararba!

— *Ovid*

Waxa aan mar maqlay qeexitaankan: *Farxaddu waa caafimaad iyo xusuus gaaban*! Wanaagsanaan lahaydaa in uu aniga ahaan laha qofka hadalkaas yidhi, maxaa yeelay waa hadal dhab ah.

— *Audrey Hepburn*

Gabayga waxaa keena farxad badan ama murugo badan.

— *A. P. J. Abdul Kalam*

Marka aan qof wax siiyo ee aan eego wajigooda, waa ay i farxad gelisaa.

— *Jackie Chan*

Ha illaawin afkaaga looma abuurin oo keli ah in uu wax cuno hadal batana, ee sidoo kale, waxa loo abuuray in uu dhoolla-caddeeyo e!

— *Maxamed Radbaan*

Waxa ay ahayd in aad ka soo bilaabo xagga hoose oo aan si qunyar ah u gaadho meel kasta oo aad u taqaannid ‘figta’. Waa aan ku faraxsanahay in aan sameeyay.

— *Simon Cowell*

Farxadda runta ahi waa… ku raaxaysiga waqtiga hadda lagu jiro, iyada oo aanu ku ladhnayn ka werwerka mustaqbalku.

— *Lucius Annaeus Seneca*

Farxad waxa aad heli kartaa marka aad awooddo in aad naftaada ka xoreyso dhammaan waxyaabaha kaa jeedin kara farxadda.

— Saul Bellow

Haddii ay farxaddaadu ku xidhan tahay waxa qof kale sameeyo, waxa aan u malaynayaa dhibaataa ku haysata.

— Richard Bach

Waxa farxadda samaynayaa ma aha waxa aynu haysanno inta ay le’eg yihiin, laakiin waa intee in le’eg baynu ku raaxaysannaa.

— Charles Spurgeon

Ka jawaab wicitaan kasta oo ruuxdaada raalli gelinaya.

— Jalaala’ddiin AlRumi

Waxa aan gurigayga iska fadhiistaa aniga oo aan faraxsanayn murugaysnaynna, dhexdhexaad… waana isugu kay mid in aan keligay ahay iyo in la i weheliyaa!

— Mohamed Darwish

Dadku ma kala ogaado in ay tahay jiilaal iyo in ay tahay xagaa marka ay faraxsan yihiin.

— Anton Chekhov

Lacagtu ma keento farxad iyo hal-abuur. Hal-abuurkaaga iyo farxaddaada ayaa keena lacag.

— Sam Rosen

Farxaddu ma aha haysashada wax aad rabtay. Waa mahadinta waxa aad haysato.

— Qoraha lama yaqaan

Haddii aad faraxsan tahay, farxaddu iyada ayaa ku soo doonanaysa. Sababta oo ah farxaddu waxa ay timaaddaa meeshii farxadi taallo!

— Yogi Bhajan

Si aad u faraxdid waa in aad adeegsataa iftiinkaaga kuu gaarka ah!

— C.E. Jerningham

Qofka faraxsan ma aha qof ku jira xaalad aan isbedbeddalayn, laakiin waa qof ku jira dabeecad aan isbedbeddalayn.

— *Hugh Downs*

Waxa aynu kala doorannaa farxadda iyo murugada ka hor inta aynaan la kulmin.

— *Khalil Gibran*

Sababta aasaasiga ah ee farxad la'aantu weligeed may noqon xaalad, laakiin waa sida aad u aragto xaaladda.

— *Napoleon Hill*

Gabaygu wuxuu ku bilawdaa farxad kadibna wuxuu ku dhammaadaa xikmad.

— *Robert Frost*

Saaxiibtinnimadu waxa ay laba-laabtaa farxadaha waxaanay qaybisaa calool-xumada.

— *H. G. Bohn*

Alla maxaa ka farxad badan ruuxa marka uuna cidna macasalaamaynayn cidna uuna sugayn!

— *Maxamed Darwish*

Waxa aan bartay in aan ka raadiyo farxaddeyda xaddidaada damacayga, halkii aan isku deyi lahaa in aan raalli-geliyo.

— John Stuart Mill

Farxaddu waa sida dhunkashada. Waa in aad wadaagtaa iyada si aad ugu raaxaysatid. *— Bernard Melze*

Farxaddu ma aha wax aad waayo-aragnimo ka heshay, waa wax aad xusuusato.

— Oscar LeVant

Saynisku wuxuu innoo ballanqaaday runta. Weligiis innoomuu ballanqaadin nabad ama farxad midna.

— Gustave Le Bon

Farxadda ugu weyn ee noloshu waa in ay innaga dhaadhacsantahay in layna jecel yahay.

— Victor Marie Hugo

Ciddii tidhi lacagtu kuuma iibin karto farxad ma yaqaannaan meesha laga dukaameysto.

— Gittel Hudnick

Jacaylku waa sayidka furayaasha fura iriddaha farxadda.

— Oliver Wendell Holmes

Ma jirto farxad marka laga reebo ta ku jirta ogaanshaha in aynu wax ku guuleysannay. *— Henry Ford*

Laga yaabaa in waxqabadku aanu badanaa keenin farxad; balse wax farxad ahi kuma jirto waxqabad la'aanta.

— *Benjamin Disraeli*

Guushu waa helidda waxa aad rabto; farxadduna waa rabitaanka waxa aad heshay.

— *Dale Carnegie*

Mid ka mida furayaasha farxaddu waa xusuus xun.

— *Ritz Mae Brown*

Inta aad raadineyso farxad-gelinta dadka kale, waxa aad u heli doontaa naftaada farxad.

— *Qoraha la ma yaqaan*

Ma soo dhici doontid haddii aanad fuulin [meel sare]. Laakiin wax farxad ahi kuma jirto in aad noloshaada oo dhan ku noolaatid dhulka.

— *Qoraha la ma yaqaan.*

Ha u oggolaan farxaddaadu in ay ku tiirsanaato walxo aad waayi kartid.

— *C.S. Lewis*

Aqoonta waxa suuragalka ahi waa bilowga farxadda.

— George Santayana

Laga yaabaa in aanad noqon qofka ugu sarreeya, laakiin haddii aad qabaneyso wax aad jeceshahay, waxaa ku jira farxad ka badan in hodan ama caan la noqdo. *— Tony Hawk*

Guurka farxadda lehi waa wada-hadal dheer kaas oo u muuqda in uu aad u gaaban yahay.

— Andre Maurois

Ma aha jacayl la'aanta, laakiin saaxiibtinnimo la'aan ayaa ka dhigta mid aan farxad lahayn guurka.

— Friedrich Nietzsche

Habka ugu fiican ee naftaada loo farxad geliyo waa in aad qof kale farxad geliso.

— Mark Twain

Farxaddu waa marka fekerkaaga, odhaahdaada iyo ficilkaagu iswaafaqaan.

— Mahatma Gandhi

Waxa aan doorbidayaa in aan naf ahaantay ku faraxsanaado intii aan ku murugoon lahaa aniga oo isku dayaya farxadgelinta cid kale!

— J. Cole

Dadka qaarbaa farxadda sabab u noqda meel kasta oo ay tagaan; qaarna, meel kasta oo ay ka tagaan ayay farxadda sabab ugu noqdaan!

— Oscar Wilde

Markii aan 5 jirka ahaa ayay Hooyaday ii sheegtay in furaha noloshu yahay farxadda. Markii aan dugsiga tegay ayay i wayddiiyeen waxa aan rabo in aan noqdo marka aan koro, waxa aan u qoray '*qof faraxsan.'* Waxa ay ii sheegeen in aanan fahmin wayddiinta aniguna waxa aan u sheegay in aanay iyaguna fahmin nolosha!

— John Lennon

Guushu ma aha furaha farxadda. Farxadda ayaa ah furaha guusha. Haddii aad jeceshahay waxa aad qabaneysid, waad guuleysan doontaa.

— Albert Schweitzer

Dadku keliya waxa ay farxi karaan marka ayna iska dhaadhicin waxa loo nool yahayba in ay tahay in la farxo oo keliya.

— George Orwell

Qof kasta oo faraxsani cid kalena waa uu farxadgelin karaa. Qof kasta oo leh dhiirranaan iyo iimaanna uma dhinto quus.

— Anne Frank

Dadka ugu badan ee farxadda iyo badhaadhaha ku nooli waa dadka eega waxa ay haystaan, balse aan eegin waxa dad kale gacantooda ku jira.

— Ibraahim al-fiqi

8
GANACSI

Hodanku wuxuu dhacaa saboolka, saboolkuna midkoodba kan kale ayuu sii dhacaa.

— *Sojourner Truth*

Marnaba kama tijaari doontid in aad qof kale u shaqayso.

— Felix Dennis

Ma jiro wax sharci-darro ah haddii boqol nin oo ganacsato ahi ay go'aansadaan in ay sameeyaan.

— Andrew Young

Ha uga faa'idaysan diintaada in aad adduun ku dheeftid. Aakhiro ayaa lagu dheefaa diinta e.

— Sh. Abdulqadir Al-Jilani

Ganacsiga dhexdiisa, wax naf leh qof keli ahi ma qaban karo ee waxa qabta koox wada jirta. *— Steven Jobs*

Fursadaha ganacsi waa sida basaska oo kale, mar walba waxaa imanaysa mid kale. **—** *Richard Branson*

Meel kasta oo aad ku aragto ganacsi guuleystay, qof baa mar sameeyey go'aan geesinnimo ah. *— Peter Drucker*

Sirta ganacsigu waa in aad ogaatid wax aanay cid kale ogayn.

— *Aristotle Onassis*

9
GUUL

Guuldarradu waa qayb ka mida guusha.

— *Hank Aaron*

Guushayda waxaa aan u sababeeyaa tan: Weligey maan cudur-daaran waxna uma cudur-daarin.

— *Florence Nightingale*

Kalsoonida iyo hawlkarnimadu waa dawooyinka u *wanaagsan* ee lagu dabiibi karo xannuunka loo yaqaan guul-darrada.

— *A.P.J. Abdul Kalam*

Marka aad guusha koowaad gaadhid ha isku nasan, sababta oo ah haddii aad gefto guusha labaad, dibno badan ayaa la soo diyaar ah in ‘guushaadii hore nasiib ahayd‘!

— *A.P.J. Abdul Kalam*

Ha akhriyin sheekooyinka guusha ka sheekeeya; hal farriin uun baad helaysaaye. Akhrise sheekooyinka jabka ka sheekeeya; aragtiyo lagu guulaysto ayaad helaysaaye!

— *A.P.J. Abdul Kalam*

Si aad u noqotid horyaal weyn waa in aad aamintaa in aad tahay ka u wanaagsan – haddii aanad xataa ahayn, iska dhigdhig in aad tahay!

— *Mohamed Ali*

‘Guul-darro,‘waa eray aan agtayda laga aqoonin!

— *Muhammad Ali Jinnah*

Guuldarradu waxa ay timmaaddaa keliya marka aynu hilmaamno ujeeddooyinkeenii iyo mabaa’di’deenii.

— *Jawaharlal Nehru*

Guushu waa wadarta dedaallada maalinlaha ah ee sida joogtada ah loo sameeyo.

— *Robert Collier*

Dadka qaar ayaa ku riyooda guusha halka kuwo kalena ay u kacaan oo ay shaqaystaan.

— *Qoraha lama yaqaan*

Guushu ma aha wax ka badan waxoogaa dhishbiliinyo fudud ah, oo maalin kasta lagu dhaqmo.

— *Jim Rohn*

Haddii aad ku laasho yoolkaaga meel aad u sarreysa oo aad guuldarraysato, waxa aad ku soo dhici doontaa meel ka sarreysa guusha dadka kale oo dhan.

— James Cameron

Guushu waa inta aad dib u soo booddo marka aad dhulka ku dhacdo. *— George S. Patton*

Haddii aad ogtahay in aad guuldarreysan doontid, markaas u guuldarreyso si sharaf leh.

— Cate Blanchett

Marka aad guusha ugu baahato sida aad neefta ugu baahan tahay oo kale, markaas waa aad guuleysan doontaa.

— Eric Thomas

Ninka guul soo hoyn doonaa wuxuu ka fa'iideystaa qaladaadkiisi hore wuxuuna isku dayaa in uu waddo tii hore ka duwan qaado.

— Dale Carnegie

Guushu waxa ay kuu abuurtaa cadow badan. Waxa aan jeclaan lahaa in aanay sidaa ahaanin. Waxa ay noqon lahayd cajiib in aad ku raaxaysato guul adiga oo aan ka arkayn xaasidnimo indhaha dadka kugu hareeraysan. *— Marilyn Monroe*

Joogiddaada iyo la'aantaadu Islaamka waa isugu mid, balse adigu Islaamka la'aantii waad khasaaraysaa!

— Ahmed Deedat

Anshaxu waa biriishka u dhexeeya yoolka iyo guusha.

— Jim Rohn

Marnaba maad guuldarreysan ilaa aad joojisid iskudayga.

— Mike Ditka

Boqolkiiba sagaashan iyo sagaal guuldarrooyinku waxa ay ka yimaaddaan dadka leh caadada ah in wax walba cudurdaar loo sameeyo.

— George Washington Carver

Ninka la yimaadda fekrad cusub waa lala yaabaa ilaa iyo inta fekerkiisu ka guuleysanayo.

— Mark Twain

U feker sidii nin-hawleed; una hawlgal sidii nin-fekereed!

— Henri Louis Bergson

Aynu maalinteenna hurno si ay carruurteennu u helaan berri ka wanaagsan!

— AbuBakar Zaynal-Caabidiin

Waa in aad yeelataa yool ujeeddo-fog si aad iskaga ilaalisid in aad ku jahawareerto guuldarrooyinka yaryar.

— Charles C. Noble

Waxa carruurtaada ka dhigi doona in ay guulaystaan ma aha waxa aad u qabatay iyaga, laakiin waa waxa aad bartay iyagu in ay qabsadaan.

— Ann Landers

Ma jiro wax la yidhaahdo guuldarro. Waa laba mid uun; in aad guuleysatay ama in aad waxbaratay.

— Kevin Kruse

U riyood si weyn kuna dhac guuldarrada.

— Norman Vaugha

Waxa aad u dhalatay in aad guuleysato, laakiin si aad guuleyste u noqoto, waa in aad qorsheysaa sidii aad u guuleysan lahayd, isu diyaarisaa sidii aad u guuleysan lahayd, waana in aad filataana in aad guuleysatid.

— Zig Ziglar

Ilaa labada dhinac guuleystaan, ma jirayo heshiis waarayaa.

— Jimmy Carter

Siddeetan boqolkiiba guushu waa isa-soo-xaadirin.

— Woody Allen

Haddii aan dib ugu noqonno 1800, qof walba wuxuu ahaa sabool. Waxa aan ula jeedaa qof walba. Kacaankii Warshadaha ayaa bilowday, kadib waddamo badan ayaa ka fa'iideystay, laakiin si kasta oo ay tahay cid walbaa ma ay gaadhin fa'iidadu.

— Bill Gates

Guushu waxa ay leedahay qaacido fudud: samee sida ugu fiican, laga yaabaa in dadku ka helaan.

— Sam Ewing

Mararka qaar dhibaatadu waa waxa aad u baahan tahay in aad wajahdo si aad u noqoto qof guuleysta.

— Zig Ziglar

Ma aha doonista guushu waxa kaa dhigaya in aad guuleysatid; waa diidista in aad guuldareysatid.

— Qoraha la ma yaqaan.

Ragga iyo dumarka guuleystay waa kuwa socodka aan joojin. Qalad waa ay sameeyaan, laakiin ma joojiyaan socodka.

— Conrad Hilton

Si aad u guuleysato, rabitaankaaga guushu waa in uu ka weynaadaa cabsidaada guuldarada.

— Bill Cosby

Haddii aan baabbi'inno xuquuqda aadanaha iyo dhawrista sharciga si wax looga qabto argagixisada, waa ay innaga guuleysatay argagixisadu.

— Joichi Ito

Hanashada wax weyn badanaa waxa ay ka dhalataa huridda wax weyn, weligeedna may noqon natiijada danaysinnimada ka dhalata.

— Napoleon Hill

Sida loo guuleystaa ma aha wax sir ah. Waa natiijada isdiyaarinta, shaqo adag, iyo in wax laga barto guuldaradii hore.

— Colin Powell

Ma jiro nin guulaystay oo aanay ka danbeyn naag wanaagsani. Xaas ama hooyo, haddii uu labadaba isku haysto, labo jeer buu barakeysan yahay.

— Godfrey Winn

Haddii aad ku guuldarraysato in aad qorshe sameysato, waxa aad qorshaysatey guuldarro.

— Qoraha la ma yaqaan

Guushu aad bay u fududdahay. Samee waxa saxa ah, u samee sida saxa ah, waqtiga saxda ah.

— Arnold H. Glasow

Wax kasta oo u qalma in la sameeyo waxa ay u qalmaan in si aayar ah loo sameeyo.

— Mae West

Waa ay adag tahay in laga guuleysto oo laga adkaado qof aan weligiis isdhiibeyn. *— Babe Ruth*

Habka ugu gaaban ee wax badan loo sameeyo waa in aad hal wax samayso markiiba. *— Sydney Smiles*

Haddii aynu u tababbaranno si xun, waxaynu u ciyaarnaa si xun, sababtuna waa sida xun ee aynu u tababbarannay. Farqiga u dhexeeya in aad guulaysato iyo in aad guuldarraysato waa in aad wax saxdo ama aad wax khaladdo. *— Shiv Khera*

Marnaba ma beddeli doontid noloshaada ilaa aad beddesho waxyaabaha aad maalin walba samaysid. Sirta guushaadu waa in aad hesho waxyaabaha aad maalin walba u qabato si joogto ah.

— Qoraha la ma yaqaan

Waxa aan idin dhahayaa nasiibku waa marka ay fursad kuu timmaaddo iyadoo socota adna aad u sii diyaargarowday.

— Denzel Washington

La shaqaynta dadka waaweyn waxa ay kaa dhigeysaa qof weyn; waxaad baran wax badan, sidoo kale waxa aad ka helaysa qibrad iyo kalsooni aad hore ugu sii waddo xirfaddaada. *— Nas*

Haddii aad guuleysato, waxaad abaalmarin u heli doonta asxaab beena iyo cadow run ah. Si kasta oo ay ahaato guuleyso.

— Kent M. Keith

Yoolalka iyo ujeeddooyinkuba waxa ay ku saleysan yihiin aragtiyo iyo aasaas.

— Abdolkarim Soroush

Diyaaraddu badanka waxa ay ammaan ku tahay in ay garoonka iska fadhido, balse looma samaynin in ay sidaa ahaato. Mararka qaar waa in aad gashaa haliso micno samaynaya si aad u gaadhid heer sarreeya!

— Chandra Sekhar Azad

Anigu ma aaminsani qaadashada go'aanka saxsan, waxa aan qaataa go'aanka ka dibna waxa aan ka dhigaa mid saxan!

— Muhammad Ali Jinnah

Sirta isbeddelku waa in aad diiradda saartid tamartaada oo idil, tamartaasna aanad u isticmaalin burburinta wixii duugga ahaa balse aad u adeegsatid dhisidda wax cusub!

— Socrates

Qofka guulaystaa waa kan leh himilo kaas oo aan weligii niyad jabin.

— Nelson Mandela

Weynaanta uu qaran leeyahay waxaa lagu cabbiraa sida ay ula dhaqmaan kuwooda jilicsan.

— Mahatma Gandhi

Gabadha guulaysatay waa tan ka dhisi karta sees adag jaajuurrada ay ku soo tuurtuuraan dadka kale!

— Pablo Neruda

Dariiqa keliya ee aad hawl weyn ku qaban kartaa waa in aad jeclaato waxa aad qabanayso.

— Steve Jobs

Weli waxaan cagahayga ku hayaa dhulka, keliya waxaan xidhanahay kabo ka fiican kuwii hore.

— Oprah Winfrey

Xorriyaddu waligeed laysma siiyo; waa lagu guuleystaa.

— A. Philip Randolph

Anigu waa aan aqbali karaa guuldarrada; laakiin ma aqbali karo in aan laysku dayin.

— Michael Jordan

Raggu waa waxa ay hooyooyinkood ka dhigaan.

— Ralph Waldo Emerson

Erdogan ayaa mar sheegay in ay dimuqraadiyaddu tahay sida bas oo kale. ‘Marka aan gaadho halkii aan u socday, ayaan ka degayaa.’ *— King Abdullah II of Jordan*

Falcelinta aad ka bixisid guul-darradu waxa ay go’aamisaa dhererka guushaada.

— Robin Sharma

Ma jiro nin leh xasuus fiican oo ku filan si uu beentiisa ugu guuleysto.

— Abraham Lincoln

Guushu waxa ay ku xidhantahay is-diyaarin hore, is-diyaarin la’aan waa la hubaa in aad guul-dareysan doonto.

— Confucius

Farqiga u dhexeeya qofka guuleystay iyo kuwa aan guuleysan ma aha awood la’aan, ma aha aqoon la’aan, lakiin waa doorbidid doonis la’aan.

— Vince Lombardi

Ujeeddadaadu yaanay ahaan guul haddii aad rabtid; keliya samee waxa aad jeceshahay oo aamin, kadib iyadaa guushu si caadiya iskaga imaan doonta.

— David Frost

Hawlaha la qabto waxa ugu roon fulinta waxa uu Eebbe ku faray, ka dheeraanshiyaha waxa uu Eebbe kaa reebay iyo ku kalsoonaanta waxa Eebbe agtiisa ahaaday!

— Omer Bin Khaddaab

Had iyo jeer samee sida ugu fiican. Waxa aad hadda beerato, waxa aad goosan mar danbe.

— Og Mandino

Guul-darradu waa keliyaata fursad labaad si aad mar labaad u bilawdid, balse markan xariifnimo dheeraad ah ayaa lagaa rabaa.

— Henry Ford

Guushu waa naftaada oo aad jeclaatid, waxa aad samaynaysid oo aad jeclaatid iyo habka aad u samaynaysid oo aad jeclaatid.

— Maya Angelou

Guushu ma aha inta lacag ah ee aad samaysid, guushu waa inta farqi ee aad dadka noloshooda ku samaysid.

— Michelle Obama

Si aynu u guulaysanno, ugu horrayn waa in aynu aamminnaa in aynu guulaysan karno. *— Nikos Kazantzakis*

Weligay kuma aan riyoon guusha, waan u shaqaystay.

— Estee Lauder

In aad sii ahaato qofka aad tahay adduunkan sida joogtada ah iskugu dayaya in uu kaa dhigo wax kale waa guusha ugu weyn.

— Ralph Waldo Emerson

Marka ay caddahay in aanad yoolkaagii gaadhi karaynin, ha beddelin yoolka ee beddel dhabbada aad u maraysid.

— Confucius

Guushu kuu imaan meyso, waa in aad adigu u tagtaa.

— Marva Collins

Waxaannu nahay duul uu Eebbe ku sharfay diinta Islaamka, haddii aannu ka raadinno sharafta meel kalana, Eebbe wuu ina sharaf-tiri.

— Omer Bin Khaddaab

Fashilaaddu ima loodin karto weligay mar haddii bar-dhammaadka guushaydu aad u xooggan yahay.

— Og Mandino

Maan guuldarreysan. Waxaan kaliya helay 10,000 oo waddo oo aan shaqayneyn.

— Thomas Alva Edison

Hal fure oo muhiim u ah guushu waa kalsoonida. Hal fure oo muhiim u ah kalsooniduna waa diyaargarowga.

— Arthur Ashe

Dadka ka cabsada in ay guuldarreystaan marnaba ma dhadhamin doonaan farxadda guusha. *— Pete Zafra*

Waxaan soo guuldarreystay marar badan —taasina waa sababta aan u guuleystay.

— Michael Jordan

Weligaa ha soo hadal qaadin ‘Guuldarro’. Adeegso erayada ay ka mid yihiin rejo, rumayn, iimaan, guul.

— Norman Vincent Peale

Waxa ugu weyn ee hortaagan guusha waa cabsida guuldarrada.

— Sven Goran Eriksson

Ma aqaan furaha guusha, laakiin furaha guuldarradu waa iskudayga in qof walba la raalligeliyo.

— Bill Cosby

10
HABDHAQAN

Haddii aamusnaan badani jiri lahayd; haddii aynu aamusnaanta ku dedaali lahayn, laga yaabaa in aynu wax uun fahmi lahayn!

— *Federico Fellini*

Dhaliiluhu magaalooyin ma dhisaan!

— *Federico Pena*

Garaadka saaf, jidhka dhis, qalbiga debci dadkana u adeeg!

— *Abd al-Malik Ali*

Marnaba ha isticmaalin (ha ammaahan) lacagtaada inta aanad kasban ka hor.

— *Thomas Jefferson*

Maalin kasta, maya ee waa in aad daqiiqad kasta, isku daydaa in aad camal wanaagsan sameyso.

— *Abu Bakr*

Ixtiraam naftaada markaas ayay dadka kalena ku ixtiraami doonaan e. Taasi waa macnaha sharafta.

— *Abdulrazak Gurnah*

Xornimada waxa aynu gaadhaynaa oo keli ah marka aynu baranno ixtiraamidda kala-duwanaanshaha, ee aynu yeelanno dhiirranaanta aynu sal ahaan ku ogaan lahayn waxa isku midka ah. — *Thurgood Marshall*

Qofna Janno kuma helayo Naar-gelinta (dibindaabyada) dadka kale!

— *Mohammad Khatami*

Aniga ahaan, ma jirto wax la yidhaahdo waayo-aragnimo xuni.

— *A. P. J. Abdul Kalam*

Weligaa ha illaawin wanaagyada laguu sameeyay. Iska illaw se wanaagyada aad adigu dadka kale u samaysay.

— *Omar Suleiman*

Dadka wanaagsan waxa lagu gartaa, waxa ay had iyo jeer arkaan wanaagyada dadka kale!

— *Omar Suleiman*

Qalad kasta cashar baynu ka barannaa.

— *Ashfaq Ahmed*

Qofka xumaanta badani waa sida daaqad uskag badan; taas oo aanu ilaysku ka soo dhex gudbi karin!

— *William Makepeace*

Oo yaan ahay si aan tagtadaadii kuugu xukumo?

— Drake

Ha hadlin! Keliyaata uurkaaga ku hayso!

— Duke Kabanamoku

Dabcan, dhammaanteen waxa aynu nahay danaystayaal. Danaystanimadu waa qayb weyn oo aadanaha ka mid ah.

— F. Sionil Jose

Dadka isku daya in ay ka hadlaan arrimaha adiga kuu goonida ah waxa aanay xakamayn karayn naftooda, waxa ay rabaan in ay adiga ku xakameeyaan.

— Francisco Arcellana

Ma wanaagsana in wax la badsado. Xataa waxyaabaha wanaagsan.

— Edilberto K. Tiempo

Dowladina iguma qasbi karto in aan xijaab xidho, sidoo kale dowladna iguma qasbi karto in aanan xijaab xidhan.

— Shirin Ebadi

Ma beddeli kartid mustaqbalkaaga, balse waxa aad beddeli kartaa dhaqannadaada. Muran li'ina dhaqannadaada ayaa beddeli kara mustaqbalkaaga!

— *A.P.J. Abdul Kalam*

Mid kasta oo innaga mid ahi wuu leeyahay xummaan iyo wanaag labadaba. Kuwa go'aansada in ay diiradda saaraan wanaaggu waa kuwa guulaysta.

— *Narendra Modi*

U-adeegidda dadka kale waa kirada ku baxaysa qolkaaga aad dunida kaga jirto!

— *Mohamed Ali*

Ninka walaalkii hoos-hoos wax ugu sheegaa, waa uu waaniyay. Kan walaalkii shir wax uga dhex sheegaana, waa uu fadeexeeyay!

— *Imaam Shaafici*

Reer Galbeedku ma aha cir-ka-soo-dhac, innaguna ma nihin doqmo dhego xidhan! Keliyaata iyagu kooda guuldarraysta ayay taageeraan si uu u guulaysto, innaguna keenna guulaysta ayaynu ku istaagnaa si uu u guuldarraysto! — *Axmed Zuweyl*

Anigu ma danaynayo in ay iga xadeen fekradahaygii, waxa aan danaynayaa waxa uu yahay in aanay lahayn wax fekrado ah!

— *Nikola Tesla*

Waxa aan aaminsanahay intii dadka been la waraabin lahaa in runta loo sheego, sida ay doonto ha u qadhaadhnaato e.

— Alija Izetbegovic

Dadka waxa u liita kan aan cidna ku kalsoonaan male xun oo uu ka haysto awgii, isagana aan lagu kalsoonaan saamayntiisa xun awgeed!

— Ali bin abi-Daalib

Marka aad ku qanacdo in aad ahaato qofka aad tahay ee aanad qofna isgarabdhigin ama aanad isdhammaystirin, qof walba wuu ku ixtiraami doonaa.

— Lao Tzu

In aad shakido ma aha qalad. In aad mar walba shakisanaato si aan kala go' lahayn ayaa cillad ah.

— Lu Xun

Ha u oggolaan in ay duruufuhu ku beddelaan. — Adigu beddel duruufahaaga.

— Jackie Chan

Geesinnimadu ma aha in aad aargoosato, balse waa in aad dulqaad leedahay!

— Wiliam Shakespeare

Waa ay adag tahay in aad ruux jaahil ah dood kaga badisaa!

— William McDo

Waa in aan bartaa fahmaana qisadayda inta aanan u gudbin dhegaysiga iyo ka-caawinta dadka kale qisooyinkooda.

— *Barack Obama*

Anigu waxa aan isu diyaariyaa waxa ugu xun, laakiin waxa aan rejeeyaa waxa ugu fiican.

— *Benjamin Disraeli*

Marka aad u raalligeliso dadka kale si ay kuu aqbalaan, waxa aad qiima tiraysa naftaada inta aad ku guda jirto raalligelintaas.

— *Dave Pelzer*

Daacad u noqo dalka mar walba. Daacad u noqo dowladda marka ay mutaysato.

— *Mark Twain*

Qofku waa in uu ku qancaa isagu inta aanu dadka kale ku qancin, waa in uu isagu xammaasadeysan yahay inta aanu dadka kale kicin.

— *Stefan Zweig*

Dhammaan ficilladu waa natiijooyinka ka dhasha fekerka, sidaas awgeed waa fekerka waxa macnaha samaynaya.

— *Sai Baba*

Waxa aan ka doorbidayaa dawlad la'aan intii aan cod la'aan ahaan lahaa.

— Edward Snowden

Marnaba anigu kama werwero dhibaatada. Waxa aan ka werweraa sidii aan u xallin lahaa.

— Shaquille O'Neal

Waxa aad tahay waxa aad samayso, haddii aad rabto wax ka duwan waxa aad hadda tahay, waxa aad u baahan tahay in aad samayso wax ka duwan waxa aad hadda samayso.

— Dr. Phil

Dadka kale ha ku samayn wax kaa cadhaysiinaya haddii ay iyagu kugu sameeyaan.

— Socrates

Dabeecaddeenna dhabta ahi waa waxa aynu samayno marka aynu isleenahay ma jirto cid idin arkeysaa.

— H. Jackson Brown, Jr.

Qofka carrabkiisu wuxuu ku dhadhansiin karaa qalbigiisa.

— Ibn Qayyim Al-Jawziyya

Had iyo jeer inta aad muujiso in ka badan ahow, marnaba ha muujin wax ka badan waxa aad tahay. *— Angela Merkel*

Waa in aynaan ka oggolaan dadka kale ee garashada xaddidan in ay ina qeexaan innaga.

— Virginia Satir

Haddii aad garwaaqsato in aad haysto wax kugu filan, waxa aad tahay hodan dhab ah.

— Laozi

Diiradda ma saaro waxa iga soo horjeeda. Waxa aan diiradda saaraa yoolalkeyga waxa aanan isku dayaa in aan iska indha tiro waxa kale oo dhan.

— Venus Williams

Xitaa haddii aan ogahay in adduunku uu berri burburi doono, anigu waxa aan weli iska sii beeran doonaa geedkeyga tufaaxa.

— Martin Luther King, Jr.

Marka la dhaafo ee laga gudbo fekradaha ‘sax-samaynta’ iyo ‘khalad-samaynta’, waxa jira bannaan. Waa inoo iyo bannaankaa!

— Jalaala’ddiin AlRumi

Waxa aannu nahay dad isdhuldhiga oo aan ducafo ahayn. Waxa aannu nahay dad awood leh oo aan xadgudbin!

— Saddam Hussein

Imtixaanka kama danbeysta ah ee mudane (Nin raga) waa ixtiraamkiisa kuwa in ay wax u qabtaan aanay u suurtoobayn.

— William Lyon Phelps

Hawl si wanaagsan loo qabtay waa ka wanaagsan tahay hadal si wanaagsan loo yidhi.

— Benjamin Franklin

Su'aal mararka qaar ceeryaan i gelisa: Ma anigaa, mise dadka kalaa, waalan? *— Albert Einstein*

Talada fiican waa mid la hubo in had iyo jeer layska indha-tiri doono, laakiin taasi ma aha sabab loo talo-bixin waayo.

— Agatha Christie

Marna ha ku aaminin qof kasta oo raba waxa aad haysato. Saaxiib iyo saaxiib la'aanba, xaasidnimadu waa dareen aad u weyn.

— Eubie Blake

Aamusnidu waa xikmad. Waloow ay dadka in yari aamusaan!

— Al-Bayhaqi

Haddii kuwo aan aqoonta lahayni faraha kala bixi lahaayeen doodaha aqoonta u baahan, isqabqabsigu wuu dhammaan lahaa.

— Imam Ghazali

Noqo qof dulqaad leh goor kasta iyo goob kastaba. Dulqaadku waxa uu kugu simaa saxnaan, saxnaantuna Jannada. Ha cadhoon. Dareenkani (cadhadu) waxa uu kugu simaa khaldanaan, khaldanaantuna Naar!

— Imam Sufyan Ath-thawri

Cidna ha nicin… si kasta oo ay kuugu gefaan!

— Ali bin Abi-Dalib

Marka carrabka qofku noqdo mid dhawrsoon, qalbigiisuna waxa uu noqdaa mid nadiif ah.

— Othman bin Affan

Waxa aan ka sii cabsanayaa maalinta gaaladu ku faani doonaan beentooda, Muslimiintuna la xishoon doonaan runtooda!

— Omar bin Khaddaab

Af-lagaadaynta cidi ma keensato sixid. Taa beddelkeeda arrinta ayay uga sii dartaa waxa ayna astaan u tahay in innageennan caayayna qofku u baahannahay caawimmo!

— Mufti Ismail Menk

Dhalleeceeye waa nin kaas oo garanaya waddada laakiin aan baabuurka kugu kaxayn karin.

— Kenneth Tynan

Baro sida abaal loogu galo dadka ma aha kuwa abaalka kuu gudi kara mar kale laakiin kuwa u baahan in abaal loo galo.

— *Qoraha la ma yaqaan.*

Marka aad dhalleecayso oo aad canaanato dadka kale, waxa aad isku dayaysaa in aad ka fogaato run adiga ku qusaysa.

— *Deepak Chopra*

Waxa aynu u maleynaynaa in cafintu tahay daciifnimo, laakiin gabi ahaan sidaa ma aha; waa ay ku adag tahay qofka adag in uu wax cafiyo.

— *T. D. Jakes*

Tallaabada ugu horreysa ee xagga isbeddelka loo qaado waa wacyi-gelin. Tallaabada labaad waa oggolaansho.

— *Nathaniel Branden*

Ixtiraamku waa sida aad ula dhaqanto qof walba, ma aha keliya sida aad ula dhaqanto kuwa aad rabto in aad iska dhaadhiciso.

— *Richard Branson*

Marka aanad dhibaatada xallin karin, dhibaatada maaree.

— *Robert H. Schuller*

Hal camal oo wanaagsan wuxuu u qalmaa camal kale oo wanaagsan. — *Aesop*

Dadku hadal deyn maayaan haddii aad wax xun sameyso iyo haddii aad wax wanaagsan sameysaba.

— *Rihanna*

Nin aan lahayn dulqaad waa faynuus aan lahayn gaas.

— *Andrés Segovia*

Ma jiraan wax sidaas ugu baahan dib u habayn sida ay dib u habayn ugu baahan yihiin caadooyinka dadka kale.

— *Mark Twain*

Marka ay hareeraha kaa jiran wax badan oo waxaa ka mid ah, marnaba aad uma rabi doontid.

— *Peg Bracken*

Carrabka qofku waxa uu ku siin karaa dhadhanka qalbigiisa!

— *Ibn Al-Qayyim*

Maquunnada (hadyadda) ugu weyn ee aad siin karto carruurtaada waa xidididda masuuliyadda iyo baalasha xorriyadda.

— *Denis Waitley*

Waxa aan helay habka ugu fiican ee carruurtaada loola taliyo in ay tahay soo ogow waxa ay doonayaan, kadibna kula tali in ay sameeyaan. — *Harry S. Truman*

Marka gefkii la caddeeyo, ninka murtiilaha ahi naftiisuu saxaa, kan jaahilka ahina murankii ayuu sii wadaa!

— Ali bin Abi-Dalib

Cid naftayda ka kakan lamaan dhaqmin weligay! Mar way i taageertaa, marna way iga soo hor jeesataa!

— Imam Ghazali

Iska jir isla-weynida! Jannada me gelayo ruux leh fidhiqo yar oo isla-weyni ahiye!

— Imam Musa Al-Kadhim

Naftaada haddii aanad runta ku mashquulin, beenta ayay kugu mashquulin!

— Imam Shafici

Haddii qofi in uun murti leeyahay, werwerka ka haya gefafkiisa ayaa ka mashquuliya arkidda khaladaadka dadka kale!

— Imam Shafici

Waa ay fiicantahay marka lagu weyddiisto in aad siiso, laakiin waxaa ka wanaagsan in aad siiso iyada oo aan lagu weydiisan, iyadoo garasho ah.

— Kahlil Gibran

Ma aha ninka saboolka ahi kan wax aad u yar haysta, laakiin waxaa sabool ah ninka janta wax badan.

— Seneca

Marka uu ninku in badan ogaado, waxaa badata cafintiisa.

— Catherine the Great

Ma garan karno kuwa aynu nahay ilaa aynu aragno waxa aynu qaban karno.

— Martha Grimes

Dhiirranaantu waa in aad inta oo aad istaagtid hadashid; sidoo kalena waa in aad inta oo aad fadhiisatid dhegaysatid!

— Winston Churchill

Marka uu qof kale dhib kuu geysto sababta uu sidaa u samaynayaa waxa ay tahay gudihiisa ayay dhibaato ka buuxdaa. Markaa waa ay soo burqanaysaa. Qofkaas oo kale uma baahna ciqaab ee wuxuu u baahan yahay caawin!

— Thich Naht Hanh

Hantiilayaashu waa in ay ku noolaadaan nolol tan iminka ka fudud; si saboolku u helo fursad ay ku noolaadaan!

— Mahatma Gandhi

Dadka qaar ayaa beenta ka rumaysta qofka uu jecel yahay, runtana ka beensada ruuxa aannu jeclayn. Halkani waa bar-bilawga xadgudubka ay dareennadu xaqiiqda ka gudbaan.

— Mark Twain

Aniga ima khusayso waxa aad aaminsatahay… Waxa i khuseeyaa waa sida aad u adeegsatid waxaa aad aaminsan tahay. Ma wax baad ku dhisi mise wax baad ku dumin? Ma caddaalad baad ku samayn mise dulmi baad ku geli? Ma wax baad ku bixin mise waxbaad ku dhici? Ma wax baad ku jeclaan mise wax baad ku nici? Ma cid baad ku furan mise cid baad ku addoonsan?

— Ibrahim Aslan

Sirtu waxa ay qalbiga haweenayda u tahay sida sunta; haddii aanay soo saarin way dilaysaa!

— George Bernard Show

Waxa aan u ooyay buudh (kabo) la'aan balse waxa aan la kulmay nin lugo la'aan ah!

— Zinedine Yazid Zidane

Camal yar oo aad sameyso ayaa ka fiican intii aad camal weyn qorsheyn lahayd. *— Peter Marshall*

Ogow ama dhageyso kuwa og.

— Baltasar Gracian

Kuma quusi doontid tegista biyaha; waxa keliya oo aad quusi doontaa haddii aad ku negaadid.

— *Zig Ziglar*

Haba ku dhufan haddii ay suurtogal tahay in aad si sharafleh uga tegi kartid ku in aad ku dhufato, laakiin hadday kugu qabato si jilicsan ha u gu dhufan.

— *Theodore Roosevelt*

Masuuliyadda ugu horreysa ee hoggaamiyuhu waa qeexidda xaqiiqada. Ta ugu danbeysana waa in la dhaho mahadsanid. Inta dhexe, hoggaamiyuhu waa adeege.

— *Max DePree*

Waxaa wanaagsan in aad waxa saxda ah si tartiib ah u qabato intii aad wax qaldan si degdeg ah u qaban lahayd.

— *Peter Turla*

Noqo nooca hoggaamiyaha ay dadku u daba-kici lahayeen si iskood ah; xataa haddii aanad haysan mansab ama boos.

— *Brian Tracy*

Nin sii kalluun kadib waxa aad quudisay isaga hal maalin; bar nin sida loo kalluumeysto kadib waxa aad quudisay noloshiisa oo dhan.

— *Maimonides*

Ha tegin meel waddo ay ku geyn karto, taa beddelkeeda mar meel waddo ku geysaa aanay jirin kana tag raad!

— *Ralph Waldo Emerson*

Dadka wanaagsan uma baahna sharciyo loo sheego in ay ugu dhaqmaan si xilkasnimo leh, halka dadka xun ay heli doonaan hab looga wareego sharciyada.

— *Plato*

Ilmadu waxa ay ka timaaddaa qalbiga ee kama timaaddo maskaxda.

— *Leonardo da Vinci*

Beenta run-badhkeed ahi waa ta ugu mugdiga badan been oo dhan.

— *Alfred Tennyson*

Hoggaamiyuhu waa qofka ka caawiya dadka kale wanaajinta noloshooda ama hagaajinta nidaamka ay ku hoos nool yihiin.

— *Sam Houston*

Dembiga ugu qotoda dheer ee maskaxda aadanaha laga galo waa aaminaadda wax aan caddeyn lahayn.

— *Aldous Huxley*

Haddii aanad u dhaqmin sida aad aaminsan tahay, waxa aad ku danbeyn doontaa in aad aamintid sida aad u dhaqmeysid.

— Fulton Sheen

In la fekero waa ay fududdahay, dhaqangelinteedu waa adayg, in qof kale fekerkiisa ficil loo beddelo ayaa se ah waxa ugu adag adduunka guudkiisa.

— Johann Wolfgang von Goethe

Waxa aan u maleynayaa in qof walbaa uu doonayo in la maqlo, kadibna sida ugu fudud ee codkiisa uu sare ugu qaado waa in uu qofka kale naceyb u muujiyo.

— Tavi Gevinson

Markii aan yaraa waxa aan xushmayn jiray dadka xarfaanta ah, iminkoon waynaadayna waxaan xushmeeyaa dadka naxariista leh!

— Abraham Joshua

Weligaa qof hoos ha u eegin; mar aad dhulka ka kicinaysid mooyee!

— Jesse Jackson

Uma baahnid sabab si aad dadka u caawisid.

— Qoraha lama yaqaan

Si aad sax weyn u samaysid, samee khalad yar!

— William Shakespeare

Geesigu waa qofka fahmi kara mas'uuliyadda ka timaadda xorriyaddiisa.

— Bob Dylan

Waddaniyaddu kama koobna ruxidda calanka; laakiin waxa ay ku jirtaa u-halgamidda in dalkaagu noqdo ka xaqa ah sidoo kalena xooggan.

— James Bryce

Dad aan aqoon u lahayn sooyaalkoodii, asalkoodii iyo dhaqankoodii waa sida geed bilaa xidid ah! *— Marcus Garvey*

Waxa aan qaatay go'aanno aan ka qoomameeyey, waxa aan u qaatay sidii aan uga baran lahaa khibrad… Waxa aan ahay aadane, aan dhammaystirnayn, sida qof kasta oo kale.

— Queen Latifah

Waxa aad maanta joogtaa meesha fekerkaagu ku keenay; berrina waxa aad tagi doonta meesha uu fekerkaagu ku geeyo.

— James Allen

Waxa aan ku baraarugnaa muhiimadda uu codkeennu leeyahay marka layna aamusiiyo. *— Malala Yousafazi*

Haddii aad haysato shumac, iftiinka shumacaaga aad uma ifayo haddii aan shumacayga kaa damiyo.

— *Steven Tyler*

Debecsanaantu waa luuqad uu maqlo dhegoolku, uu arko indhoolku, kuna hadlo murtiiluhu.

— *Qoraha lama yaqaan*

Aniga waxba igama gelin in aanad i jeclayn iyo in aad i necebtahay… Waxa keliya ee aan ku weyddiisanayaa waa in aad ii ixtiraamtid sida qof bini'aadam ah.

— *Jackie Robinson*

Ixtiraam naftaada; haddii aad ixtiraamtid naftaada, dadka kalena waa ku ixtiraami doonaan.

— *Baltasar Gracian*

Hal qalad ma samayn kartid labo jeer sababtoo ah marka labaad ee aad samayso, ma aha qalad, waa doorasho.

— *Steven Denn*

Hal-beegga runta ah ee ruuxa lagu qiyaasaa waa sida uu ula dhaqmo qof aan wax wanaag ah u samaynin.

— *Samuel Johnson*

Dadku waxa ay leeyihiin caado aad looga xumaado oo waxa ay xusuustaan wax ay ahayd in ay hilmaamaan.

— *Christopher Paolini*

Runtu waxa ay tahay in qof walbaa uu rabo in uu waxyeello kuu geysto: adigu waxaad keliya soo heshaa kuwa u qalma in waxyeelladaas loogu dulqaato.

— *Bob Marley*

U dhaqan sidii oo waxa aad samaynaysaa isbeddel keenayaan. Xaqiiqdii waa ay keenayaan.

— *William James*

Dabeecaddeenna iyo akhlaaqdeenna dhabta ahi waxa ay muuqataa marka aan xanaaqno. — *Khalid Al Ammar*

Cafisku ma aha fal marmar ah, waa dhaqan joogto ah.

— *Martin Luther King Jr.*

Haddii aad awood u leedahay ka farxinta ruux kale, samee. Dunidu waa u oomman tahay dhaqankaas oo kale e.

— *Qoraha lama yaqaan*

Waxa aynu wax helidda ku samayn karnaa noolaanshiyo, balse wax bixinta waxa aynu ku samayn karnaa nolol!

— *Winston Churchill*

Habka ugu wanaagsan ee aad naftaada u heli kartaa waa iyada oo aad naftaada u lumisid adiga oo u adeegaya dadka kale!

— Mahatma Gandhi

Shileemadu (Sinimoogu) waa hadhka bulshadiisa.

— Shohreh Aghdashloo

In aad mas'uul noqotaa waa wax fudud, laakin in aad astaamaha masuuliyadda yeelataa ma aha wax fudud.

— Shiv Khera

Saamaxaaddu waa dhaqanka wanaagsan ee geesiga.

— Indira Gandhi

Ka bilow naftaada ka hor intaadan cid kale wax u sheegin.

— Omar Ibn Al-Khaddaab

Haweenku run kama sheegaan da'dooda; ragguna run kama sheegaan dakhliga soo gala. *— William Feather*

Hore u soco uun hana danaynin waxa dadka u malaynayaan.

— Johnny Depp

Hoog kama baxdo ummadda qabiil waliba qawmiyad isu haysto.

— Gubran Kh. Gubran

Xanuunka manta ugu weyni ma aha *juudaan* mana aha *qaaxo* ee waa in aad noqotid ruux aan la danayn, la daryeelin ayna faquuqaan cid kastaa.

— Teresa

Maxaa ay habluhu sameyn lahaayeen haddii aanay haysan hooyooyin ka caawiya dhibaatooyinkooda?

— Louisa May Alcott

Waxa aan kuu rejaynayaa in aad erayadaada u adeegsatid si wanaagsan sababtoo ah erayada qudha ee aad ka qoomamaysid in ka badan inta aad ka shallaaysid erayada aanad adeegsani waa erayada aad u isticmaashid si aad si kas ah wax ugu yeeshid qof kale!

— Taylor Swiff

Waa in aanu qofna ka cabsan fekerrada cusub, meesha ay doonaan ha ka yimaaddaane. Waana in aynaan runta ka cabsan, xataa haddii ay ina dhibayso.

— Abu Yusuf Ya'qub ibn Ishaq Al-Kindi

Ku celcelintu beenta uma rogto run.

— Franklin D Roosevelt

Cidna ha ku canaanan doorashooyinkaada gaarka ah. Adiga weeye cidda ay tahay in uu ka noolaado isbeddelada doorashooyinkiisa.

— Caroline Myss

Dadka wanaagyadooda ka dhex raadi, gaar ahaan dadka wanaagyadooda ka ilaaliya muuqashada.

— Robyn Flach

Ha isweyddiin dalkaaga waxa uu kuu qaban karo adiga; isweyddii waxa aad adigu u qaban kartid dalkaaga.

— John F. Kennedy

Badanaa dad dhintay balse ay sharaftoodii nooshahay. Badanaa, sidoo kale, dad nool balse sharaftoodu dadka agtiisa ka dhimatay!

— Imaam Shaafici

Dadka ha ka sugin in ay saaxiib kula noqdaan, tus adigu sida loo noqdo.

— Qoraha la ma yaqaan

Marka aad hadlaysid waxa aad soo laba celisaa uun waxa aad taqaanid, balse haddii aad wax dhegaysatid, wax badan ayaad baran kartaa. *— Dalai Lama*

Ha ka oggolaan dhaqammada dadka kale in ay burburiyaan nabadda gudahaada.

— Dalai Lama

Ha ka dhigin dharkaaga waxa ugu qaalisan ee aad haysatid si aanad u gaadhin heer aad ka qiimo yaraatid marada aad gashan tahay.

— Jiiran Khalil Jiiran

Ha ku ciyaarin dareenka dadka kale sababtoo ah waa laga yaabaa in aad ku guulaysatid ciyaarta balse halistu waa in aad dhab ahaan waayi doontid ruuxaas weligaa.

— William Shakespeare

Maanku waa wax walba. Waxa aad ka fekerto ayaad noqotaa.

– Buddha

Weligaa adiga oo lagu jecel yahay kala tag dadka kale, adiga oo u adeegsanaya weliba erayo jacayl abuuraya. Laga yaabaa in ay tahay markii isugu kiin danbaysaye.

— Mufti Ismail Menk

Carrabkaaga ha barin in uu sheegsheego ceebaha dadka kale; waayo adiguba ceebo waad leedahay dadkuna carrab way leeyihiin.

— Dr Bilal Philips

Haddii aad doonaysid wax cusub, waa in aad joojisid samaynta waxa duugga ah.

— Peter Drucker

Qof kasta wuxuu ku fekerayaa sidii uu u beddeli lahaa dunida, lakiin qofna ku fekeri maayo sidii uu qudhiisu isu beddeli lahaa.

— Leo Tolstoy

Haddii aad rabto in lagu arko, istaag. Haddii aad rabto in lagu maqlo, sare u hadal. Haddii aad rabto in lagu qiimeeyo, aamus.

— Bill Cosby

Ka feker wax WEYN! Kolleyba waad fekeri lahayde, haddaba ka feker wax WEYN. *— Donald J. Trump*

Waxaa jira saddex waxyaalood oo aad u adag: birta, dheemmanta iyo in uu qofku is-ogaado. *— Benjamin Franklin*

Wax ka baro shalay, ku noolow manta, berrina rejee. Waxaa ugu muhiimsan in aanad joojin su'aal-gelinta.

— Albert Einstein

Markii aad qof u qabato wax qurxoon, ka digtoonaaw in aad xasuusiso. Markii adiga uu qof kuu qabto wax qurxoonna ka digtoonaaw in aad hilmaamto.

— Abdullah Ibn Al Muqaffa

11
HOGGAAMIN

Dad baa i weyddiiyey waxa aan rabo in laygu xusuusto, kadibna si fudud ayaan u idhi waxa aan dadka u metalay si daacadnimo ah aniga oo aan waxba ka hagran awooddayda. Waxa aan qabaa in aan wax wanaagsan sameeyay.

— *Daniel Inouye*

Hoggaamintu waa in aad garab istaagto dadkaaga… Laakiin mararka qaar waa in aad tustaa in aad hoggaamiye dhab ah tahay.

— *Leymah Gbowee*

Hoggaaminta macnaheedu ma aha awood haysasho.

— *Haile Selassie*

Hoggaamiyaha dhinaca ciidanka ee wax ku arka indhaha dadka kale, awood uma laha in uu dawlad hoggaamiyo!

— *Napoleon Bonaparte*

Libaax xoolo hoggaaminaya ayaa dhaama wan ama neef xoolo ah oo libaaxyo hoggaaminaya!

— *Napoleon Bonaparte*

Si aynu dadka ugu qancinno qaabka aynu u fekerayno, marka hore waa in aynu fahamno sida ay iyagu u fekerayaan. Haddii aad doonayso in aad adigu wax hoggaamisana, waxaa lama huraan ah in aad oggoolaato in adiga lagu hoggaamiyo!

— William Hazlitt

Dadku waxa ay oggolaadaan hoggaamiyaha inta aanay oggolaan aragtida.

— John C. Maxwell

Hoggaamintu waa ka shaqaynta yoolal iyo aragti; maamulkuna waa ka shaqaynta ujeeddooyin.

— Russel Honore

Doorka hoggaamiyuhu ma aha in uu u beddelo xaalad adag qaybo yaryar kadibna uu mudnaan kala siiyo.

— Carlos Ghosn

Mid ka mid ah tijaabooyinka hoggaamiyahu waa awoodda u ku aqoonsado dhibaatada ka hor inta aanay noqon xaalad degdeg ah.

— Arnold H. Glasow

Ma maamuli kartid dad; walxo ayaad maamuli kartaa. Waad hoggaamin kartaa dadka.

— Admiral Grace Hooper

Dadaal iyo dhiirrani kuguma filna haddii aanad lahayn ujeeddo iyo jiho.

— John F. Kennedy

Marnaba ma beddeli karno hoggaamiyayaasheenna siyaasadda ilaa aynu beddelno dadka doorta. *— Mark Skousen*

Kabtanku kama fekero dhimashada, ama nolosha, wuxuu ka fekeraa sidii uu markabkiisa u badbaadin lahaa.

— Bashar al-Assad

Hoggaanku wuxuu hayaa shaqo ka adag in uu kala doorto dhinacyo. Hoggaanku waa in uu isu keeno dhinacyada.

— Jesse Jackson

Ninka raba in uu hago baanbaydu waa in uu dhabarka u jeediyaa daawadayaasha *— Max Lucado*

Si aad wax u hoggaamisid waa in dadka aad hoggaaminaysaa kuu qirsan yihiin in aad caddaali tahay… Xataa haddii aad ad-adagtahay, marka arrinku dalbado ad-adayg! *— Saddaam Xuseen*

Kuma hoggaamineysid dadka in aad madaxa ka garaacdo – taasi waa weerar, ma aha hoggaamin. *— Dwight Eisenhower*

Hoggaamintu waa furaha 99% dedaallada lagu guulaystay.

— Erskine Bowles

Kan aan weligiis baran in uu addeeco (hoggaansamo) ma noqon karo taliye wanaagsan. — *Aristotle*

Farshaxanka hoggaamintu waa dhihidda 'Maya', ma aha dhihidda 'Haa'. Waa ay fududdahay in la dhaho 'Haa'.

— *Tony Blair*

Hoggaamintu waa farshaxanka helitaanka qof kale in uu kuu sameeyo wax aad rabto sababtuna tahay in uu isagu rabo in uu sameeyo. — *General Dwight Eisenhower*

Haddii ficilladaadu ay dhiirrigeliyaan dadka kale si ay riyadoodu u badato, wax badan u bartaan, wax badan u sameeyaan oo ay noqdaan wax badan, waxa aad tahay hoggaamiye.

— *John Quincy Adams*

Ma filan karno in aynu xalinno dhibaatadeenna haddii midkeenba kan kale dhibayo. — *Barack Obama*

Isbeddelku iman maayo haddii aynu ka sugno qof kale ama waqti kale. Innaga weeye kuwa laga sugayo in ay wax beddelaan. Waxa aynu nahay isbeddelka aynu raadineyno. — *Barack Obama*

Haddii aad u hoggaansantid dhammaan sharciyada, waxaad seegi doonta wixii xiiso leh oo dhan. — *Katharine Hepburn*

Hoggaamintu waa awoodda aragti loogu turjumo xaqiiqo.

— *Warren Bennis*

Ruuxii doonaya in la addeecaa waa in uu bartaa sida amarrada loo bixiyo. — *Niccolo Machiavelli*

Ogoow faqrigu ma sameeyo kacdoon, ee waxaa kacdoon sameeya wacyiga faqiirka. Sidaa darted kalitaliyuhu wuxuu rabaa inuu kaa dhigo faqiir, wadaadka kelitaliyuhuna wuxuu rabaa inuu maqnaysiiyo wacyigaaga. — *Karl Marx*

12
HORUMAR

Waxa aynu mustaqbalkeenna ka abuurnaa horumarinta fursadaha hadda jira; sida ay doonaan ha u yaraadaan e.

— Lewis Howard Latimer

Adduunkan ma jiro ciidan hoos u dhigi kara qof go'aansaday in uu sare u kaco. Nafta aadanaha silsilado laguma hayn karo.

— W.E.B. Dubois

Waxa isbeddelka keenaa waa waxyaalaha yar yar ee muwaadiniintu qabtaan

— Wangari Maathai

Waa aynu sugi karaynay deeq-bixiye, laakiin waxa aynu rumaysannahay horumarinta nafta iyo kalsoonida. Mashruucan waa aynu fulin karnaa, sidaas oo dhan sabool uma nihin.

— Benjamin Mkapa

Haddii la rabo in si dhab ah loo horumaro, waa in ay dadku ku lug yeeshaan.

— Julius Nyerere

Waa in aynu si tartiib tartiib ah u horumarno si aan u ilaalinno horumarka aynu hore u soo samaynay.

— *Haile Selassie*

Marka aad bilawdo horumarinta awoodahaaga damqashada iyo khayaal-abuurka, adduunka oo dhan ayaa kuu furmaya.

— *Susan Sarandon*

Halgan la'aan, ma jiri karo horumar.

— *Frederick Douglass*

Horumarku macquul ma aha isbeddel la'aan, kuwa aan maskaxdooda beddeli karin wax kalena ma beddeli karaan.

— *George Bernard Shaw*

Dunidu waa ay neceb tahay isbeddelka, sidaas oo ay tahayna isbeddelku waa waxa keliya ee keena horumarka.

— *Charles Kettering*

Awoodda wax lagu su'aal-geliyaa waa aasaaska horumarka aadanaha oo dhan. — *Indira Gandhi*

Haddii qaawinta jidhku horumar tahay, xayawaanka ayaa ka horumarsan dadka! — *Dr. Zakir Naik*

Ma jiro dunida dal horumar ku tallaabsaday isaga oo aan wax barin bulshadiisa. — *Nelson Mandela*

Haddii aad ku socoto waddo sax ah aadna diyaar u tahay in aad ku sii socotid, kama-danbeysta waxa aad sameyn doontaa horumar. — *Barack Obama*

13
JACAYL

Qofka ku jeceli denbi in aad ku dhacdo ayuu kaa ilaaliyaa!

— *Ali bin abi-Dalib*

In la igu naco waxa aan ahay ayaan ka doorbidayaa in laygu jeclaado wax aanan ahayn.

— *Kurt Cobain*

In qof si qoto dheer kuu jeclaado waxa ay ku siinaysaa xoog, halka in aad qof si qoto dheer u jeclaataana ay kuu siinayso dhiirrani.

— *Lao Tzu*

Wax walba oo aad rabtid in aad samayso, haddii aad rabto in aad ku wanaagsanaato, waa in aad jeclaataa waxa aad samaynaysid oo aad awooddaa in aad wax badan u hurto.

— *Maya Angelou*

Ha ka quusan dadka aad jeceshahay. Dulqaadkaaga iyo daacadnimadaada ayaa laga yaabaa in ay kuu soo celiso.

— *Joyce Meyer*

Waxaa ka wanaagsan in lagugu naco waxa aad tahay intii lagugu jeclaan lahaa wax aanad ahayn.

— André Gide

Waxa ugu fiican uguna quruxda badan adduunka lama arki karo lamana taaban karo – waxa laga dareemaa qalbiga.

— Helen Keller

Uma baahnid in aad dadka isu-eekaysid. Naftaada jeclow.

— Lea Michele

Anigu ma garanayo in jacaylku isbeddelo. Dadku waa isbeddelaan. Xaaladuhu waa isbeddelaan.

— Nicholas Sparks

Adiga, qudhaada, sida uu qof walba oo adduunkan joogaa ugu qalmo kalgacaylkaaga ayaad adiguna ugu qalantaa.

— Buddha

Gabadhu ninka ay jeceshahay wejigiisa waxa ay u taqaannaa sida badmaaxu u yaqaan badda furan.

— Honore de Balzac

Jacaylka iyo naxariistu waa daruuriyaad, nolosha heerka sare ahi ma aha wax daruuri ah. Jacayl iyo naxariis la'aan adduunku muu jireen.

— Dalai Lama

Jacaylku waa nolosha. Haddii aad jacayl waydo, noloshana waad weyday. *— Leo Buscaglia*

Mar kasta oo aynu kulanno aynu isu dhoolla-caddeyno, dhoolla-caddeyntu waa billawga jacaylka.

— Teresa

Sida keliya ee wax weyn lagu samayn karaa waa in aad jeclaato waxa aad qabanayso.

— Steve Jobs

Hooyooyinku waxa ay gacan qabtaan carruurtooda waqti yar, laakiin qalbigooda weligood kama baxaan.

— Qoraha lama yaqaan

Ma jiro wax keeni kara guriga ammaan dhab ah oo aan ka ahayn jacayl dhab ah.

— Billy Graham

Quruxda keli ah ee waartaa waa quruxda qalbiga!

— Jalaala'ddiin AlRumi

I nac ama i jecloow, aniga agtayda labadaba waa laga jecel yahay. Haddii aad i jeclaatidna, mar kasta qalbigaaga ayaan ku sugnaan, haddii aad i nacdana, mar kasta waxa aan ku sugnaan caqligaaga!

— William Shakespeare

Haddii uu nin ku rabo, wax kaa joojin kara ma leh. Haddii aanu ku rabinna, wax kuu joojin kara ma leh. *— Oprah Winfrey*

Dabeecadda jacaylka ayaa ah in jacayl dartiis aad qof u disho, ama adigu u dhimato.

— Maaza Mengiste

Haddii qalbigu adkaado, indhuhuna way engegaan!

— Ibn Al-Qayyim

Waxa ugu muhiimsan ee Aabbe awoodo in uu u qabto ubadkiisu waa in uu jeclaado Hooyadood.

— Theodore Hesbergh

Qofka dhaha wax uu jecel yahay, wuxuu maqlaa wax aanu jeclayn.

— Leonard Louis Levinson

Dumarku waxa ay jecel yihiin in la daneeyo oo weliba si cad loogu sheego in la jecel yahay. Ha ka gaabsan u sheegashada jacaylkaaga xaaskaaga. Haddii aad ka gaabisid sheegashada jacaylkaaga, waxa aad dhisaysaa teed qalafsanaan ah oo adiga iyo oorida idin kala dhex dhigma, xiisihiina gabaabsi ayuu noqon.

— Imam Ahmed ibn Xanbal

Waan ku jeclahay, ma aha keliya waxa aad tahay in aan kugu jeclahay, laakiin waxa aan noqdo anigu marka aan kula joogo.

— Roy Crof

Jacaylku waa ciyaar laba qof ciyaari karaan isla markaasna ay labadooduba guuleysan karaan.

— Eva Gabor

Halka aynu jecelnahay waa guriga – guriga laga yaabo in cagaheennu ay ka tagaan, laakiin aanu wadnaheennu ka tegin.

— Oliver Wendell

Waxa aan jeclahay riyada mustaqbalka iyadaa ka wanaagsan taariikhda la soo dhaafay.

— Thomas Jefferson

Dab fiican ayaa laga yaabaa in uu wadnahaya ka daaran yahay, haddana lama hayo ruux u soo diirrimaad doonta. Socotaduna qiiqa ayuun bay arkaan!

— Vincent Van Gogh

Meelaha qaar; waa in aad xaqiiqsatid in ay jiraan dad wadnahaaga degi kara balse aan noloshaada oo idil degi karin!

— Qoraha lama yaqaan

Marka aad qof la faraxsan tahay, adiga kuma khuseeyaan dadka la'aantaa aan faraxsanayni!

— Shashank Rayal

Bal luuqadaha oo dhan isugu gee afka ruux wax jecel, hal dhaqdhaqaaq oo wadnihiisu sameeyo ayaa gebigoodaba ka adag kana dhigaya sidii aamusane-hadlaya!

—Maxmuud Saaddiq Ar-raafici

Jacaylka badan waan ka baqaa; haddana jacaylka yari ima raalli-geliyo!

— Mai Ziadah

Si ay afadu u noqoto xaas faraxsan, waa in ay ninkeeda in yar jeclaataa in badanna fahantaa. Si ninkuna u noqdo say faraxsan, waa in xaaskiisa in badan jeclaadaa, balse aanu isku deyinba in uu fahmo!

— Anis Mansour

Waajibku wuxuu inaga dhigaa in aan wax si wanaagsan u sameyno, laakiin jacaylku wuxuu inaga dhigaa in aan wax si qurux badan u sameyno.

— Zig Ziglar

Carruurtu waxa ay u baahantahay jacayl, gaar ahaan marka aanay muteysan.

— *Qoraha la ma yaqaan*

Maalintooda ugu xun kuwa qabta waxa ay jecel yihiin ayaa ka wanaagsan maalintooda ugu fiican kuwa qabta wax aanay jeclayn.

— *Jim Rohn*

Jacaylku waa marka qofka kale farxaddiisu kaala muhiimsan tahay farxaddaada.

— *H. Jackson Brown, Jr.*

Mugdi kaama saari karo mugdi: iftiinka oo keliya ayaa mugdi kaa saari kara. Nacayb kaama saari karo nacayb: jacayl oo keliya ayaa kaa saari kara nacaybka.

— *Martin Luther King, Jr.*

Afadu waa in ay ninkeeda ka sameysataa in uu ku farxo in uu yimaaddo guriga, ninkuna waa in uu ka sameystaa in ay ka xumaato marka ay afadu aragto ninkeeda oo guriga ka baxaya.

— *Martin Luther King, Jr.*

Waxaa oolli karta qoonsimaad qoto dheer meeshii aanu jacayl qoto dheer oollin.

— *Martin Luther King, Jr.*

Jacaylku waa ciidanka keliya ee awooda cadow in uu u beddelo saaxiib. — *Martin Luther King, Jr.*

Hooyaday mar walba waxa ay ii sheegi jirtay: ‘Haddii aanad heli karin wax aad u noolaato, waa in aad hesho wax aad u dhiman karto.’

— *Tupac Shakur*

Waajibka ugu horreeya ee jacaylku waa in la isdhegeysto.

— *Paul Tillich*

Adigu ma dooratid qoyskaaga. Waa maquuno uu Eebbe ku siiyay, si la mid ah sida aad adba iyaga ugu tahay!

— *Desmond Tutu*

Waddaniyaddu waa taageeridda dalkaaga mar kasta, iyo dawladdu marka ay u qalanto.

— *Mark Twain*

Qoysku ma aha wax muhiim ah. Waa wax walba.

— *Michael J. Fox*

Ubax ma bixi karo qorrax la’aan, ninkuna ma noolaan karo jacayl la’aan.

— *Max Muller*

Mararka qaarkood qalbigu wuxuu arkaa wax ka qarsoon indhaha.

— H. Jackson Brown, Jr.

Waxaan iftiinka ku jeclaan doonaa inuu jidka i tuso, laakiin weli waxaan ku adkaysanayaa gudcurka, maxaa yeelay, waxaa uu i tusayaa xiddigaha.

— Og Mandino

Samee jacayl ee ha samayn dagaal!

— Chris T. Atkinson

Dagaalku ma dili karo jacayl. Jacaylkuna ma dili karo dagaal!

— Helene Lagerberg

Indhaha ku jeceli waxa ay kaa arkeen bay beeniyaan. Dhegaha ku necebina wax lagaa sheegay ayay aaminaan.

— Najiib Mahfuuz

Haddii aad sababo u haysid jacaylka aad ruux kale u haysid, waxba ma jeclid!

— Slavoj Zizek

Cidna ma ay qiyaasin, xataa maansayahanku, xaddiga uu qalbigu qaado!

— Zelda Fitzgerald

Jacaylku ma laha sees. Waa badweyn aan bilaw iyo dhammaad toona lahayn.

— Jalaala'diin al-Rumi

Ma adiga ayaa qurux badan oo sidaa darteed baan kuu jeclaaday? Mise anigaa ku jecel oo sidaa darteed baad u qurux badnaatay?

— Qoraha lama yaqaan

Hooyadu waa shiidaalka ugu wanaagsan ee qof caadi ah ka dhiga in uu samayn karo wax aan suurogal ahayn.

— Marton C. Garretty

Hooyadu waa qofka kaalinta cid kasta buuxin karta balse aanay cidina kaalinteeda buuxin karin.

— Qoraha lama yaqaan

Wax kasta oo aan ahay ama aan rejaynayo in aan noqdo waxa iska leh Hooyaday!

— Abraham Lincoln

Hooyaday waa mucjiso lugaynaysa!

— Leonardo Dicaprio

Xaqa ugu weyn ee ay haweenay heshaa waa in ay Hooyo noqoto!

— Lin Yutang

Hooyadu ma aha ruux lagu tiirsado, ee waa ruux ku-tiirsanaantaba meesha ka saarta kana dhigta mid aan daruuri ahayn. *— Dorothy C. Fisher*

Hooyooyinku waa kuwa iska keen jeclaada sabab fiican la'aan.

— Maggie Gallagher

Waxaan garwaaqsaday marka aad eegto hooyadaa, waxa aad arkeysaa jacaylkii ugu saafisanaa ee waligeed la ogaado.

— Mitch Albom

Dunida ma jiro fan la mid ah heesta hooyadu ubadkeeda ugu heesto.

— Billy Sunday

Ma jiro goor iyo goob u gaar ah jacaylka. Waxa uu u dhacaa si shil ah, in uu wadne ku garaacmo, in hillaac (biriq) ku dhaco, muddo aad u xanuun badan ayuu ku dhacaa.

— Sarah Dessen

Qalbigaba waxa loo sameeyay in uu burburo!

— Oscar Wilde

Guurka aan caadiga ahayni ma aha mid bilaa khilaafyo ah. Waa mid daacadnimada, istirxgelinta iyo iscafintu yihiin seeska!

— Qoraha lama yaqaan

Waa jacaylka waxa kaa dhigaya in aad qofka kale la doontid in uu faraxsanaado, xataa haddii aanad adigu qayb ka ahayn farxaddiisa. — *Julia Roberts*

Haddii aad aragtid ninkaaga oo kugu sheegaya wanaagga aad leedahay, ha ka fili waayin in uu kugu sheego xumaanta aad leedahayna!

— *Wahab Bin Manbah*

Dadka aad jeceshahay sii baalal ay ku duulaan, xididdo ay ku soo noqdaan iyo sababo ay ku joogaan.

— *Dalai Lama*

Jacaylku waa sida cinjirka (Rabadhka) oo ay laba gacmood kala jiideen, haddii midkood sii dayso, tan kale ayuu xanuujiyaa.

— *Qoraha la ma yaqaan.*

Jacaylka ugu wanaagsani waa kan kaa dhiga ruux ka wanaagsan sidii hore, isaga oo aan beddelayn cidda aad tahay kaana dhigayn cid aan adiga ahayn.

— *Maya Angelou*

Waxa aan kuusoo jeedinayaa in aad dagaalka geshid balse kuuma soo jeedinayo in aad jacayl geshid. Waayo dagaalka ama waad noolaan ama waad dhiman, balse jacaylka mana noolaanaysid mana dhimanaysid.

— *Adolf Hitler*

Waxaad tidhaahdaa roobkaan jeclahay, haddana dallaayad baad ku hoos martaa. Waxaad tidhaahdaa cadceeddaan jeclahay, haddana waad ka hadhsataa. Waxaad tidhaahdaa dabayshaan jeclahay, haddana daaqadahaad ka xidhataa. Sidaa darteed baan uga cabsadaa marka aad i tidhaahdid adiga ayaan ku jeclahay!

— *Bob Marley*

Hooyaday waxa ay ahayd haweeneydii ugu quruxda badneyd ee aan abid arko. Wax walba oo aan ahay iyadaa igu hagtay. Waxaan u nisbeynaya guusha nolosheyda oo dhan anshaxa guud, caqliyan iyo aqoonta muuqataba in aan iyada ka keenay.

— *George Washington*

Jeclaaw dhammaantood, ku kalsoonoow inyar, ha xumeyn cidna.

— *William Shakespeare*

Marna haka xidhin dibnahaaga kuwa aad mar horeba u furtay qalbigaaga.

— Charles Dickens

Jacaylka ku fidi meel kasta oo aad tegtid. Cid kasta oo kuu timaadda ha u oggolaan in ay kaa tagto iyada oo aan sidii hore ka faraxsanayn. — *Teresa*

Jacaylka keliya ee aan rumeysanahay waa kan hooyadu u hayso ubadkeeda. — *Karl Lagerfeld*

14
MAAD

Yurub sababta ay hodan u noqdeen waa in ay ka fa'iideysteen Afrika; Afrikaankuna waa ay og yihiin taas.

— *Desmond Tutu*

Ilaa aad god qoddo, ku beertid geed, waraabisid oo aad ilaalisid, waxba maad samayn. Hadal uun baad haysaa.

— *Wangari Maathai*

Waddamada yar-yar waa sida gabadh aan si hufan u labisnayn. Waxa duufsada kuwa sharwadayaasha ah.

— *Julius Nyerere*

Ma dabbaal-dego maxaa yeelay shaqadeyda uun baan qabtay. Marka boostaaluhu keeno waraaqo, miyuu dabbaal-degaa?!

— *Mario Balotelli*

Waan addeecsanaa, laakiin denbiga aan galay wuxuu ahaa in aanan u eekayn sida qof addeecsan oo kale.

— *Tehmina Durrani*

Sida muuqata, ragga oo dhan waa isku mid. Waxaaba la mooda in Rabbi wejiyadooda u kala duway in ay dumarku ku kala gartaan oo keliya.

— *Rajaa Alsanea*

Nin caqli badan oo jaahiliin ku dhex jira wuxuu la mid yahay gabadh qurux badan oo la joogta rag indho la'.

— *Saadi*

Ugu danbeyn waad dhiman, laakiin xabaashaada lugahaaga kuma tegaysid sidii ay ahayd in aad samayso. Maya, jiilka danbe ayaad taas u deynaysa.

— *Mahmoud Dowlatabadi*

Haddii aad dhagax ku tuurto bullaacad, keliya wajiga ayuun bay wasakhi kaaga daadanaysaa.

— *R.K. Narayan*

Haddii aanu qofku garanayn dekaddii uu ku xidhan lahaa, ma jirto dabayl uu ka faa'iidayo.

— *Lucius Annaeus Seneca*

Aad bay u fududdahay in aad xal soo jeediso marka aanad wax badan ka garanayn dhibaatada.

— *Malcolm Forbes*

Mar baan isku dayay in aan suulasheyda ku istaago si aan meel fog wax uga arko, laakiin waxa aan ogaaday in aan meel ka sii fog wax ka arki karo haddii aan koro meel ka sarreysay halkan aan joogo.

— Xun Zi

Carruurta: Labada sanno ee ugu horreeya waxa aad ku qaadanaysaa in aad iyaga barto sidii ay u socon lahayeen iyo sidii ay u hadli lahayeen. Markaas kadib, 16-ka sanno ee xiga waxa aad ku qaadaneysa u sheegidda in ay fadhiistaan iyo in ay aamusaan.

— Qoraha lama yaqaan

Ii dembi-dhaaf micne la'aantayda, sida aan aniguba u cafiyo micno-darrada kuwa isleh wax macno leh baad ku hadleysaan.

— Robert Frost

Waxa ay dumarku keliya u baahan yihiin saddex wax inta ay nool yihiin: cunto, biyo iyo ammaan.

— Chris Rock

Haweenayda oo keliya ayaa kaaga dhigi karta wax qaldan wixii wanaagsana ee aad sameynaysay.

— Chris Rock

Marka uu qof ku dhaco god uu isagu gacantiisa ku qoday, waa waqti ku fiican in uu eego tayada shaqadiisa.

— *Jon Remmerde*

Haddii qalabka keliya ee aad haysataa yahay dubbe, dhibaato kastaa waxa ay kuula muuqaneysaa sida musmaarka oo kale.

— *Abraham Maslow*

Ha dhihin waan aqaan nin gebi ahaantiis ilaa aad isaga la qaybsato dhaxal.

— *Johann Kaspar Lavater*

Dad aad u badan ayaa raba in ay kula raacaan *Limo*-ga (Baabuur), laakiin waxa adigu aad rabtaa waa qof baska kula qabsada marka *Limo*-hu uu jabo.

— *Oprah Winfrey*

Cidladu waa meel wanaagsan oo la booqdo, laakiin waa meel ku liidata joogista.

— *Josh Billings*

Waxaa wax lagu qoslo ah nolosha; haddii aad iska diiddo in aad aqbasho wax aan ka ahayn waxa ugu fiican, waxa ay u badan tahay in aad hesho.

— *W. Somerset Maugham*

Hoggaamiyuhu waa rejo-ka-ganacsade.

— Napoleon Bonaparte

Dhis riyada adiga kuu gaarka ah, ama qof kale ayaa kuu shaqaaleysiin doona sidii aad riyadiisa u dhisi lahayd.

— *Farrah Gray*

Haddii lagaa siiyo kursi dayax gacmeed dushiis, ha isweyddiin kursiga noociisa ama meeesha uu ku yaallo! Iska fadhiiso uun.

— *Sheryl Sandberg*

Maalmaha qaar waxa aan ismoodaa in aan yara quruxsanahay, laakiin maalmaha kale waxa aan isku dayaa sidii aan uga dheeraan laha muraayadda.

— *David Alan Grier*

Dadka caanka ahi waa kuwo si adag u shaqeeya si ay u noqdan qof dadka oo dhan yaqaannaan, kadibna waxa ay xirtaan muraayado madmadow si ay uga fogaadaan in la aqoonsado.

— *Fred Allen*

Ha ugu yeedhin adduunka wasakh, maxaa yeelay waxa aad soo illawday (hilmaantay) in aad soo nadiifiso muraayadahaaga indhaha.

— *Aaron Hill*

Sababta aan isu la hadlo waa in aan ahay qofka keliya ee aan jawaabtiisa aqbalo.

— *George Carlin*

Weligaa ha aaminin talada nin nolol adag ku jira.

— *Aesop*

Markii aan yaraa waxa aan u **maleyn** jiray in lacagtu wax walba tahay; hadda oo aan weynaaday waxa aan **ogahay** in ay tahay.

— Oscar Wilde

Dadka waaweyni wax walba waa ay aaminsan yihiin, da'da dhexe wax walba waa ay ka shakisan yihiin, dhallinyaraduna wax walba waa ay og yihiin.

— *Oscar Wilde*

Ma wajihi kartid dhibaatadaada haddii dhibaatadaaduba tahay wejigaaga!

— *Qoraha lama yaqaan*

Guurka wanaagsani wuxuu dhex yaallaa gabadh indho-la' iyo nin dhaga-la'.

— *Michel de Montaigne*

Wanaag in la sameeyo waa sharaf. In loo sheego dadka kale in ay wanaag sameeyaanna waa sharaf labo jibbaaran **kana hawl yar**.

— *Mark Twain*

Marka aan hayo feker, waxaan ahay sida gabadh uur leh. Keliya waa in aan banaanka keenaa.

— Abdolkarim Soroush

Marka ninku garwaaqsado inuu Aabbihii saxsanaa, wuxuu dhalay wiil kaas oo u malaynaya inuu isagu qaldan yahay.

— Charles Wadsworth

Waan dayactiri kari waayay joojiyahaaga (bireeggaaga), sidaas darteed wax aan dalacay codka hoonkaaga.

— Steven Wright

Ninka guuleystay waa ninka sameeya lacag ka badan inta ay xaaskiisu isticmaasho. Naagta guuleysatayna waa ta hesha nin noocaas ah.

— Lana Turner

Waxa aad iska ilaalisaa dhakhtar dhallinyaro ah iyo timo-jare da' ah!

— Benjamin Franklin

Soo-galootiga sharci darrada ahi waligoodba dhibbay ku hayeen Maraykanka. Bal weyddii Hindida Cas-cas.

— *Robert Orben*

Waxaa ka fiican in aad adkaato intii aad noqon lahayd quruxley aan waxtar lahayn.

— *Lilith Saintcrow*

Ma jirto naag sida runta ah rabta in ay nin hesho; keliya waxa ay rabtaa in uu isagu helo iyada.

— *Elizabeth Peters*

Si aan dadka uga qosliyo waxa aan u baahanahay oo keliya beer, boolis iyo gabadh qurxoon.

— *Vernon Howard*

Kalluun iyo martiba saddex maalmood gudohood ayay ku uraan.

— *Benjamin Franklin*

Weligaa hala dagaalamin qof foolxun; isaga waxba kama xumaanayaan ileen e.

— *Robin Williams*

Waxa aan ku sugnaa bandhig Jarmalka ahaa, (waraysi), haweenay ayaana i wayddiisay ‘Mr. Williams, maxaad ugu malaynaysaa in maaddu ku yartahay dalka Jarmalka?’ waxa aan

ku idhi, ‘Weligiin ma ka fekerteen in aad disheen dadkii maadda lahaa oo dhan?’

— Robin Williams

Qof ayaa albaabka igu soo garaacay ina wayddiistay in aan wax yar ugu deeqo berkad maxalli ah, waxa aan anna ku darsaday koob biyo ah.

— Will Ferrel Parody

Saddex qof sir waa ay qarin karaan, haddii laba ka mid ahi ay dhintaan.

— Franklin

Dadka waaweyni inta ay fadhiistaan ayay isweyddiiyaan ‘Waa maxay waxani?’, laakiin gabannadu waxa ay isweyddiiyaan ‘Maxaan ku qaban karaa waxan?’.

— Steve Jobs

Haddii aad rabto in aad noqoto laba-wajiile, ugu yaraan mid ka mid ah qurxi.

— Marilyn Monroe

Maalin kasta dadku waxa ay toostoosiyaan timahooda, waa maxay sababta ay qalbigooda u toostoosin waayeen maalin kasta?

— Ernesto Che Guevara

Waxa u wanaagsan ee aad u samayn kartid dadka saboolka ahi waa in aanad ka mid noqon!

— *Reverend Ike*

15
MAAHMAAH

Haddii uu baaba'o cadawga guduhu, cadawga debeddu wax awood ah uma laha in uu ku dhibo.

— *Maahmaah Hindi*

Been si wacan loo sheegay waxay ka kala gooshi kartaa Baqdaad ilaa Konistantinoobel (Istanbul), inta ay runtu weli sandalkeedii raadsanayso!

— *Maahmaah Carbeed*

Sirdoon la'aantu waa saboolnimada ugu weyn.

— *Maahmaah Carbeed*

Cadowgaaga mar iska eeg, saaxiibkaana kun mar iska eeg. Saaxiib laba wajiilaha ah wuxuu ogyahay wax badan oo adiga ku dhibaya.

— *Maahmaah Carbeed*

Iska ilaali in aad wax la wadaagto beenaalayaasha, lakiin haddii aanad iska ilaalin karin, ha rumeysan.

— *Maahmaah Carbeed*

Hadalku bariiska ma kariyo.

— Maahmaah Chinese ah

Sababta shinbirtu u heestaa ma aha in ay jawaab hayso, ee waa in ay hees hayso! *— Maahmaah Chinese ah*

Waqtigii ugu wanaagsanaa ee geed la beeraa waxa ay ahayd 20 sanno ka hor. Marka labaad ee ugu wanaagsanna waa hadda.

– Maahmaah Chinese ah

Safarka kunka mayl ahi wuxuu ka bilaabmaa hal tallaabo.

— Maahmaah Chinese ah

Haddii aad dulqaadato waqtiga aad cadheysan tahay, waxa aad ka baxsan doontaa boqol maalmood oo murugo ah.

— Maahmaah Chinese ah

Waan maqlaa – Waan illaawaa.
Waan dhegaystaa – Waan fahmaa.
Waan sameeyaa – Waan xasuustaa!

— Maahmaah Chinese ah

Dhammaan ubaxyada berri waxa ay ku jiraan midhaha maanta.

— Maahmaah Chinese ah

Guuldarradu ma aha in aad kuftid, balse waa in aad diiddid in aad kor u kacdid!

— Maahmaah Chinese ah

Wax kasta oo aad ku baahi-beeli kartaa waa cunto fiican.

— Maahmaah Chinese ah

Ninka naftiisa ku kalsoon wuxuu muteystaa kalsoonida dadka kale.

— Maahmaah Hasidic ah

Marka aad khudaar cunaysid, ka feker qofkii beeray geedkaa.

— Maahmaah Vietnamese ah

Marka jeebkaaga lacag ku jirto, waxa aad tahay nin caqli badan oo qurux badan oo cod macaan, sidoo kale.

— Maahmaah Yiddish ah

Marka nasiibku kuu soo galo, kursi u dhig!

— Maahmaah Yuhuudi ah

Welwelku inta badan wax yar ayuu siiyaa hadh weyn.

— Maahmaah Swedish ah

Hal nin oo aad aamini karto ayaa ka wanaagsan ciidan dhan oo fuleyo ah.

— Maahmaah Masri ah

Haddii aan Hooyadaa ku barin, nolosha ayaa ku bari doonta.

— *Maahmaah Swahili ah.*

Qof kale daawo uma qaadan kartid.

— *Maahmaah Tanzanian ah*

Waa tallaabada ugu horraysa waxa adagi.

— *Maahmaah Nigerian ah*

Geed ma dhaqaaqo illaa iyo in ay dabayl jirto mooyee.

— *Maahmaah Nigerian ah*

Laba qudhaanjo ahi kuma guul-darraystaan in ay kabbajaa jiidaan.

— *Maahmaah Afrikaan ah*

Haddii aad doonaysid in aad buuraha qaaddid berrito, waa in aad dhagxaanta sii qaadqaaddaa maanta.

— *Maahmaah Afrikaan ah*

Gabdhaha aan niikin (jaasi) karini waxa ay eedda saaraan durbaanka.

— *Maahmaah African ah*

Marka xuubabka caaradu midoobaan, way dabi karaan libaax!

— *Maahmaah Afrikaan ah*

Gaajadu dhulka ayay dhigtaa xitaa dagaalyahanka ugu adag.

— *Maahmaah Zambian ah*

Laba hadal badan isla socdaalkoodu ma sii dheeraan doono.

— *Maahmaah Spanish ah*

Wax aanad naftaada la jeclayn anigana ha ila jeclaan.

— *Maahmaah Spanish ah*

Ninku waa ka adag yahay birta, ka kakan yahay dhagaxa, wuuna ka jilicsan yahay ubaxa.

— *Maahmaah Turkish ah*

Ma jiro wax ka qaalisan waqtiga!

— *Maahmaah Czech ah*

Waxa aad ka heli kartaa cadowga ugu xun ama saaxiibka ugu fiican naftaada gudaheeda.

— *Maahmaah English ah*

Waa wax aan macquul ahayn in nin hoggaamiyo dadka kale, isaga oo aan awoodin in uu naftiisa hoggaamiyo.

— *Maahmaah Latin ah*

Kuf toddoba jeer, marka siddeedaad istaag.

— *Maahmaah Japanese ah*

In aad hal maalin sida libaaxa u noolaatid ayaa ka wanaagsan in aad 1000 sanno u noolaatid sida laxda.

— *Maahmaah Tibetan ah*

Cunug bilaa waxbarasho ahi waa sida shinbir bilaa baalal ah.

— *Maahmaah Tibetan ah*

Waxbarashadu waa maquunnada (Hadyadda) aanay cidina inaga qaadan karin.

— *Maahmaah Maraykan ah*

Wadajirnimadeenna qalcado ayaa ku dhisma!

— *Maahmaah Ayrish ah*

Haddii aad tahay marti, martiqaadahaaga eygiisana u noqo marti.

— *Maahmaah Ruusha ah*

16
MURTI

Hodantinimada dhabta ahi waa caafimaadka ee ma aha waxoogaha dahab iyo lacag ah.

— *Mahatma Gandhi*

Haddii aan rabo in aan u heeso sida qof kale, dee markaas umaba baahni in aan heeso.

— *Billie Holiday*

Dhibaatooyinka aan anigu naftayda u geystay ayaa inta ay doonaan ka badan dhibaatooyinka qof kale ii geystay!

— *George Bernard Show*

Qof kastaa isaga ayaa ka mas'uul ah caqligiisa, isaga ayaana ka mas'uul ah natiijooyinkiisa.

— *Milton Erickson*

Wax kasta waa loo sharxi karaa dadka, hal shardi oo keliya ayaa ayse ku xidhan tahay; in aad adigu rabto in ay fahmaan.

— *Frantz Fanon*

Wax macno ah sameyn mayso in aad ogtahay dunida waxa ka dhacaya, waxa macnaha samaynaya waa in wax laga beddelo.

— *Frantz Fanon*

[Labadaada indhood,] ili wax ayay aragtaa, isha kalana way dareentaa! — *Paul Klee*

Maraykannimadu ma aha arrin ku xidhan maqaarka jidkaaga ama midabkaaga.

— *Daniel Inouye*

Waxa aan xoreeyay kun addoon kun kalena waa aan xoreyn lahaa haddii ay og yihiin in ay addoomo yihiin.

— *Harriet Tubman*

Daacadnimadu waa cutubka ugu horreeya ee buugga xikmadda.

— *Thomas Jefferson*

Haddii aad yey la nooshahay, waa in aad u dhaqantid sida yeyda!

— *Nikita Khrushchev*

Dhammaan fannaaniinta wanaagsani waxa ay og yihiin in qayb ka mid ah hawshoodu tahay in ay ka dhex ifaan inta u dhexaysa laba qof.

— *Nadeem Aslam*

Beenta haddii ay toban qof inoo sheegaan run kama dhigto taasi.

— *Nadeem Aslam*

Xaqiiqooyinka oo dhan waa ay fududdahay in la qaato marka la ogaado; keliyaata muhiimaddu waa in aad ogaatid!

— *Galileo Galilei*

Wax yari waa wax yar uun, balse in aad iimaansato waxa yari waa wax weyn!

— *Hudson Taylor*

Weligay baraf ma arag, Jiilaalkana ma aqaani!

— *Duke Kabanamoku*

Waxa ay u muuqataa waxa ugu weyn ee aynu ku faanno iyo waxa ugu weyn ee aynn ka xishoonno in ay yihiin hal shilin labadiisa dhinac.

— *Natsuo Kirino*

Gabadha aan garanayn nafteeda, waddo kale oo u bannaan ma jirto oo aan ka ahayn in ay aqbasho sida dadka kale ku qiimeeyaan.

— *Natsuo Kirino*

Ninka la taliya qof aan taladiisa daneynayn isaga qudhiisa ayaa talo u baahan.

— *Saadi*

Xusuusnow had iyo jeer. Xusuusnow in adiga iyo anigu socdaalkan ka soo wada bilawnay meel aanay jirin waddo toos u timmaada halkan.

— *Jhumpa Lahiri*

Anigu ma aaminsani wax la dhaho go'aan saxan; ee go'aanka ayaan qaataa ka dibna waxa aan ka dhigaa mid saxan!

— *Muhammad Ali Jinnah*

Inta aanad go'aan qaadan, boqol jeer ka sii feker, balse marka aad sidaa u qaadatid go'aanka, gaadh ka hay!

— *Muhammad Ali Jinnah*

Carrabku waa waxa keliya ee ku sii soofaysma isticmaalka.

— *Washington Irving*

Baadilka iyo xumuhu waa ciidan ka mid ah ciidammada xaqa, sababta oo ah marka uu gacan sarreeyo baadilku dadkuna dhibtiisa dareemaan ayay ku qaylodhaan dirsadaan 'Xaqii meeyayeey', markaas ayuu Eebbe xaqa gacan sarraysiiyaa!

— *Sh. Maxamed M Shacrawi*

Hadafkayagu waa islaaminta Muslimiinta, hilinka aanu u maraynaana waa rumayn iyo halgan!

— *Alija Izetbegovic*

Gobannimada waxa hindisaheeda keena nin aqoonyahan ah, waxaa u halgama naftii-hure, waxaana hadhow u aaya nin aan intaaba ahayn oo aan warkaaba hayn waxna aan ku darsan!

— *Qoraha lama yaqaan*

Waxa aad leedahay fikrado aniguna waxa aan leeyahay fekrado ii gooniya. Tani waa xaqiiqada waxna kama beddeli kartid xitaa haddii aad i disho.

— *Ba Jin*

Marka aan Shiinaha joogno, waxa aan rumaysan nahay 'Dhac hodanka si aad u quudiso saboolka.' Laakiin mooriyaanta halkani maba laha gabayo.

— *Xiaolu Guo*

Waxa aynu dhalanaa inagoo ooyayna, waxa aynu noolaanaa inagoo cabaneyna, waxaynu dhimmannaa inagoo niyad jabsan.

— *Thomas Fuller*

Waxa aan bartay in ay muhiim tahay in aanad naftaada xaddidin. Waad samayn kartaa wax walba oo aad si dhab ah u jeceshahay in aad u samayso, waxa ay doonaan ha ahaadaan.

— *Ryan Gosling*

Seeska wax kasta oo qaayo lehi waa aaminidda nafta iyo ogaanshaha cidda aad tahay.

— Jay-Z

Haddii aanay rejo jirin, qalbigu wuu jabi lahaa.

— Thomas Fuller

Ha isku dayin in aad wax walba fahanto. Maxaa yeelay, mararka qaarkood looguma talagelin in la fahmo, waa in aad aqbashaa uun.

— Qoraha lama yaqaan

Haddii aynu si dhab ah u fahamno dhibaatada, jawaabtu iyada ayay ka soo dhex bixi, maxaa yeelay jawaabtu gooni kama aha dhibaatada.

— Jiddu Krishnamurti

Dhibaato si wanaagsan loo dersay waa dhibaato badhkeed la xalliyay.

— Charles Kettering

Qofka isku daya in uu laba waddo ku socdaalo hal mar, meel uu u socdaa ma jirto.

— Xun Zi

Marka aad u kacdo raadinta malab, waa in aad filataa qaniinyada shinnida.

— Joseph Joubert

Ha daba ordin lacagta ee bilaw in aad daba oroddo hammiga.

— *Tony Hsieh*

Ma aha doonista guusha, laakiin waa doonista u diyaargarowga sidii aad u guuleysan lahayd waxa isbeddelka samaynaya.

— *Bear Bryant*

Qof kasta wuu dhali karaa, laakiin wax badan ayay kaa rabtaa in aad waalid noqoto.

— *Qoraha lama yaqaan*

Waxa aan isku arkay anigoo ku dhex jira bad mowjadaha farxadda iyo murugadu iska hor imaanayaan oo isku dhacayaan.

— *Naguib Mahfouz*

Mararka qaar waxa ay kugu qaadaneysaa in aad si wanaagsan u dhacdo si aad si dhab ah ugu ogaato halka aad taagan tahay.

— *Hayley Williams*

Haddii aad rabto wax aad tidhahdo, nin weyddii; haddii aad rabto wax la qabto, dumar waydii.

— *Margaret Thatcher*

Waa in aynaan had iyo jeer suuqa kaga hadlin wixii kaynta markii aynu joognay innagu soo dhacay.

— Nathaniel Hawthorne

Marka aad isku kalsoontahay, waxa aad gelaysaa jewi wanaagsan. Marka aad jewi wanaagsan ku jirtana, waxa aad sameyn kartaa waxyaabo la yaab leh.

— Joe Namath

Waxa aad dhahdo oo keliya masuuliyad kaama saarna, laakiin sidoo kale waxa aanad dhihinna masuuliyad ayaa kaa saaran.

— Martin Luther King, Jr.

Warcelinta ka raadi wayddiintaada dhexdeeda!

— Jalaala'ddiin AlRumi

Dhibta u weyni waa in aanad dareemin in dhibi jiro. Addoonnimada heerka u sarreeyaana waa in aad dareentid in aad xor tahay adiga oo labada gacmoodba si adag uga jeebbadaysan.

— Salih Hashim

Marka aad aragtid ruux dareenkiisu qabow iska yahay, oo aan danaynna, ogsoonow qofkaasi waxa maandooriyay xannuun badan e!

— Abraham Lincoln

Dadku waxa ay dhahaan 'Waxa aan rabaa in aan taajir noqdo'. Su'aasha meesha taallaa waa, 'Diyaar ma u tahay in aad sameyso wax kasta oo ay kugu qaadanayso?'

— Robert Kiyosaki

Haddii uu ninku heli lahaa kala badh waxyaabaha uu rejeeyo, waxaa laba-laabmi lahaa dhibaatooyinkiisa.

— Benjamin Franklin

Su'aashu ma aha yaa ii ogolaanaya; su'aashu waa yaa iga hor istaagaya.

— Ayn Rand

Haddii aad madaxaaga dhigto afka libaaxa, markaas kama caban kartid haddii uu maalin uun kaa qaniino madaxa.

— Agatha Christie

Xaasidnimadu waxa ay ka timaaddaa aqoondarrada dadka, ama ka maqnaanshaha rumeysadka hibooyinka iyaga u gaarka ah.

— Jean Vanier

Aabbahay wuxuu yidhi waxaa dunida ku nool laba nooc oo dadka ah: kuwo wax bixiya iyo kuwo wax qaata. Kuw wax qaataa laga yaabaa in ay cunto fiican cunaan, laakiin kuwa wax bixiyaa waxa ay seexdaan hurdo fiican.

— Marlo Thomas

Waxba kama beddeli karno dabaysha, laakiin waxa aynnu giijin karnaa shiraacyadeenna.

— Qoraha la ma yaqaan

Waxtar ma leh hadalku haddii aanay dadku ku fahmayn waxa aad leedahay.

— Zora Neale Hurston

Waxaad aad u rabto in aad ka oroddo waa waxa aad inta badan u baahan tahay in aad wax ka qabato.

— Truth Devour

Samirku waa hub qarsoon oo ku qasba dhagartu in ay ismuujiso iyada qudheedu.

— A.R Bernard

Ma nadiifisid wax adiga oo aan wax kale wasakhayn.

— Cecil Baxter

Nuug oo jaq wixii fa'iido leh, tuur wixii aan fa'iido lahayn, ku dar wax adiga kuu gooni ah.

— Bruce Lee

Walxuhu isma beddelaan; innag ayaa isbeddelna.

— Henry David Thoreau

Xikmadda keliya ee runta ah waa ogaanshaha in aanad waxba ogayn.

— *Socrates*

Waa ay fududdahay in la khiyaano indhaha, laakiin waa ay adag tahay in wadnaha la qaldo.

— *Al Pacino*

In uu ninku xariif yahay iyo in kale waxa aad ka garan kartaa jawaabihiisa. In ninku caqli leeyahay iyo in kalana waxaa aad ka garan kartaa su'aalihiisa.

— *Naguib Mahfouz*

Sidee ayuu qalbigu u aadi karaa dhanka Rabbi, marka uu ku silsiladeysan yahay damacyadiisa?

— *Ibn Arabi*

Ma jiraan wax si dhab ah qasaare u ah. Waxaasi keliya meeshii ku habboonayd ayaanay joogin.

— *Suzanne Mueller*

Taajku haddii uu ina wax yeellaynayo, uma qalmo in la xidho.

— *Pearl Bailey*

Weligeed ma uu jirin nin wanaagsan kaas oo aan lahayn Hooyo wanaagsan.

— *Olive Schreiner*

Sida caadiga ah waxa aan dhahaa waxa aan sameeyey sidii ugu wanaagsanayd wixii aan haystay. Ma jirto qoomamo weyn oo i haysaa.

— Stokely Carmichael

Carruurtu waxa aad barto wax ka badan ayay ka bartaan waxa aad tahay.

— W.E.B Dubois

Qofna ima bari karo cidda aan ahay. Waxa aad tilmaami kartaa qaybo iga mid ah, laakiin cidda aan ahay – iyo waxa aan rabo – waa wax aan u baahanahay in aan anigu ogaado.

— Chinua Achebe

Waxbixintu waa arrin ku xidhan qalbiga, ha dhihin waxa ay ku xidhan tahay xoolo badni.

— Xikmad Swahili ah

Si uu nin u noqdo gabyaa waa in uu jacayl hayo, ama murugaysan yahay.

— George Gordon

Marka aad gaadho xiddigaha, waxaa laga yaaba illaa xad in aadan mid soo qaadan, laakiin sidoo kale la ma soo noqon doontid gacmo dhiiqo leh.

— Leo Burnett

Denbiyadu waxa ay qalbiga u waxyeellaan si la mid ah sida suntu jidhka u waxyeesho.

— Ibn Al-Qayyim

Ninka runta ahi waa kan ka cabsada in qalbigiisu dhinto, ee aan dan ka gelin dhimashada jidhkiisa.

— Ibn Al-Qayyim

Adduunyadu waa sida hadhka oo kale; haddii aad eryatid, weligaa qaban maysid. Haddii aadse ka soo jeesatid oo aad dhabarka u jeedisid, waxa ay ku qasban tahay in ay ku soo daba gasho!

— Ibn Al-Qayyim

Haddii aanad adigu Eebbe raalligelin, sidee ayaad Isaga uga filanaysaa in uu ku raalligeliyo?!

— Yahya ibn Mu'aadh

Haddii aad rabto in ubadkaagu ay cagahooda dhulka ku hayaan, garbahooda saar waxooga masuuliyad ah.

— Abigail Van Buren

Mararka qaar ninka ugu saboolsan ayaa uga taga carruurtiisa dhaxalka ugu qiimaha badan.

— Ruth E. Renkel

Haddii qof uu u maleeyo in aanay jirin wax ay masuuliyad ka saaran tahay, sababtu waa isaga ayaan doon-doonin.

— Mary Lyon

Bannaanka waxa aad kala kulmaysaa keliya waxa aad adigu gudaha ku haysatay.

— Adolfo Montiel Ballesteros

Waxa jiifa gadaasheenna iyo waxa jiifa horteennu waa waxyaabo aad u yar marka la garab dhigo waxa innaga ina dhex jiifa.

— Ralph Waldo Emerson

Dunidaada hadda ku gado dunidaada danbe, labada duniba waad heli midhahooda e. Balse dunidaada danbe ha ku gadan dunidaada maanta, labadoodaba waad waayi e!

— Hassan Al-Basri

Dadka quruxda badani mar kasta ma aha kuwo wanwanaagsan; balse kuwa wanwanaagsani waa kuwo mar kasta qurux badan.

— Ali bin Abi-Dalib

Haddii dunidan suuq la soo dhigi lahaa si loo iibsado, ma aan siisteen jab roodhi ah, dhib badnaanteeda darteed!

— Imam Shafici

Nin ayaa u socdaalay adduunka oo dhan isagoo raadinaya waxa uu u baahan yahay, kadibna wuxuu ku soo laabtay hoygiisa si uu u helo wuxuu raadinayey.

— George Moore

In ay kaa xanaajiyaan wax aanad haysan waa in aad qasaarisay waxa aad haysatay.

— Ken S. Keyes, jr.

Waxa wadnuhu maanta og yahay, madaxu wuxuu fahmi doonaa berri.

— James Stephens

Ninka yar wuxuu og yahay xeerarka, laakiin ninka weyn wuxuu og yahay waxyaabaha la filan karo.

— Oliver Wendell Homes Sr.

Hoygu waa meesha marka aad kortid ka tagtid, marka aad weynaatana aad dib ugu laabatid.

— John Ed Pearce

Adigaa iska leh meeshaas marka aad garaneysid halka ay tegayaan dhammaan waddooyinkeedu.

— Stephen King

Xaqiiqadu uma baahna indho arka ee waxa ay u baahan tahay garaad dareema!

— Murti

Waxaa jirta hal wax oo ka xun in aad cidlootid; rejaynta in aad ahaan lahayd.

— Bob Steele

Nin kaama fuuli karo dhabarka ilaa aad u soo foorarsatid.

— Martin Luther King Jr.

Caqli badnaan aan lahay hammadi waa sida shinbir aan lahayn baalal.

— C. Archie Danielson

Waxa ugu danbeeya ee qofku ogaado waa wixii uu ugu horreysan lahaa.

— Blaise Pascal

Haddii aynu subax ku soo toosi lahayn innaga oo isku midab iyo isku isir wada ah, haddana maynaan wayneen sabab aynu ku kala tagno isla duhurkaba!

— George Aiken

Dadku waa noolaha keliya ee diida in uu noqdo waxa uu yahay!

— Albert Camus

Marka waxa aad arkaysid iyo waxa aad maqlaysa isyeelan waayaan, indhahaaga ku kalsoonoow!

— Dale Renton

Rumayso, kuwa xaqiiqada raadiyaa way ka shakiyaan kuwa helay!

— André Gide

Qofku wax kaleba maaha ee waa waxa uu naftiisa ka dhigo!

— Jean Paul Sartre

Suurtagal ma aha in damiirkaaga aad raalligelisaa. Mar allaale marka aad istidhaahdid iminkuu damiirkaagii kaa raalli ahaaday, run ahaan kaamuu raalli noqonin e waa mar uu dhintay!

— Dr. Mustafa Maxmuud

Si aad ugu dhex guulaysatid bulsho wada xun, waa in aad xumaanta kaalinta koowaad u gashaa!

— Mohamud Ciraaqi

Waxa laga yaabaa in aad dhaawac iska dhaaftid, balse weligaa ilaawi maysid!
— Aesop

Marar badan ayuu tareenka khaldani i geeyaa goobta saxda ah!

— *Palo Kappelo*

Ama waxa aan heli waddo, ama aniga ayaa sameyn mid.

— *Philip Sidney*

Haddii aad keliya garaacdo muddo ku filan iyo sanqadh ku filan iridda, waxa aad hubtaa in qof kacayo.

— *Henry Longfellow*

Jidka toosan weligii kuguma hoggaamiyo meel kale aan ka ahayn himiladaada.

— *Andre Gide*

Qof walba wuxuu sheegayaa in uu rabo in uu noqdo xor. Tareenka ka deji waddada kadibna waa xor – laakiin meelna ma tegi karo.

— *Zig Ziglar*

Ku rid ukuntaada oo dhan hal danbiil, kadibna danbiishaas ilaali.

— *Andrew Carnegie*

Dhibaatooyinka waaweyni waxa ay soo saaraan rag waaweyn iyo camal weyn oo geesinimo ah.

— *John F. Kennedy*

Kuma filna in aad mashquul ahaatid, sidaas oo kale qudhaanjaduba waa mashquul. Su'aashu waa, maxa aynu mashquul ku nahay?

— *Henry David Thoreau*

Ma beddeli kartid tagtada, laakiin waxa aad burburin kartaa joogtada adigoo ka werweraya mustaqbalka.

— *Qoraha la ma yaqaan*

Hoggaamiyuhu wuxuu ka fekeraa oo ka hadlaa xalka. La-hoggaamiyayaashu waxa ay ka fekeraan oo ka hadlaan dhibaatooyinka.

— *Brian Tracy*

Waxa aan noqonnaa waxa aynu ka fekerno.

— *Earl Nightingale*

Ha isku qaldin dhaqaaq iyo horusocod. Faraska ruxmayaa waa u dhaqdhaqaaqaya laakiin ma sameynayo wax horusocod ah.

— *Alfred A. Montapert*

Ninka hodanka dhabta ahi waa ka carruurtu u soo oroddo garbihiisa marka ay gacmihiisu madhan yihiin.

— *Qoraha la ma yaqaan*

Qof kastaa wuu qaban karaa shokaanta markabka marka baddu deggentahay.

— *Publilius Syrus*

Waxa aan kugula talinnaya in aad ilaalisid daqiiqadaha; saacaduhu iyaga ayaa is-ilaalin doona e.

— *Lord Chesterfield*

Dayaxa toogo. Xataa haddii aad la weydo, xiddigaha ayaa aad la heli doontaa.

— *Les Brown*

Naftaada oo aad aqoon u yeelataa waa bar-bilawga MURTI oo idil!

— *Aristotle*

Aqoontu way hadashaa, murtiduna waxbay dhegaysataa!

— *Jimi Hendrix*

Waxa murtiilaha inaga dhigaa ma aha dib u soo uruursashada tagtadeennii ee waa xil iska saarista timaaddadeenna!

— *George Bernard Shaw*

Murtida runta ahi waxa ay tahay tixgelinta walxaha yaryar iyada oo maanka lagu hayo in ay noqon karaan kuwa ina geyn kara meesha aynu rabno in aynu tagno. — *Paulo Coelho*

Sida biyuhu lama-degaanka u yihiin ayay murtiduna maskaxda u tahay!

— *Edward Counsel*

Mararka qaar… '**Waxba'** ayaa aad ugu fiican '**Wax'**.

— *Arafath Shanas*

Cidda maamusha warbaahinta, ayaa maankana maamusha.

— *Jim Morrison*

Baalal waa aad dul saari kartaa doofaarka, laakiin kama aad dhigin gorgor.

— *William J. Clinton*

Xaqiiqdii wax aan hore loo dhihin oo hadda la dhaho ma jirto.

— *Terence*

Kama xanaaqsani in aad been ii sheegtay, waxa aan ka xanaaqsanahay hadda laga bilaabo in aanan ku rumaysan karin.

— *Friedrich Nietzsche*

Xorriyaddu waa xaqa loogu sheego dadka waxa ayna dooneyn in ay maqlaan.

— *George Orwell*

Waxa aan in badan ixtiraamaa ninka i ogeysiiya halka uu iga taagan yahay, xataa haddii uu qaldan yahay. Marka loo eego ka iskaga key dhiga malag aanu ahayn laakiin shaydaanka ah.

— Malcolm X

Dal si fiican loo maamulo, saboolnimadu waxa ay ka noqotaa wax laga xishoodo. Dal si xun loo maamulo dhexdiisana, hantidu waa wax laga xishoodo.

— Confucius

Maskaxaha fiican waxa ay lafa-guraan fekradahooda; maskaxaha dhexdhexaadka ahina waxa ay lafa-guraan dhacdooyinka; maskaxaha yaryarina waxa ay lafa-guraan dadka.

— Eleanor Roosevelt

Haddii aad aamusiisid runta, oo aad ku aastid dhulka hoostiisa, waa ay soo bixi doontaa.

— Emile Zola

Wax kasta oo aynu maqalno waa feker, ma aha xaqiiqo dhab ah. Wax kasta oo aan aragno waa muuqaal, ma aha runta.

— Marcus Aurelius

U fiiri si qoto dheer dabiiciga, kedib waxa aad si fiican u fahmi doonta wax walba.

— Albert Einstein

Wixii sare tagaa waa qasab in ay hoos usoo degaan.

— Isaac Newton

Waan ogahay waxa aan ku siiyey… Lakiin ma ogi waxa aad heshay.

— Antonio Porchia

Waxa aad cuntid ii sheeg, anna waxaan kuu sheegi doonaa qofka aad tahay.

— Jean Anthelme Brillat-Savarin

Geedaha aayar u baxa ayaa ugu midho fiican.

— Moliere

U ma baahnin in aynu wadaagno feker isku mid ah sida dadka kale, laakiin waxa aynu u baahan nahay in aynu noqono dad is-ixtiraaam leh.

— Taylor Swift

Rumaysadku waa shimbir dareemaysa iftiin markii waaberi uu weli gudcur ku jiro.

— Rabindranath Tagore

Si aan u ogaanno meesha aynu u soconno, waxaa fiican in aynu ogaanno meesha aynu ka nimi. *— Franck Biancheri*

Haddii aad rabto in aad fahamto maanta, waa in aad raadisid shalay.

— *Pearl Buck*

Adigaa ku ducaystay roob, sidoo kale dhiiqaduna waa ku jirtaa heshiiska!

— *Denzel Washington*

Dhirtaydii been-abuurka ahayd waa ay dhimatay, waayo ma aan iska yeelyeelin sida qof waraabinaya oo kale.

— *Mitch Hedberg*

Haddii aanad si fiican u samayn karin, ugu yaraan u eekeysii in ay fiicantahay.

— *Bill Gates*

Haddii aanad aqoon meesha aad u socotid, jid kastaa wuxuu ku geyn doona meelna.

— *Henry A. Kissinger*

Haddii cidda ay tahay in ay wax maqlaan tahay kuwo dhego culus, waa in jabaqdu aad u sarraysaa!

— *Sardar Bhagat Singh*

Sida jidhkaaga oo kale ayay maskaxdaaduna u daashaa, ee ku nasi odhaahyada xikmadda leh! — *Hazrat Ali*

Adiga oo leh iimaan, anshax iyo danaysi-la'aan; ma jiro wax qiimo leh oo aanad gaadhi karin!

— Muhammad Ali Jinnah

Haddii aad nin kula hadasho luuqad uu fahmayo, hadalkaasi wuxuu aadaya madaxiisa. Haddii aad nin kula hadasho luuqaddiisa, hadalkaasi wuxuu aadaya qalbigiisa.

— Nelson Mandela

Mararka qaar ma garan kartid qiimaha uu xilli go'ani leeyahay ilaa uu ka mid noqdo xasuustaada.

— Dr. Seuss

Waxa u wanaagsan ee aad u samayn kartid dadka saboolka ahi waa in aanad ka mid noqon!

— Reverend Ike

Shalay fariid baan ahaa oo waxaan ka fekereyey adduunka inaan beddelo. Maantase nin xikmad badan baan ahay oo waxaan ka fekerayaa naftayda inaan beddelo.

— Jelalu'ddin Al-Rumi

Farqiga u dhexeeya ninka iyo wiilku waa qiimaha alaabta ay ku ciyaaraan.

— Murti Maraykan ah

Shinbirta saaran laanta geedku kama cabsato in laantu la soo go'do, sababtoo ah kalsooni kuma qabto laantaba ee waxa ay kalsooni ku qabtaa baalasheeda!

— *Qoraha lama yaqaan*

Hadal marka aad xanaaqsantahay, waxaad ku hadli doontaa hadalkii ugu weynaa ee aad abid ka shallayso.

— *Ambrose Bierce*

Ninku ma aha waxa uu u malaynayo inuu yahay, wuxuu yahay waxa uu qariyo.

— *André Malraux*

Haddii aad run sheegeysid, uma baahnid in aad wax soo xasuusato.

— *Mark Twain*

Hooyadu waxa ay jeceshahay in inanteeda uu guursado nin Aabbaheed ka wanaagsani, waxa aanay rumaysan tahay in wiilkeedu aanu helayn gabadh Hooyadii ka wanaagsan.

— Murti Carbeed

Qofkoow, maalintaadu waa martidaada ee marti-soor. Haddii aad hagaajisid sooryadeeda, waxa ay dhammaan iyada oo aan eed kuu hayn. Haddii aad hagaajin waydo sooryaynteedana, waxa ay dhammaan iyada oo eed kuu haysa! — *Hassan Al-Basri*

Haddii aad dunida ka fishid in ay kuu wanaagsanaato sababtoo ah adba waad u wanaagsan tahay, waxa aad la mid tahay ruux ku doodaya libaaxu waa in aanu i cunin waayo anba ma cuno!

— Qoraha la ma yaqaan

Wax kasta oo dunidan yaallaa waa wada dhib, dhimashada mooyaane. Dhimashadu waa dhammaadka dhib oo dhan.

— Anis Mansour

Waxaan arkaa dhammaan koox diimeedyadu in ey si farxad buuxda leh u adeegsadaan garaadka, markii uu iyaga u adeegayo. Markii uu garabkooda ka baxana waxay ku qayla dhaamiyaan 'Mas'aladu waa iimaan, caqligana wey ka sarreysaa.'

— John Locke

Soomaalidu ma aha budhcad-badeed. Innaga [dunida kale] ayaa ah budhcad-badeed. Waxa aynu ka wasakhaynaynaa badahooda.

— Muammar al-Gaddafi

Wanaaggu waa maalgelinta keliya ee aan lagu khasaarin.

— Henry David Thoreau

Waxa aad eegaysaa muhiim ma aha ee waxa aad aragtid ayaa muhiim ah.

— Henry David Thoreau

Ama adiga ayaa ka ordi maalinta, ama maalintaa kaa ordi.

— Jim Rohn

Marka ay kuwa xaqa ku sugani ka aamusaan baadilka, kuwa baadilka ku sugan ayaa loo tuhmi in ay xaq ku sugan yihiin.

— Ali Bin Abi-daalib

Hadalku waa sida kiniinka oo kale; intiisa **yari** waa **dawo**, intiisa **badanina** waa **dilaa**.

—Ali Bin Abi-daalib

Xaashiyaha ayaa loogu talogalay in lagu qoro waxa ay tahay in la xasuusto. Maskaxaheenna waxa loogu talogalay in lagu fekero.

— Albert Einstein

Daqiiqad kasta oo aad cadhootid waxa aad lumisay lixdan ilbidhiqsi oo aad farxi lahayd.

— Ralph Waldo Emerson

Ma jiro hal shay oo weynaa oo dunidan laga gaadhay bilaa xiisayn.

— Georg Wilhelm Friedrich Hegel

Saddex wax ma qarsoomi karaan waqti dheer: Qorraxda, dayaxa iyo runta. *— Siddhartha*

Qofka aan gu'ga iyo ubixiisu dhaqaajin, kamanka iyo xadhkihiisu xadantayn, shinbiraha iyo codkoodu dheelmin wax weyn baa ka si ah.

— *Imam Ghazali*

Kuma xallin karno dhibaatooyinka adeegsiga isla fikirkii aynnu ku abuurnay dhibaatada mid la mida.

— *Albert Einstein*

Falsafadda bilowgeedu waa cilmi jacayl, badhtankeedu waa wax ka ogaanshaha xaqiiqda jirayaasha, dhammaadkeeduna waa samaynta wixii aqooni sugto.

— *Ikhwan Safa'*

Waligaa helimeysid qaanso-roobaad haddii aad ka raadineysid xagga hoose.

— *Charlie Chaplin*

17
MUSUQMAASUQ

Musuqmaasuq; dhibaatada ugu weyn ee bulshada maanta.

— Olusegun Obasanjo

Haddii aynu taariikhda eegno, waxa aynu arki karnaa nidaamyada aan la dooran ee cadaadiya dadkoodu in aanay sii jirin.

— Recep Tayyip Erdogan

Si dhakhso ah u sameynta waxyaabo badan uma dhiganto qabashada waxyaalihii saxda ahaa.

— Stephen R. Covey

Musuqmaasuqu waa cadowga dhabta ah ee horumarka.

— Tsakhiagiin Elbegdorj

Marka lagu jiro xaalad musuqmaasuqu tiro batay, sharciyadu waa in ay aad u tiro bataan.

— Tacitus

Mar kasta oo ay jiraan qaar dadka ka mid ah oo ka fursado badan dadka kale, tani waxa ay quudisaa musuqmaasuqa.

— Enrique Pena Nieto

Waa in aynnu gacan bir ah ku joojinnaa musuqmaasuqa oo aynnu dhisnaa nidaam adag oo caddaalad ah kaas oo dadku ku kalsoonaan karaan. *— Gloria Macapagal-Arroyo*

La-dagaallanka musuqmaasuqu keliya ma aha maamul-wanaag. Waa is-difaacid. Waa waddaninimo.

— Joe Biden

Musuqmaasuqu waa cadowga horumarka, iyo maamul-wanaagga. Waa in laga takhallusaa. Dadka iyo xukuumadduba waa in ay u midoobaan sidii loo gaadhi laha himilada qaran.

— Pratibha Patil

Waajibka dhallinyaradu waa in ay hor istaagaan musuqmaasuqa.

— Kurt Cobain

18
NABAD

Waxa aan aaminsanahay diinta islaamka. Waxa aan aaminsanahay Allah iyo nabad.

— *Muhammad Ali*

Nabad macnaheedu ma aha joojinta dagaallada oo keliya, sidoo kale waa joojinta dulmiga iyo caddaalad-darrada.

— *Tawakkol Karman*

Haddii aad rabto nabad, markaas waa in aad u halgantaa caddaaladda bulashada.

— *Chris Hani*

Haddii aad rabto nabad, uma baahnid in aad la hadashid asxaabtaada. Waxa aad u baahan tahay in aad cadawgaaga la hadasho.

— *Desmond Tutu*

Nabaddu ma aha keliya maqnaashaha rabshado, nabaddu waa marka ubaxu baxo.

— *Amrita Pritam*

Waa in aynu aqbalno kala-duwanaashaheenna dhaqan iyo hidde oo aynu nabad ku wada jirnaa.

— *Haile Selassie*

Dadka haldoorrada ah diintu waxa ay u tahay hab asxaab lagu kasbado … dad tiro yar ayaa diinta ka dhigta agab dagaal!

— *A.P.J. Abdul Kalam*

Marka awoodda jacaylku ka xad badato jeclaanta awoodda ayay dunidu garwaaqsan doontaa nabaddu waxa ay tahay!

— *Jimi Hendrix*

Anigu si buuxda ayaan u taageersanahay wada-xaajoodka iyo wada-shaqayn. Laakiin waa in uu run yahay, wada-hadalka furan.

— *Ma Jian*

Waa in aynu nabad helnaa xitaa haddii ay inagu qaadanayso in aynu u dagaalanno. — *Dwight D. Eisenhower*

Waa xaqiiqo ayaandarro ah in waxa aynu nabadda ku xaqiijin karnaa keliya ay tahay in aynu isu diyaarinno dagaal.

— *John F. Kennedy*

Gadaal ha eegin. Laga yaabaa in wax kaa soo raacaan.

— *Satchel Paige*

Habka ugu fiican ee dhibaato kasta loo xalliyo waa in ay dhammaan dhinacyadu wada fadhiistaan oo wada hadlaan.

— Dalai Lama

Kuma filna nabadda in laga hadlo uun. Waa in qofku aaminsan yahay nabadda. In aad aaminto oo keliyana kuma filna. Waa in qofku ka shaqeeyaa. *— Eleanor Roosevelt*

Nabadda iyo xorriyadda ma kala saari kartid, maxaa yeelay, qofna nabad kuma jiro ilaa inta uu helayo xorriyaddiisa.

— Malcolm X

Nin leh hammi aad u badan nabad kuma seexan karo.

— Baguirmi

Ii aqbal sida aan ahay – markaas kadib uun buu midkeenba kan kale ogaan doonaa.

— Federico Fellini

Waxa aynu u baahannahay in aynu isjeclaanno; noloshu waa nabad iyo heshiis. Taa beddelkeedii, waynu murmaynaa dagaalamaynaana!

— Bob Marley

Waxa ay ku tahay waalli idaha in ay nabad kala hadlaan yey.

— Thomas Fuller

Nabadda laguma hayn karo xoog; waxa kaliya ee lagu gaadhi karaa waa isfahan. — *Albert Einstein*

Marnaba ha degdegin; wax walba u samee si aamusnaan ah adigoo ay kugu jirto ruux deggan. Ha waayin nabadda gudahaaga wax walba oo dhaca, xataa haddii adduunka oo dhan u muuqdo mid xanaaqsan.

— *Saint Francis de Sales*

Nabaddu waa socdaal kun mayl ah waxaa waajib ah in hal tallaabo markiiba la qaado.

— *Lyndon B. Johnson*

Maxaad awoodi lahayd in aad sameyso haddii aanad cabsan lahayn?

— *Spencer Johnson*

Iskuma noqon karno labadabal in aan horyaalka nabadda hoggaaminno iyo in aan ugu badanno qalabka dagaalka.

— *Jimmy Carter*

U hadal si debacsan qaadana ul weyn; meel dheer baad gaadhi doontaa.

— *Theodore Roosevelt*

Badbaadada dadku waa in ay noqotaa sharciga ugu sarreeya.

— Marcus Tullius Cicero

Nabad kama heli karno dunida guudka jeeroynnu gudaha nafaheenna nabad ka dhalinno .

— Dalai Lama

Haddii aad nabad rabtid, jooji dirirta!

— Peter McWilliams

Noqo nabadda aad raadinaysid!

— Fil Tribble

Nabaddu ma aha waxaad rejaynaysid; waa shay aad samaynaysid, waa shay aad qabatid, waa shay aad tahay oo aad hurtid!

— John Lennon

Nabadda adduunka waxa la gaadhayaa marka awoodda jacaylka lagu beddelo awood-jacaylka!

— Sri Chinmoy

Haddii ay tahay in aynu barno nabadda adduunka, haddii ay tahay in aynu dagaal run ah ku qaadno dagaalka, waa in aynu ka bilawnaa ubadka!

— Mahatma Gandhi

Dadka geesiyada ahi kama cabsadaan in ay cafiyaan dadka, nabadda darteed. — *Nelson Mandela*

Weligii ma uusan jirin dagaal wanaagsan ama nabad xun.

— *Benjamin Franklin*

Meeshii jacayl laga helo, nabadna waa laga helaa.

— *Qoraha lama yaqaan*

Haddii qof kastaaba dalban lahaa nabad, halka uu ka dalbanayo qalab TV, nabadi waa iman lahayd.

— *John Lennon*

Nabaddu mar kasta waa qurxoon tahay.

— *Walt Whitman*

Bulsho kasta oo hurta waxoogay xorriyad ah si ay u hesho waxoogay nabad ah, labada midna uma qalanto, labadabana way lumisaa. — *Benjamin Franklin*

Waxa aan gacan ku sidaa laan Saytuun ah, gacanta kalana Baaskooladdii xorraynta. Ha u oggalaannina in laanta Saytuunku gacantayda ka siibato. — *Yasir Arafat*

Marka aynu eegno dadka maanta, waxaad mooddaa inuu la liito fakhri xagga ruuxda kaga yuurursaday. Waynu barannay in aynu hawada u duulno sida haadda, baddana u dabbaalano sida

kalluunka. Laakiin weli maynu baran dhulka guudkiisa in aynu ku soconno innagoo WALAALO ah.

— *Martin Luther King, Jr.*

19
NACASNIMO

Midabka maqaarku sinnaba xidhiidh ulama laha inta caqligaagu le'eg yahay ama inta tabartaadu tahay.

— Benjamin Banneker

Waxaa jira laba nooc oo nacasyo ah: kuwa aan beddeli karin fekradahooda iyo kuwa aan rabin in ay beddelaan.

— Josh Billings

Kibirka iyo dammacu ragga masiibo ayuu ku keenaa.

— Xun zi

Hadal macno leh ku dheh nacaska, waxa uu kuugu yeedhi doonaa nacas.

— Euripides

Astaamaha nacasku waa saddex: degdeg u jawaabid, baala-daymood badan iyo ku-kalsoonaanta qof kasta!

AbuHatim bin Xayyan AlHafid

Nacasku ma cafiyo mana hilmaamo; kas-gaabku wuu cafiya oo hilmaamaa; ninka caqliga leh wuu cafiyaa laakiin ma hilmaamo.

— Thomas Szasz

Haddii aanad marka hore ku guulaysan, isku day, mar kale isku day. Kadibna faraha ka qaad. Wax fa'iido ah kuma jirto in aad ku nacasowdo. *— W.C. Fields*

Waa ay adag tahay in laga xoreeyo nacasyada silsilado ay qaddarin u hayaan.

— Voltaire

Ragga caqliga badani sababta ay u hadlaan waa in ay hayaan wax ay yidhaahdaan; Kuwa nacasyada ahina sababta ay u hadlaan waa in ay wax uun yidhaahdaan.

— Plato

Nacasku uma arko geed sida ninka caqliga leh u arko.

— William Blake

Mararka qaar aqlabiyaddu waxa ay la macno tahay in dhammaan nacasyadu hal dhinac yihiin.

— Claude McDonald

Qof kasta wuu sameyn karaa qalad. Nacasku wuxuu ku adkaystaa ku celcelinta qaladkaa.

— Robertine Maynard

Dhammaanteen waa aynu garannaa marka aynu aragno mid nacas ah – laakiin ma garanno marka aynu innagu nahay ka nacaska ah.

— Arnold H. Glasow

Ninka caqliga badani wuxuu awoodaa in uu wax ka barto su'aalaha nacaska in ka badan inta uu nacasku ka baran karo jawaabaha ninka caqliga badan.

— Bruce Lee

Hala doodin doqon. Wuxuu hoos kugu dhigi doona heerkiisa kadibna kugu garaaci doona waayo-aragnimadiisa e.

— Greg King

Sida caadiga ahayd, waxaa jira dumar sare oo ka danbeeya doqon kasta.

— John Lennon

Buuggaagtu waa sida muraayadaha: haddii uu nacas eego, kama filaneysid in hanad uu kasoo baxo.

— J.K. Rowling

Waxa ninka caqliga badani sameeyo bilawga, nacasku wuxuu sameeya ugu danbeysta.

— Warren Edward Buffet

20
NAXARIIS

Falka wanaagsan, si kasta ha u yaraadee, qasaare ma aha.

— *Aesop*

Ta mucjisada ahi waxa ay tahay: marka aad wax bixiso ayaa ay wax ku soo galaan.

— *Leonard Nimoy*

Bakhaylnimadu ma aha arrin ka dhalata dhaqaale yari. Waa arrin qalbi.

— *Andy Stanley*

Waa waajib macnawi ah in kuwa wax haystaa ay wax siiyaan kuwa aan waxba haysan.

— *Audrey Hepburn*

Haddii qof kastaa uu waxooga wanaaga sameeyo, ka feker intee in le'eg ayuu adduunku wanaagsanaan lahaa!

— *Jackie Chan*

Sadaqadu waxa ay ka billaabanta guriga, laakiin ma ah in ay guriga ku eekaato.

— Thomas Fuller

Ujeeddada uu aadanuhu u nool yahay waa in uu adeego, iyo in uu naxariis iyo doonis u muujiyo dadka kale ee uu rabo in uu caawiyo. *— Albert Schweitzer*

Qaladaadka mar walba waa la cafin karaa, haddii uu qofku leeyahay dhiirranaan uu ku qirto.

— Bruce Lee

Weligaa kama qoomameyn doontid naxariis aad qof kale u muujisay.

— Nicole Shepherd

Ha u eegina denbiyada dadka kale sidii oo aad tihiin Rabbiyaal; balse u eega danbiyadiina idinkoo ah addoomo. U naxariista dadka dhibtu haysato. Eebbana ugu mahad celiya bedqabkiina. Iska jira in aad dhahdaan 'Kaasi waa ehli naar… kaas kalena waa ehli janno'. Ha iska kibrinina dadka denbiyada galay balse Eebbe uga barya hanuun!

— Imam Malik

Hoggaamiyaha dhabta ahi wuxuu haystaa kalsoonida loogu istaago gaar, geesinimada lagu sameeyo go'aan adag, iyo naxariista lagu dhageysto baahida dadka kale.

— Douglas MacArthur

Dadka cidlada u badan dareemaa waa dadka u naxariista badan. Dadka u murugada badani waa dadka u firfircoon. Dadka dhaawaca u badani soo gaadhaana waa dadka u murtida badan. Sababta u weynina waa iyaga oo dhibta ay isla jecelyihiin aan dadka kale la jeclayn! — *Qoraha lama yaqaan*

Naxariistu way fiddaa (waana la is qaadsiiyaa)!

— *Qoraha lama yaqaan*

Ma jiro fal naxariis ah oo beeldaroobaa!

— *Aesop*

Qalbi deeqsi ah, hadal wanaagsan iyo nolol u-adeegid iyo u-naxariisasho ahi waa waxyaabaha dib u cusboonaysiiya bini-aadantinnimada.

— *Buddha*

Laf aad ey u tuurtay sadaqo ma aha. Sadaqadu waa lafta marka aad la wadaagto eyga, adiguna aad sida eygu ugu baahan yahay aad ugu baahan tahay.

— *Jack London*

21
NOLOL

U riyood sida qof weligii noolaanaya, una noolow sida qof maanta dhimanaya.

— *James Dean*

Iimaanka iyo ducadu waa nafaqada nafta; ninna si caafimaad leh uma noolaan karo la'aantood.

— *Mahalia Jackson*

Inta aad nooshahay waa in aad adduunka saameyn ku yeelataa, ma aha inaad ka fekerto uun sidii aad dhaqaale ku sameyn lahayd.

— *Kevin Kruse*

Kufiddu waa qayb ka mida nolosha. Kicidduna waa nolosha.

— *Qoraha lama yaqaan*

Waaya-aragnimadu waa waxa aad heshid marka aad raadinaysid wax kale!

— *Federico Fellini*

Qulub kasta waa in dhoola-caddayn lagu qaabbilaa. Haddii aad sidaa samaysid, qulubku in aad waalan tahay ayuu kuu malaynayaa, waanu kaa carari doonaa! — *Robert De Niro*

Marba haddii aanan ka sii werwerin in aan dhalan doono, kama sii werwerayo in aan dhiman doono!

— *Federico Galcia Lorca*

Waxa aynu daba orodnaa wax dhib inoo ah, inta badan!

— *Federico Garcia Lorca*

In rabitaan ku gubo, ka dibna aad degenaan ku haysid, waa ciqaabta u weyn ee aynu nafaheenna kula kici karno.

— *Federico Garcia Lorca*

Marka aad u samayso waxyaabo nolosha caadi ka ah hab aan caadi ahayn, waxa aad amri doontaa dareenka dunida.

— *George Washington Carver*

Ha ku ducaysan nolol fudud, ku ducayso in aad qof adag noqotid!

— *John F. Kennedy*

Noloshu waa ay yar tahay ee dhammayso!

— *Nikita Khrushchev*

Marka aad nolosha heer ka gaadho, waa in aad wax ku celisaa dadkii heerkaas ku gaadhsiiyay.

— *Aliko Dangote*

Muddadan ku farax. Muddadani waa noloshaadii!

— *Omar Khayyam*

Wa ay adag tahay laakiin waa ay u qalantaa– sidaas ayay Hooyaday mar nolosha ugu sifaysay **Omi**.

— *Kamila Shamsie*

Sida ay doonto ha ahaatee, waxa aan rabaa in aan sii noolaado aniga oo ku baraarugsan in aan maalin uun dhiman doono. Taas la'aanteed, anigu ma nooli.

— *Banana Yoshimoto*

[Dhimashadu waa] meesha ugu fiican ee lagaga magangalo xanuunada, murugooyinka, dhibaatooyinka iyo caddaaladdarrada nolosha.

— *Sadegh Hedayat*

Nolosha iyo waqtigu waa labada bare ee dunida ugu wanaagsan: Noloshu waxa ay ina bartaa adeegga wanaagsan ee waqtiga, waqtiguna waxa uu ina baraa qiimaha ay noloshu leedahay!

— *A.P.J. Abdul Kalam*

Noloshu waxa ay tahay, ahaan doontaana, isle'eg aan xal lahayn, balse ay weli ku jiraan midhadh tibxo ah oo qeexani!

— *Nikola Tesla*

Dadku waxa ay ka cawdaan oo sheegaan in noloshu gaaban tahay, aniga in ay dheer tahay ayay iila muuqataa!

— *Alija Izetbegovic*

Noloshu waa safar dheer, mana qaadan kartid wax walba. Keliya wixii lagama-maarmaan ah qaado.

— *Ha Jin*

Adduunyada waxa ugu weyn ee ku dhaqani waa aadamaha; aadamaha waxa ugu weyn ee ku jiraana waa caqliga!

— *Sir William Hamilton*

Qof kastaa wuxuu rabaa in uu jannada galo, laakiin ma jiro qof raba in uu dhinto.

— *Joe Louis*

Marka aynu wax walba wayno, oo ay ku jirto rejo, noloshu waxa ay noqotaa mid dullinimo ah, dhimashaduna waajib.

— *W. C. Fields*

Haddii aynaan isbeddelin, ma koreyno. Haddii aynaan korinna, si dhab ah uma noolin.

— *Gail Sheehy*

Qaacidada noloshaydu waa mid fudud. Waxa aan kacaa subixii goor hore habeenkiina goor hore ayaan seexdaa. Inta u

dhexeysana, waxa aan naftayda ku mashquuliyaa sida ugu fiican ee aan awoodo.

— Cary Grant

Si joogto ah, haddii aad si dhow ugu fiirsato, noloshu aad uma xuma.

— Joss Whedon

Ninna si dhab ah uma oggaado sababta uu u nool yahay ilaa uu ka ogaado sababta uu u dhimanayo darteed.

— Martin Luther King, Jr.

Ninku wuxuu dhintaa marka uu diido inuu u istaago waxa xaqa ah.

— Martin Luther King, Jr.

Ma jirto nolosha wax la hubo oo aan geerida ahayni.

— Kanye West

Qof kasta waa in uu noloshiisa ugu noolaadaa sidii uu tusaale ugu noqon lahaa dadka kale.

— Rosa parks

Tax dhawr qalad oo aad samaysay intii aad noolayd. Waa maxay casharrada aad ka baran kartay qaladaadkaas?

— Danny Pettry

Waa maxay waxa aad isleedahay ama dareemeysid waa in aad dhammaystirtaa inta aadan dhiman ka hor? *— Danny Pettry*

Haddii aad nolosha ka rabto abaalmarin badan, waa in aad beddeshaa sida aad u fekeraysid.

— Oprah Winfrey

Nolosha waxaad ka helaysaa wixii aad si dhiirrani leh u weyddiisato.

— Oprah Winfrey

Dhimashadu waxa ay soo afjartaa nolosha, ma soo af jarto xidhiidhka.

— Mitch Albom

Marka aan is-idhaahdo hadda ayaad sida loo noolaado baratay, noloshaa isbeddesha.

— Hugh Prather

Jeclow nolosha aad ku nooshahay. Ku noolow nolosha aad jeceshahay. *— Bob Marley*

Saaxiibkayoow, yeynaan ka fekerin berri, laakiin aynu ku raaxaysanno waqtigan yar ee ordaya ee nolosha.

— Omar Khayyam

Dhammaadka nolosheennu wuxuu billaabmayaa maalinta aynu ka aamusno waxyaabaha mudan in laga hadlo.

— *Martin Luther King, Jr.*

Khayraadka dabiiciga ah ee ugu weyn ee waddan haysan karaa waa ubadkiisa.

— *Danny Kaye*

Ha isku murjin dhacdooyinkii tagtada … ma jirto hal dhacdo oo dunidan loogu talogalay in ay sii waarto e!

— *Imam Shafici*

Waa in aad wadnahaaga gashataa in wax kasta oo Eebbe inoo gartay uu yahay kan u habboon una waxtarka badan.

— *Imam Ghazali*

Sunnada nebi Maxamed waxa ay la mid tahay doonnidii nebi Nuux. Qof kasta oo raacaa wuu badbaadi, kii kasta ee ka degaana wuu qarqoomi.

— *Imam Malik*

Hortaada u fiirso labada manhaj ka aad raacaysid. Laba waddo oo kala geddisan weeye; mid toosan mid qalqalooca.

— *Ibn Rumi*

Noloshu waxa ay leedahay siyaabo badan oo qofka doonistiisa lagu tijaabiyo; ama mar aanay waxba ku dhicin ama mar ay wax kastaa ku dhaceen!

— Paulo Coelho

Maxaynnu ka noolnahay haddii aynaan ka shaqaynayn fududaynta nolosha ee innaga dhexdeena?

— George Eliot

Marka aan waxba la hubin wax kastaa waa suuragal!

— Qoraha lama yaqaan

Naf kastaa geerida way dhadhaminaysaa… naf walibase nolosha ma dhadhaminayso!

— Jalaala'ddin Al-Rumi

Waddan… waa halka wadnahaagu la jiro!

— Pliny the Elder

Marba haddii diyaargarawgu adag yahay, caqabadaha la wajahaana way adag yihiin!

— Niccolò Machiavelli

Berrito waxay doonto oo xumaan ah ha samayso, anigu waxa aan noolahay maanta!

— John Dryden

Rejadu waa beenawaaska keliya ee aan waayin sumcaddiisa iyo dhega nuglaantiisa!

— Robert Angerson

In aad indhool noqoto waxa ka xun in aad araggiina qabtid aragtina la'dahay!

— Helen Keller

Ka adkoow wixii dheeraad ah, wixii aas-aasi ahi iyagaa iska adkaan e.

— Dorothy Parker

Waxaa mudnaan gaar ah leh inta aad nooshahay in aad ahaato qofka aad tahay [oo aanad qof kale iska dhigin.]

— Joseph Campbell

Noloshu waa mid aad u fudud, laakiin innaga ayaa ku adkeysannay in aan ka dhigno mid dhib badan.

— Confucius

Noloshu ma aha dhibaato u baahan in la xalliyo, laakiin waa xaqiiqo u baahan in waayo-aragnimo laga qaato.

— Soren Kierkegaard

Sheyga ugu muhiimsan ee noloshu waa in aad haysato ujeeddo weyn iyo go'aan sidii aad u gaadhi lahayd iyada.

— *Johann Wolfgang von Goethe*

Mid ka mid ah sirta noloshu waa in laga dhigo dhagax-lagu-tallaabsado dhagaxii ku xannibayay. — *Jack Penn*

Labada maalmood ee noloshaada ugu muhiimsani waa maalinta aad dhalatay iyo maalinta aad ogaatid sababta [aad u dhalatay].

— *Mark Twain*

Noolaanshaha ujeeddo la'aani waa sida doon jiheeye la'aan ah.

— *Alexander Dumas*

Noloshu ma aha helis iyo haysasho, noloshu waa siin iyo jiritaan.

— *Kevin Kruse*

Noloshu 10% waa waxa igu dhaca aniga, inta soo hadhay oo ah 90% waa sida aan uga falceliyo iyaga.

— *Charles Swindoll*

U tag si kalsooni leh dhanka ay riyadaadu jirto. Ku noolow nolosha aad sawiran jirtay.

— *Henry David Thoreau*

Waxaa ka fiican in aad u noolatid sida shabeelka hal maalin intii aad kumannaan sanno u noolan lahayd sida laxda.

— *Tibetan saying*

Ku mashquulsanow sidii aad u noolan lahayd, ama sidii aad u dhiman lahayd.

— *Tim Robbins*

Noloshu waa muraayad; waxa ay hummaag ahaan ugu soo celisaa fekeraha wuxuu isagu ka fekerayay.

— *Ernest Holmes*

U noolow sida qof berri dhimanaya. Wax u baro sida in aad weligaa noolaanneysid.

— *Mahatma Gandhi*

Maalinta u wanaagsan ee noloshaadu waa maalinta aad go'aansatid in aad noolaatid noloshaada. Wax cudurdaarro ahi ma jiri doonaan. Ma jiri doono cid lagu tiirsanaado, lagu kalsoonaado, ama la canaantaa. Maquunooyinku waa kuwaagii – waa socdaal xallad leh – adiga oo keliya ayuuna xil ka saaran yahay tayadiisu. Waa taa maalinta ay dhab ahaan noloshaadu bilaabmaysaa.

— *Bob Moawad*

Casharrada noloshu way soo noqnoqdaan jeeroo la barto!

— Frank Sonnenberg

Waayo-aragnnimadu ma aha waxa kugu dhaca; waa se waxa aad ku samaysid waxa kugu dhaca!

— Aldous Huxley

Dunidu ma aha meesha ugu wanaagsan. Ugu danbaynta waalidkaagu waa ay kaa tegi doonaan (dhiman doonaan), cidna diyaar uma noqon doonto in ay isla marrinkaa maraan si ay kuu ilaaliyaan shuruud la'aan. Waxa aad u baahan tahay in aad baratid sidii aad u istaagti lahayd si aad u ilaashatid naftaada iyo waxa aad aaminsan tahay, mararka qaarna waxad u baahan tahay – kana raalli ahoow luuqaddaydoo – in aad wax harraatidid!

— Queen Elizabeth II

Nabar kasta waxa ka danbeeya qolof. Qolof kastana waxa ka danbaysa sheeko. Sheeko odhanaysa, '**Waa aan badbaaday'**.

— Craig Scott

Waxa isku kiin haya adiga iyo qoyskaaga ma aha dhiig, laakiin waa ixtiraam iyo farxadda qofba kan kale noloshiisa u hayo.

— Richard Bach

Noloshu waa sida taayarka. Ha fogaato ama ha dheeraato, waxa ay had iyo jeer ku soo noqotaa meeshii ay ka bilaabantay.

— *Stephen King*

Jidhkaaga daryeel. Waa meesha keliya ee ay tahay in aad ku noolaatid.

— *Jim Rohn*

Maxaa aynu u nool nahay, haddii aanu nolosha adaygeeda ka khafiifineyn midkeenba kan kale?

— *George Eliot*

Si kasta oo ay u muuqato in ay adag tahay noloshu, mar walba waxaa jira wax aad sameyn kartid kadibna aad ku guuleysan kartid.

— *Stephen Hawking*

In aad jidhkaaga caafimaadkiisa ilaaliso waa waajib ku saaran… haddii kale waxa aan awoodi kari waayeynaa in maskaxdeennu adkaato oo waaddix ahaato.

— *Buddha*

Noloshu waxa ay ku baraysaa in aad u baahan tahay in aad go'aan qaadato waqtiga ku habboon – ma ahan goor hore, mana ahan goor danbe.

— *Jeb Bush*

Mararka qaar dhibaatadu uma baahna xal lagu xallilo, waxa ay u baahataa korriin laga koro!

— Dr. Steve Maraboli

Nafteennu had iyo jeer waxa ay muujineysaa natiijada fekerrada inagu xooggan.

— Soren Kierkegaard

Niyadda gasho maalin walba in ay tahay maalintii adduunka kuugu dambeysay laga yaabaa in ay maalin uun run kugu noqoto.

Muhammad Ali

Ha guursan qofka aad isleedahay waad la noolaan kartaa; guurso qofka aad isleedahay la'aantiis ma noolaan kartid.

— James Dobson

Wax walba qurux ayay leeyihiin, laakiin ma arki karo qof waliba.

— Confucius

Waxa aan u malayn jiray waxa ugu xun nolosha in ay tahay kelinnimada. Ma ahan. Waxa ugu xun nolosha waa la-joogista dad aad agtooda ku dareemeysid kelinnimo.

— *Robin Williams*

Haddii aad u hoggaansantid dhammaan sharciyada, waxaad seegi doonta wixii xiiso leh oo dhan.

— Katharine Hepburn

Haddii aan il u ridno il, adduunka oo dhan wuxuu noqonayaa indho la'aan. *— Mahatma Gandhi*

Sadaqada dhab ta ahi waa rabitaan uu qof rabo in uu waxtaro dadka kale isaga oo aan ka fekerin abaal marin.

— Emanuel Swedenborg

Lacag la'aantu waa xididka xumaatooyinka oo dhan.

— Mark Twain

Qofku waa in aanu aad daacad u noqon. Dhirta toosan waa kuwa loogu hor jaro, dadka daacadda ahina waa kuwa loogu hor qiyaameeyo.

— Chanakya

Maanta waxa aan samayn doonaa waxa ay dadka kale rabaan in aan sameeyo, si aan berri u dhammaystiro waxa aan dadka kale awoodin.

— Jerry Rice

Waxaa nolosha jira labo doorasho oo aasaasi ah: in aad aqbasho xaaladahu sida ay yihiin, ama in aad aqbasho masuuliyadda kaa saaran in aad beddesho iyaga.

— Denis Waitley

Mararka qaarkood waa go'aanka ugu yar ka noloshaada oo dhan beddelaya.

— Keri Russell

Noloshu waa u riyo kuwa caqliga leh, waa u ciyaar kuwa doqommada ah, waa u qosol kuwa hodanka ah, waana u musiibo kuwa masaakiintaa.

— Sholom Aleichem

Xusuuso, faraxaddu kuma xirna qofka aad tahay ama waxa aad heysato, waxayse ku xirantahay waxa aad ku fekereyso.

— Dale Carnegie

Waajibka ugu horreeya ninka wuxuu ka saaran yahay inuu naftiisa ka fekero.

— José Martí

Mid ka mid ah furayaasha farxaddu waa xusuus xun.

— Rita Mae Brown

Waxaan helay in haddii aad jeclaato nolosha, noloshuna ay jacayl kugu soo celin doonto.

— Arthur Rubinstein

Si walba oo aay ahaato, guurso. Haddii aad hesho xaas wanaagsan, waad faraxsanaan doontaa; haddii aad hesho mid xunna, waxaad noqon doontaa faylasuuf. — *Socrates*

Nolol bilaa waaya-aragnimo ah oo bilaa silic ahi nolol ma aha!

— *Socrates*

Aad bay muhiim u tahay in aad ogaatid qofka aad tahay. Si aad go'aan u qaadato. Si aad u muujisid qofka aad tahay.

— *Malala Yousafzai*

U dhoola-caddee sidii oo aanad weligaa ooyin. U dagaalan sidii oo aan weligaa lagaa badin. Wax u jecloow sidii oo aan weligaa lagu dhaawicin, una nooloow sidii oo aad berri dhimanaysid!

— *Drake*

Noloshu waa ay gaaban tahay, adiga ayay kugu xidhantahay in aad macaaneyso.

— *Sadie Delany*

Buugga nolosha, jawaabuhu kagama yaalaan xagga u danbaysa!

— *Charlie Brown*

Haddii aanad naftaada runta u sheegin, run uma sheegi kartid dadka kale.

— *Virginia Woolf*

Ka dhimanaya marka uu waqtigiisu dhammaado waa aniga, sidaa darteed ii oggoloow in aan u noolaado sida aan rabo.

— *Jimi Hendrix*

Noloshu waa sida wadidda baaskeelka. Si aad dheellitirkaaga u ilaalisid, waa in aanad socodka joojin. — *Albert Einstein*

Dhibaatooyinku ma joojinayaan in ay kuu muuqmuuqdaan, maxaa yeelay xeerarka nolosha ayay ka mid yihiin.

— *Robert H. Schuller*

Waa in aynu bilawnaa noolaanshiyo inta aynaan gaboobin. Cabsidu waa doqon, sidoo kalana labalabayntu waa doqon.

—*Marilyn Monroe*

In la i sharfo waxaan waligay ka doorbidi jiray in aan faraxsanaado.

— *Charlotte Brontë*

Waxa keliya oo aad noolaaneysaa halmar, lakiin haddii aad si sax ah uga fa'iideysato, mar waa kugu filantahay. — *Mae West*

Ujeedka noolaanshiyuhu waa korritaan. Maskaxdeennuna, si ka duwan jidhkeenna kale, waxay wadataa korritaanka ilaa inta aynu noolnahay oo dhan. — *Mortimer Adler*

Beddel wixii beddelmi kara, aqbal wixii aan beddelmi karin, naftaadana ka saar wixii aan aqbalmi karin. — *Denis Waitley*

Noloshu ama way soo ururtaa ama way fiddaa; waxa ay ku xidhan tahayna waa hadba dhiirranaanta ruuxa. — *Anais Nin*

Dadka badidoodu may baran in mid ka mid ah ujeeddooyinka u waaweyn ee loo nool yahay ay tahay in nolosha lagu raaxaysto.

— *Samuel Butler*

Ku raaxayso walxaha yaryar ee aad maalin uun inta oo aad dib u soo jalleecdid garwaaqsan doontid in ay ahaayeen walxo waawayn! — *Robert Brault*

22
SAAXIIBTINNIMO

Qof kastaa wuu hayaa hadyad uu qof siiyo, xitaa hadday doonto ha ahato noqoshada saaxiib wanaagsan.

— Marian Anderson

Hal buug oo aad u fiicani waxa uu u dhigmaa boqol saaxiib oo wanaagsan, balse hal saaxiib oo wanaagsani waxa uu u dhigmaa maktabad iska dhan!

— A.P.J. Abdul Kalam

Kula-socodka saaxiib meel mugdi ah ayaa ka wanaagsan in aad keligaa meel iftiin ah socoto.

— Helen Keller

Ma joogaan halkan dad shisheeye ahi; keliya waxaa jooga asxaab aanad weli la kulmin.

— William Butler Yeats

Haddii saaxiibkaa aamuso oo aanu hadlin, qalbigaagu yaanu ka go'in in qalbigiisa uu sii dhegaysto; sababta oo ah saaxiibtinnimadu uma baahna erayo iyo weedho.

— Jiran Khalil Jiran

Marka aad kor martid ee aad heer gaadhid, saaxibbadaa ayaa garta cidda aad tahay, balse marka aad dhacdid adiga, ayaa garta cidda ay saaxibbadaa yihiin.

— Ibrahim Al-Fiqi

Ma jiro wax adduunka guudkiisa saaran oo ka qiimo badan saaxiibtinnimo dhab ah.

— Thomas Aquinas

Saaxiibku waa kii aad leedihiin cadow isku mid ah.

— Abraham Lincoln

Ugu danbeynta, ma xusuusan doonno ereyada cadowgeenna, balse waxa aynu xusuusan doonnaa aamusnaanta saaxiibbadeen.

— Martin Luther King, Jr.

Haddii aad rabto inaad xisaabiso qiimahaaga, xisaabi asxaabtaada.

— Merry Browne

Qofku ma sameysto saaxiib, qofku wuu aqoonsadaa iyaga.

— Garth Henrichs

Badanaa waxa aynu beddelnaa shaqada, asxaabta iyo lammaanaha halkii aynu ka beddeli lahayn nafteenna.

— Akbarali H. Jetha

Lacagta waa aad ku iibsan kartaa sariir, laakiin kuma iibsan kartid hurdo fiican, qof la joogistiisa waa aad ku iibsan kartaa laakiin saaxiib kuma iibsan kartid. *— Zig Ziglar*

Asxaabta beenta ahi waa sida hadhkeena oo kale, waa ay inoo dhaw yihiin marka aynu ku soconno ilayska cadceedda, laakiin waa uu innaga tagaa isla marka aynu u gudubno dhinaca hooska.

— Christian Nestell Bovee

Haddii aad saaxiib ka dhigato naftaada weligaa ma cidloon doontid.

— Maxwell Maltz

Ninka faraxsani waa ninka hela saaxiib dhab ah, kaas midka kasii faraxsanina waa ka hela saaxiibtinnimada dhabta ah ee xaaskiisa.

— Franz Schubert

Saaxiibtinnimadu waa waxa ugu adag in la sharxo ee dunidan yaalla. Ma aha wax lagu barto dugsiyada. Balse haddii aanad baran micnaha saaxiibtinnimada, runtii waxba ma aad baran!

— Muhammad Ali

Naftaada ku xeer dad tayo fiican leh adiga oo maanka ku haya in kelinnimadu ka roon tahay la-rafiiqidda dad xun!

— Booker T. Washington

Meel kasta oo aynu joogno cidda adduunkeenna samaysaa waa saaxiibbadeen.

— Henry Drummond

Mararka qaar ayaad dhistaa gidaarro dhaadheer, iyadoo sababtuna aanay ahayn in aad dadka iska faquuqdid balse ay tahay in aad tijaabisid bal in ay jirto cid danaynta ay kuu hayaan gaadhay heer ay gidaarka ku soo jebiyaan!

—Socrates

Ma haysatid wax aad waydo. Ma aad qasaarin marka aad weydo saaxiib beenbeen ah.

— Joan Jett

Saaxiibka runta ahi waa ka marka uu khalad kugu arko talo ku siiya, marka aad maqan tahayna ku difaaca!

— Ali Bin Abi-daalib

Ka fogoow dadka waxa taban fisha, iyo kuwa sida khaldan u fekera yaanay ku qaadsiin fayraskooda e.

— Faiez H. Seyal

Saaxiibbada wanaagsani waxa ay kaa caawiyaan in aad dib u heshid waxyaabo muhiim ahaa oo aad waydey; rejo, dhoola-caddayn iyo dhiirranaan.

— Doe Zantamata

Muhiim ma aha in aad heshid milyan asxaab ah – waxa muhiimka ahi waa in aad heshid hal saaxiib oo kula jira marka ay milyan kaa soo horjeedaan! — *Ali B. Moe*

Saaxiibbadu waa qaraabo aad adigu sameysatay.

— *Eustache Deschamps*

Saaxiibka fiican wuxuu sii wanaajiyaa waqtiyada wanaagsan, waqtiyada adagna wuu fududeeyaa.

— *Qoraha Lamayaqaan*

Ha socon gadaasheyda; laga yaabaa in aanan ku hoggaamin. Ha socon horteydana; laga yaabaa in aanan ku daba kicin. Keliya i garabsoco oo noqo saaxiibkay.

— *Albert Camus*

Plato waa saaxibkay. **Aristotle** waa saaxiibkay. Balse saaxiibkayga ugu weyni waa runta.

— *Isaac Newton*

Saaxiibtinnimadu waa hal naf oo laba jidh ku wada jirta!

— *Aristotle*

Ma jiro dunidan wax u qalma in la weyneeyo oo ka weyn saaxiibtinnimada dhabta ah.

— *Thomas Aquinas*

Saaxiibka wanaagsan had iyo jeer wuxuu kaa wareemaa xagga hore. — *Oscar Wilde*

23
SHAQO

Ma aha in aynu is-mashquulinno oo keliya; qudhaanjaduba waa ay mashquulsan tahay. Su'aashu waxa ay tahay: Waa maxay waxa aynu ku mashquulsannahay?

— Henry David Thoreau

Dadku waa ay sameyn karaan wax walba oo ay rabaan haddii qalbigooda ay geliyaan, oo aanay weligood is-dhiibin, oo ay wixii ay rabeen qabtaan uun.

— Bethany Hamilton

Waajib bay ku tahay nafta in ay daacad u noqoto rabitaankeeda. Waa in ay nafta u hurtaa donisteeda.

— Dame Rebecca West

Hantidu ma aha midhaha ka soo go'a shaqada, laakiin waa natiijada dhac abaabulan.

— Frantz Fanon

Dhallinyaradu ma garanayaan wax ay rabaan, balse waa ay jeclaysanayaan in ay sameeyaan!

—Federico Fellini

Haddii aanad waxba samayn, wax aad helaysaa ma jiro.

— *Aung San Suu Kyi*

Aynu yoolalkeenna ku laalno meel sare; nafaheenna aynu ka dalabno inta aynu qaban karno in ka badan.

— *Haile Selassie*

Shaqada aad qabato jeclow, balse shirkadda aad u shaqayso ha jeclaan. Sababta oo ah war uma haysid xilliga ay ku necbaan doonto shirkadda aad u shaqaysaa!

— *A.P.J. Abdul kalam*

Waxa keliya ee ninka isagoo hurda u yimmaaddaa waa riyooyin qudha.

— *Tupac Shakur*

Marka aad dhaqaaqa badiso ayaad ka sii xoog badnaanaysa sidii hore, ma tihid sida geedka oo kale oo haddii xididdadiisa la rujiyo dhiman kara.

— *Ha Jin*

Inta badan Hooyaday waxa ay dhihi jirtay, haddii qofku uu shaqadiisa ku faraxsan yahay, markaas saboolnimadu ma aha wax laga xishoodo.

— *Yu Hua*

Ku billow qabashada waxyaabaha lagama-maarmaanka ah; markaas ku xeji waxa suuragalka ah; kadibna si lama filaan ah waxaad u samayn wax aan macquul ahayn. — *Francis of Assisi*

Ha joojin marka aad daasho, jooji marka aad samayso.

— *Dr Phil*

Habka ugu gaaban ee wax badan loo qabtaa waa keliya in la qabto hal wax halkii marba.

— *Richard Cech*

Haddii aanad qofna wax ka rejeyn, weligaa ma niyadjabi doontid.

— *Sylvia Plath*

Marka aad billowdo ka shaqaynta wax, ha ka cabsan guuldarada hana ka tanaasulin. Dadka sida daacadda ah u shaqeeyaa waa kuwa ugu faraxda badan.

— *Chanakya*

Waa in aad u dagaalantaa sidii aad ku gaadhi lahayd riyadaada. Waa in aad nafta u hurtaa oo aad si adag u shaqaysaa si aad u gaadho iyada.

— *Lionel Messi*

U-dhaqanka sida amiiradi waa shaqo. Keliya ma aha in aad qurux badato ama xidhato taaj. Inta badan waa sida aad gudaha ka tahay.

— Julie Andrews

Hammigaagu ha ku hoggaamiyo, u diyaargarow shaqo adag iyo naf-hur, iyo, waxa ugu muhiimsan, ha ka oggolaan qofna in uu xaddido riyooyinkaaga.

— Donovan Bailey

Billowgu waa qaybta ugu muhiimsan ee shaqada.

— Plato

Ragga guuleystay waa ragga doortay hal shaqo kadibna ku taagnaaday.

— Andrew Carnegie

Waxa ay ku suntan tahay tallaabo weyn oo aad u qaadday horumarinta noloshaada marka aad garato in dadka kale kaa caawin karaan in aad shaqo ka wanaagsan qabato shaqadii aad keligaa sameyn jirtay.

— Andrew Carnegie

Waxa aan ogahay waa, haddii aad hayso shaqo aad jeceshahay, shaqaduna ay ku qanciso, waxa hadhay waa ay iska immaanayaan.

— Oprah Winfrey

Wuxuu doono ha ahaado yoolkaagu; waa aad gaadhi kartaa haddii aad diyaar u tahay in aad u shaqaysato.

— Oprah Winfrey

Nolosha wax badan kama qabsan doontid haddii aad keliya shaqayso maalmaha aad wanaag dareemeysid.

— Danny Pettry

Haddii aad wada qosli kartaan, waa aad wada shaqayn kartaan.

— Robert Orben

Ha ku dagmin jilaad-tuska. Sannadka waxa ku jira uun inta bilood ee aad ka shaqaysiisid. Nin baa sannadka dhan qabanaya shaqo leh dhumucda hal toddobaad, ninna toddobaadkii ayuu kaga soo dhalaalayaa hawl leh dhumucda hal sanno!

— Charles Richards

Ha ii sheegin aniga sida adag ee aad u shaqaysay; ii sheeg waxa badan ee aad qabatay.

— James Ling

Isudiyaarinta ugu wanaagsan ee berri in shaqo wanaagsan la qabtaa, waa in maanta shaqo wanaagsan la qabtaa.

— Elbert Hubbard

Fekerku waa shaqada ugu adag, waxa ay u badan tahay taasi in ay tahay sababta dad aad u yari ay ugu hawlan yihiin.

— Henry Ford

Wuxuu ahaa Aabbahay qofkii ii sheegay in ay waajib ku tahay soogelootiga in ay u shaqeeyaan si ka adag dadka kale oo dhan.

— Zinedine Zidane

Qofna ma helo, wax u qalma in la haysto, marka laga reebo qof ku helay shaqo adag.

— Booker T. Washington

Kacaanku maaha tufaax kaas oo soodhacaya marka uu bislaado. Waa in aad adigu soo riddaa.

— Ernesto Che Guevara

24
SIYAASAD

Dhaladku waa in ay ogaadaan gumeystuhu in aanu weligii bilaa sabab wax bixin.

— *Frantz Fanon*

Khatarta ugu weyn ee xorriyaddu waxa ay tahay maqnaashaha cambaaraynta.

— *Wole Soyinka*

Waxa aan qabaa in dadku aanay ku kalsoonayn siyaasiyiinta oo ay raadinayan cid runta u sheegta oo aan wadanin ajande qarsoon.

— *Mohamed ElBaradei*

Waxaa jira feker ah in saboolnimadu tahay guuldarrada siyaasad guud; saboolnimadu waa wax uu ninku iska dhigay taas oo ka dhalatay ficil uu sameeyay ama ficil aanu samayn: waa la suulin karaa saboolnimada.

— *Benjamin Mkapa*

Ma jiro dal xaq u leh in uu dal kale go'aan u gaadho; ma jiraan dad xaq u leh in ay dad kale go'aan u gaadhaan.

— *Julius Nyerere*

Qofku waa uu dhiman karaa, waddamadu waa ay kobci karaan, ama kufi karaan, balse aragtidu weligeed waa ay noolaataa!

— *John F. Kennedy*

Marka laba wakiil oo laba aragtiyood oo aad u kala duwan haystaa isgacan qaadaan, ma waxa aad u malaynaysaa in iska-hor-imaadyada nidaamkeennu idlaanayo? Waa riyo maalineed caddaan ah!

— Nikita Khrushchev

Wax kasta oo la wajaho lama beddeli karo, laakiin wax la beddeli karaa ma jiro ilaa la wajaho.

— *James Baldwin*

Dimuqraadiyaddu ma aha wax habeen keliya hirgala, mana aha hadyad Maraykanku adduunka siin karo. Waa dhaqan u baahan nabad uu ku koro.

— *Shirin Ebadi*

La-taliyayaashaydu waxa ay gidaar naga dhex dhiseen aniga iyo dadkeyga. Ma aan garan waxa socda. Markii aan toosay, waxa aan qarka u saarnaa in aad dadkeyga waayo.

— *Mohammed Reza Pahlavi*

Dowladi waa midda ka fekerta oo dhegaysata codka dadka saboolka ah. Dowladdu waa in ay u noolaata dadka saboolka ah

— *Narendra Modi*

Mas'uuliyiintu waa in ay dib u eegaan toddobadii sanno ee la soo dhaafay kadibna ay soo helaan wixii qaldamay. — *Hu Jintao*

Badanaa inta madaxtinnimada ka agdhawi, yaraana inta qarannimada ka agdhawi!

— *Mahatma Gandhi*

Siyaasaddu waa dagaal aan dhiig ku daadan, halka dagaalku yahay siyaasad dhiig ku daato.

— *Mao Zedong*

Doorashooyinkeenna ayaa u muujiya cidda aynu dhab ahaan nahay in ka badan inta itaalladeennu muujiyaan.

— *J. K. Rowling*

Falsafadda qolka dugsiga ee hal jiili waxa ay noqon doontaa falsafadda dawlad ee jiilka xiga. — *Abraham Lincoln*

Waa kan mabda'ayga ugu horreeya ee siyaasadda arrimaha dibaddu: maamul-wanaag dalka gudihiisa ah.

— *William E. Gladstone*

Kuwa ka dhiga kacdoon nabadeed wax aan macquul ahayn waxa ay lama-huraan ka dhigaan kacdoon rabshado wata.

— *John F. Kennedy*

Waa in aynu joojinno ka-fekerka nafteenna oo keliya waa in aynu billowno ka fekerka waxa u wanaagsan bulshada.

— Hillary Clinton

Awoodda ugu weyni ma aha tan lacagta, laakiin waa awoodda siyaasadda. *— Walter Annenberg*

Dhiirranaanta siyaasadeed ma aha ismiidaamin siyaasadeed.

— Arnold Schwarzenegger

Calool madhani ma aha la'taliye siyaasadeed oo wanaagsan.

— Albert Einstein

Siyaasadda dhexdeeda, dadka laga tirada badan yahay ee abaabulani waa aqlabiyadda siyaasadeed. *— Jesse Jackson*

Marka siyaasaddu dhammaato, dagaalka ayaa bilaabma.

— Adolf Hitler

Dadka intooda badani waa ay ka soo kaban karaan duruuf qalafsan, laakiin haddii aad rabto in aad tijaabiso qof, qofkaas u dhiib awood. *— Abraham Lincoln*

Siyaasiga ugu guulaha badani waa kan kor ugu dhawaaqa waxa ay dadku inta badan ka fekeraan. *— Theodore Roosevelt*

Waqtiga dibuhagaajinta lagu sameeyo saqafku waa marka ay qorraxdu soo jeeddo. *— John F. Kennedy*

Maxaa kuu qorshaysan sannadkan hadda lagu jiro? Maxaa kuu qorshaysan 5 sanno? Maxaa kuu qorshaysan 10 sanno?

— Danny Pettry

Haddii aad rabtid in aad burburisid qaran dhisan, keliyaata galmada reebban uga dhig wax caadi u ah dhallinyartooda!

— Salahuddin Ayyubi

Ma jiro wax ka rejo-beelsan kuwo la addoonsado ee rumaysan in ay xor yihiin. *— Johann Wolfgang von Goethe*

Siyaasiyiintu dhammaantood waa isku mid. Waxa ay ballan-qaadaan in ay biriish dhisi doonaan xataa marka aanay jirin webiyaal. *— Nikita Khrushchev*

Waxa damiir ahaan qaldani siyaasad ahaan ma saxnaan karaan.

— William Gladstone

Kuwa diida xorriyadda dadka kale u qalmaan, iyaguna uma qalmaan [xorriyad.] *— Abraham Lincoln*

Dimuqraadiyaddu kuma habboono bulsho jaahil ah, maxaa yeelay aqlabiyad dameerro ah ayaa aayatiinkaaga qaadaadhigi doonta. *— G.B. Shaw*

Siyaasaddu waa in aad afka ka tidhaahdid in aad samayn doontid hal shay, uurkana aad ka rabtid in aad samaysid hal shay oo kale.

Hadhawna aanad samayn shaygii aad afka ka tidhi iyo kii aad uurka ka rabtay toona. — *Saddam Hussein*

25
WADAJIR

Waxa aan ka gudbay xariiqda. Waxa aan noqday xor; laakiin may jirin cid igu soo dhaweysay dhulka xorriyadda. Waxa aan qariib ku noqday dhulqalaad.

— *Harriet Tubman*

Diinta waxaa loogu tala alay in lagaga baxo qabyaaladda oo loo gudbo baraarug guud oo caalami ah.

— *Deepak Chopra*

Guushu waxa ay timmaaddaa marka ay dadku si wadajir ah u hawlgalaan; guuldarraduna waxa ay timmaadda marka qofku keli noqdo.

— *Deepak Chopra*

Weligeed xal laguma heli karo in saddex jiho oo kala duwan loo ordo.

— *Deepak Chopra*

Marka dumarku is ursadaan, waxyaabo waaweyn ayay qaban doonaan.

— *Leymah Gbowee*

Ma hadhin waqti la lumiyo. Waa in aynu midowno hadda ama aynu baaba'no.

— *Julius Nyerere*

Ka dheerow dadka isku daya in ay hoos u dhigaan hiigsiyadaada. Dad yar ayaa badiyaa sidan sameeya, balse dadka qiimaha lehi waxa ay ku dareensiiyaan in aad adiguba qiimo yeelan karto.

— *Mark Twain*

Ma jiraan dhibaatooyin aynaan si wada jir ah u xallin karin, kuwo aad u yarna waa aynu xallin karnaa innaga qudheennu.

— *Lyndon B. Johnson*

Isla dayrka aad isku dayrtay ee dadka kale in ay gudaha u soo galaan u diidday ayaa adigana bannaanka in aad uga baxdo kuu diiday.

— *Bill Copeland*

Fekradaha wanaagsani waxa ay la hadlaan oo keliya maskaxda fekerta, laakiin falka wanaagsani wuxuu la hadlaa dhammaan dadka.

— *Emily P. Bissell*

Qofna aad ha ugu tiirsanaan adduunkan maxaa yeelay xitaa hadhkaaga ayaa kaa taga marka aad mugdi gasho.

— *Ibn Taymiyyah*

Mararka qaar, hal qof oo keliya ayaa maqan, adduunkoo dhanna wuxuu u muuqdaa meel dadka laga raray.

— Alphonse de Lamartine

Waxa aad isku wareejisaa keliya dadka sare kuu sii qaadaya.

— Oprah Winfrey

Ma necbi dadka. Keliya waxa aan dareemaa in aan fiicanahay marka aanay aagaas ka dhaweyn.

— Charles Bukowski

Ma qabsan karno waxyaabaha aynu rabo innaga oo wadajirna mooyee!

— Bill Richardson

Waxa aynu u wanaagsannahay marka aynu wada-shaqaynaynno. Kala duwanaanshaheennu muhiim ma aha, waxa muhiimka ahi waa in aynu '**dad'** wada nahay!

— Bill Clinton

Shan ruux oo maxkamadda si wada jir ah uga shaqaynaya ayaa soo hoyn kara wax ka badan inta ay soo hooyaan shan orodyahan oo xirfad leh balse si keli keli ah u ordaya!

— Kareem Abdul Jabbar

Waa wax weyn oo wacdarro ah waxa aynu wadajirka ku samayn karnaayi! — *Qoraha lama yaqaan*

Waxa aynu keliya ku guulaysan karnaa iskaashi!

— Gnassingbe Eyaderma

Waxa aad raadisaa la-jirka kuwa ku raaxaysta la-jirka Rabbi.

— *Sh. Abdulqadir al-Jilani*

Laga yaabaa in aynu dhammaanteen ku nimi doommo kala duwan, laakiin hadda waxa aynu wada saaran nahay hal markab.

— *Martin Luther King, Jr.*

Ma aha kala-duwanaanshaheenna waxa ina kala qaybinayaa. Waa awood yaraanteenna aynaan ku aqoonsan, aqbalin, una dabbaal-degin kala-duwanaanshahaas.

— *Audre Lorde*

Mid ka mid ah baahida ugu da'da weyn ee aadanahu waa haysashada qof kaas oo ka werwera meesha aad jirto marka aanad guriga ku soo laaban habeenkii.

— *Margaret Mead*

Waxa aynu nafaheenna u qabannaa waa ay innala dhintaan; waxa aynu dadka kale iyo dunida u qabannaase wuu innaga hadhaa wuuna waaraa!

— Albert Pike

Iswaafaqsanaantu waxa ay korisaa walxaha yaryar, is waafaqsanaan la'aantu waxa ay kala lumisaa walxaha waaweyn.

— Sallust

Noqo mid waxtar leh. Marka aad aragto qof bilaa dhoolla-caddeyn ah, taada sii.

— Zig Ziglar

Haddii aad rabto in aad kor u qaaddo naftaada, kor u qaad qof kale.

— Booker T. Washington

I hoggaami aniga, i soo raac aniga, ama jidka iiga leexo.

— General George Patton

Waa aad heli kartaa dhammaan. Keliya halmar ma wada heli kartid.

— Oprah Winfrey

Waa qasab in aynu caruurteenna barno sida loogu xalliyo dhibaatadooda hadal, ee aan hub loogu xallin.

— William J. Clinton

Marka aynu doonayno in aan ogaanno wanaagga kuwa kale, si uun baynu u helnaa wanaagga ku jira nafteenna.

— William Arthur Ward

Midnimadu waa awood… Marka ay jirto wadashaqayn iyo iskaashi, walxo cajiiba ayaa la gaadhi karaa.

— Mattie J.T. Stepanek

Midnimada waxa ku jirta awood!

— Aesop

Wadashaqayntu waxa ay yaraysaa hawsha waxa ayna badisaa guusha!

— Qoraha lama yaqaan

Keli keli waxa aynu nahay dhibic biyo ah. Wadajir waxa aynu nahay badweyn.

— Ryunosuke Satoro

Meeshii midnimo taal guuli waa taallaa!

— Publilius Syrus

Dadnimadeydu waxa ay ku xidhan tahay taada, wadajirka oo keliya ayaynu bini-aadan ku nahay. *— Desmond Tutu*

Ha u oggolaan in dadku aanay ku ixtiraamin adiga. Hooyaday ayaa igu tidhi haka furin albaabka ibliiska. Isku wareeji dad dhanka wanaagsan wax ka eega.

— Cuba Gooding, Jr.

Marka ay kugu hareereysan yihiin dad wadaaga dareen u heellan ujeeddada guud, wax waliba waa suurto gal.

— Howard Schultz

Xidhiidh kasta oo wanaagsan, gaar ahaan guurku, waxa ay ku salaysan yihiin ixtiraam. Haddii aanu ku salaysneyn ixtiraam, wax wanaag ah kuma dhammaan doono.

— Amy Grant

Marka aad tusi kari waydo in ay arkaan iftiinka, iyaga kulaylka dareensii.

— Ronald Reagan

Ha ka shakiyin in koox yar oo feker ay wadaagta leh ka go'naanshana u raacaa beddeli karaan dunidan. Xaqiiqdii waaba kuwa keliya ee soo beddelayay abid.

— Margaret Mead

Waxa muhiimka ah in la xasuusto ayaa ah in aan qof keli ahi awoodin inuu sameeyo wax walba.

— Nelson Mandela

Waxa aad qayb ka tahay xalka, ama waxaad qayb ka tahay dhibaatada.

— Eldridge Cleaver

Wadajirku aniga wuxuu ii yahay wada-shaqayn!

— Walt Disney

Waxa aan jeclaan lahaa in dhammaan aadanahu hal qof isku ahaan lahaa si aan laabta u geliyo!

— Ray Abraham Isaac

Erayga ku lidka ah kelinnimo ma aha wadajir ee waa midow.

— Richard Bach

Wadajir waa aynu istaageyna kala qaybsannaanna waa aynu dhici.

— Alexandre Dumas

Mararka qaarkood waxyaabaha isku keen keena ayaa sidoo kale dhinacyo inoo kala riixa. Sida siibadda (jiinyeerka) oo kale.

— Jarod Kintz

Hal jacayl, hal wadne aynu isu tagno oo aynu dareenno wanaag.
— Bob Marley

Sida aynu iskugu duubannahay ayuun baynu u xoog badannahay, sida aynu u kala qaybsannahay ayuun baynu u tabar yarnahay.

— J.K. Rowling

Fekraduhu waa ina kala soocaan. Riyooyinka iyo cidhiidhiguna waa ina kulmiyaan. — *Eugene Lonesco*

Isku imaatinku waa billow; sii wadajirkuna waa horumar, wada shaqeyntuna waa guul. — *Henry Ford*

26
WAQTI

Nacaybka dadka waxaa kaaga lumaya waqti badan uun.

— *Marian Anderson*

Waqti la hadlo iyo waqti la aamuso ayaa kala jira.

— *Aung San Suu Kyi*

Nolosha iyo waqtigu waa labada bare ee dunida ugu wanaagsan: Noloshu waxa ay ina bartaa adeegga wanaagsan ee waqtiga, waqtiguna waxa uu ina baraa qiimaha ay noloshu leedahay!

— *A.P.J. Abdul Kalam*

Waxa jirta tuug aan cidina ciqaabin; waa kuwa kaa xada waqtigaaga!

— *Napoleon Bonaparte*

Ha isku marin dhabbo aanad garanayn meesha ay ku dhammaanayso!

— *Qoraha lama yaqaan*

Waqtigu innama beddelo ee daboolka uun buu innaga qaadaa.

— *Max Frisch*

Marnaba ha ka tanaasulin mabda'yadaada, xitaa haddii ay kugu hoggaaminayaan waqtiga dhow xaalad adag.

— *Alan Casden*

Haddii aad maqnayd xilligii aan halgamayay, ha filan in aad timaaddid xilliga aan dabbaaldegayo.

— *Will Smith*

Uma hayo waqti aan kaga werwero cidda aan i jeclayn… Waxa aan ku mashquulsanahay jacaylka kuwa i jecel.

— *Qoraha lama yaqaan*

Waa inta aad ku jirto waqtiga ugu xun noloshaada marka aad ogaan kartid midabka dhabta ah ee dadka ku yidhahda, 'Waan ku daaneynaynaa.'

— *Ritu Ghatourey*

Tagtada wax ka baro, u diyaargarow mustaqbalka, waqtiga la joogana wax qabso.

— *Mike Van Hoozer*

Maalmihii ay cadowgeennu innoogu hanjabi jireen bambooyinka nukliyeerku waa ay dhammaadeen.

— *Kim Jong-un*

Waxaa immaanaya waqti ay khiyaamo tahay aamusnaantu.

— Martin Luther King, Jr.

Raggu waxa uu seexdaa 6 saacadood, dumarkuna 7 saacadood. Balse qofka doqonka ah ee weliba garashadana saboolka ka ahi waxa uu seexdaa 8 sacadood iyo wax ka badan.

—Napoleon Bonaparte

Waqtiga ha iskaga lumin garaacista gidaar, adiga oo ka filaya in uu isu beddelo albaab.

— Coco Chanel

Aqoon bilaa fal ahi waa waalli; fal bilaa aqoon ahina waa faan.

— Imam Ghazali

Ilaa aad naftaada qiimaysid, ma qiimayn doontid waqtigaaga. Ilaa aad waqtigaaga qiimeysidna, waxba kuma samayn doontid.

— M. Scott Peck

Waa maxay waxa aad ka fekerto waqtigaaga inta u badan?

— Danny Pettry

Sameynta sida ugu fiican xilligan ku dhigaysa meel ka fiican xilligan ka xiga. *— Oprah Winfrey*

Marka aad qof cafinayso, waxba kama beddeli doontid tagtada - laakiin hubaal waxa aad wax ka beddelaysaa mustaqbalka.

— Bernard Meltzer

Had iyo jeer waxa ay dhahaan waqtiga ayaa wax beddela, laakiin dhab ahaantii adiga ayaa ay tahay in aad beddesho.

— Andy Warhol

Haddii aanad hoggaanka u qaban waqtigaaga, waxa aad u suurtagal ah in aad addoon u noqonaysid dadka iyagu hore hoggaanka ugu qabtay waqtigooda!

— Brandon A Trean

Waqtigu waa hantida keliyaata ee aadane oo dhami haysto, haddana waa waxa keliyaata ee aanay ka baaqsanayn in ay lumiyaan!

— Thomas Edison

Ka adkoow waqtigaaga; waxa aad ka adkaan noloshaada e!

— Qoraha lama yaqaan

Adiga oo aan ugu horraynta yoolalkaaga si cad u qeexi karin, waa wax aan suurtagal ahayn in aad qorshe diiradda saartid si aad u fulisid. Tani waa sababta dejisashada hadafyadu ugu yihiim caws jiilaal maaraynta waqtiga.

— Mani S Sivasubramaniam

Habka ugu fiican ee loogu noolaan karo nolol micno lihi waa dejisashada qorshaha hal maalin subaxii, hadhow habeenkiina dib-u-eegista natiijada ka soo baxda! — *Alexis Carrel*

Dadku saacadaha maalinta waxa ay u kala adeegsadaan si kala geddisan. Balse sida aad waqtigaaga u adeegsataa waxa ay turjumaysaa tayadaada!

— *Qoraha lama yaqaan*

Marka aynu wax dib u dhigayno, noloshu xawaare ayay jaraysaa!

— *Seneca*

Ninna lacag dheeraad ah ma dalbado marka uu naxashka saaran yahay!

— *Rick*

Haddii aynaan waqtiga maarayn karin, wax kale ma maarayn karno!

— *Peter Drucker*

Caqabaddu ma aha maaraynta waqtiga, balse waa maaraynta nafaheenna. Furuhu ma aha kala hormaynta jedwalkaaga, balse waa jedwal u samaynta hormooyinkaaga!

— *Stephen Covey*

Dadku badiyaa waxa ay ka cawdaan waqti la'aan iyada oo dhibta runta ah ee haysataa tahay jiho la'aan.

— Zig Ziglar

Sababta waqti badan loo lumiyo waxa si toos ah loola xidhiidhin karaa bilaa abbaaridda iyo bilaa dareen siinta!

— Qoraha lama yaqaan

U-maaraynta waqtiga si bilaa kala mudnaan ihi waxa ay ka dhigan tahay toogashada meel hadhowna dhihidda meeshii aad abbaartaba ‘waa yoolkii’!

— Peter Turla

Idil ahaan maaraynta waqtigu waxa uu ka bilaabmaa qorshayn.

— Tom Greening

Haddii aanad waqti u hayn in aad sida saxda ah u qabatid, goorma ayaad waqti u heli doontaa in aad mar kale dib u soo wada billowdid?

— John Wooden

Waqtigu wuxuu noqon karaa cadowgaaga ama saaxiibkaa.

— Ray Charles

Waxa aan waqti badan dersaa dadka. Sababo awgeed, innagu kuma fiicnin in aynu aragno waxa ina hor yaalla ama in aynu dhegeysanno waxa aynu maqlayno.

— Ben Okri

Kuwa waqtigooda sida ugu xun u isticmaalaa waa kuwa ugu horreeya ee ka cawda gaabnida waqtiga.

— Jean de La Bruyère

Waxaa jira waqtiyo ay aamusnaantu tahay dhawaaqa ugu codka dheer.

— Leroy Brownlow

Waqtiga oo aad lumiso ayaa ka daran dhimashada. Waayo dhimashadu waxa ay kaa fogaysaa dunida uun, balse waqti-lumintu waxa ay kaa fogaysaa Eebbe!

— Ibn Al-Qayyim

Maquunada u weyn ee aad ruux siisaa waa waqti. Waayo waxa aad qofka siisay wax aanad ka soo ceshan karin!

— Qoraha lama yaqaan

Hannaanka aynu waqtigeenna u kharash-garaynaa waxa uu ka turjumayaa cidda aynu nahay!

— Jonathon Estrin

Waqti intaa ka badan ha ku lumin in aad falanqaysid kana dooddid waxa ay tahay in uu noqdo qofka wanaagsani. Noqo adigu qof wanaagsan!

— Marcus Aurelius

Waqtigaagu waa xaddidan yahay ee ha ku lumin noolaanshiyaha nolosha qof kale!

— Steve Jobs

Waqtigu waxba ma daweeyo… waxa uu ina baraa uun sidii aynu u noolaan lahayn innaga xanuunkii dareemayna!

— Qoraha lama yaqaan

Dadka qaar ayaa gabow ku dareema 18 jirka, qaarkoodna dhallinyarnimo ayay ku dareemaan 90 jirka … waqtigu waa fahan uu aadanuhu abuurto!

— Yoko Ono

Badankeennu waxa aynu waqti badan ku luminnaa wax degdeg ah; haddana waqti ma siinno waxa MUHIIMKA ah!

— Stephen Covey

Waxa aynu ku tirawnaa in aynu luminnay waqti. Maan-gal ma aha. Waxa aynu luminnay nafaheenna.

— Alice Block

Waqtigu waxa uu leeyahay qaab u gaar ah isla markaana cajiib ah oo uu inoo tusiyo waxa muhiimka ahi waxa uu yahay!

— Qoraha lama yaqaan

Waxa ay tahay in aynu qabannaa waa go'aan ka gaadhista waxa aynu ku samayn lahayn waqtiga la inoo gartay.

— Gandalf

Waqtigu waa ka qaalisan yahay lacagta. Lacag badan waad kasban kartaa, balse waqti badan ma kasban kartid!

— Jim Rohn

Waqtiga aad lumintiisa ku raaxaysanaysaa, ma uusan lumin!

— John Lennon

Weligeed ma jirayo waqti ku filan in wax kasta lagu qabto; balse waxa jira waqti ku filan in la qabto waxyaabaha u mudan.

— Brian Tracy

Haddii aad nolosha jeceshahay, waqtiga ha lumin. Waayo waqtigu waa waxa noloshu ku dhisan tahay! *— Bruce Lee*

Warka xun ee aan kuu hayaa waa in 'waqtigu duulayo'. Warka wanaagsan ee aan kuu hayaana waa 'adiga aad duuliye ka tahay!.

— Michael Althsuler

Waqtigu waa shay la abuurto. Haddii aad tidhaahdid, "waqti ma hayo", waxa ay la mid tahay 'ma rabo in aan yeesho waqti'.

— Lao Tzu

Ha odhan, ‘waqti igu filan ma haysto’, waayo dhammaan dadkii dunidan wax ku soo kordhiyay maalintoodu waxa ay ahayd 24 saacadood ee kama ay badnayn!

— Jackson Brown

Waqtigu wuxuu kaa qaadan doonaa lacagtaada, laakiin lacagtu kuuma soo iibin karto waqti.

— James Taylor

Ilaa aan awoodno in aan maamulno waqtiga, ma maamuli karno wax kale.

— Peter Drucker

Dhibaatadu waxa ay tahay, waxa aad u haysataa in aad waqti haysatid! *— Buddha*

Dhammaan guulaha waaweyni waxa ay u baahan yihiin waqti.

— Maya Angelou

Lacag waa aan heli karaa ama waayi ka karaa. Laakiin waqti waa aan waayi karaa uun. Sidaa darteed, waa igu waajib in aan si taxaddir leh u isticmaalo [waqtiga.]

— Qoraha la ma yaqaan

Yoolku waa riyo ay la socoto waqti’go’naani.

— Diana Scharf Hunt

Waa waqtigii waalidku bari lahaa da'yarta waqti hore, kala-duwanaashuhu in qurux iyo awood laga heli karo.

— *Maya Angelou*

Laga yaabaa in aad dibdhacdo, laakiin waqtigu ma dibdhaco.

— *Benjamin Franklin*

Mararka qaar marka dadku ay ku jiraan cadaadis, waa ay necbaystaan in ay fekeran, waana waqtida ay ugu baahi badan yihiin in ay fekeraan.

— *William J. Clinton*

Maanta qof baa fadhiya hadhka, sababtoo ah qof baa beeray geedka waqti hore.

— *Warren Buffett*

Macno ma laha inta aad mashquulsan tahay, waa in aad waqti aad dadka kale dareensiiso in ay yihiin muhiim aad siisaa.

— *Mary Kay Ash*

Badi dadku waxa ay waqti iyo tamar badan ku bixiyaan ka wareegista dhibaato halkii ay isku deyi lahaayeen in ay xalliyaan.

— *Henry Ford*

Ma ahan in aan anigu ahay mid caqli badan, keliya waa in aan ku negaaday dhibaatada waqti dheer. — *Albert Einstein*

Marna ha niyadjabin, waxaa kaa xiga uun waqti iyo meel in mawjaddu noqoto.

— Harriet Stowe

Haddii ay ahaan lahayd waqtiga ugu fiican ama waqtiga ugu xun, waa waqtiga keliya ee aynu haysanno. *— Art Buchwald*

Waxa aynu ugu baahida badannahay waa waqtiga; waxa aynu ugu adeegsi xunnahayna waa isla waqtiga!

— William Penn

Ha ku dhegnaan xasuusahaaga; ha wanaagsanaadaan ama ha xumaadaan e, waayo kulligood waa wax tegay!

— Yasmen Mogahed

Waad khiyaameyn kartaa dadka oo dhan waqti kooban, dadka qaarna waligood waad khiyaameyn kartaa, lakiin waligood ma khiyaameyn kartid dadka oo dhan. *— Abraham Lincoln*

Waqtigaaga ha ku lumin sharraxaad dheeri ah. Dadku waxa ay dhegaystaan waxa ay rabaan in ay maqlaan. *— Paulo Coelho*

Dadka qaar waxa ay kula sheekaystaan waqtigooda firaaqad ah, dadka qaarna waqtigooda ayay ku firaaqeeyaan si ay kuula sheekaystaan! *— Qoraha lama yaqaan*

Ma aha geesiyadu kuwo sameeya taariikhda, lakiin taariikhda ayaa ka dhigta geesiyo. — *Joseph Stalin*

27
WAXBARASHO

Waxbarashada lagama weynaado.

— *Alferd Williams*

Waa in uu qof waxbaro iyaga, haddii aanan anigu waxbarin, yaa waxbaraya? Haddii aan hadda wax la barin, goormaa wax la barayaa? Waa in aynu hadda qabannaa hawshaas.

— *Oral Lee Brown*

Waxa keliya ee aan odhan karo aniga ayay qeexitaan iga bixinaysaa waa in aan jeclahay in aan waxbarto. Waxa aan ka helaa farxad waxyaabaha cusub. Waxa aan gataa buug ka badan inta aan akhrin karo ama dhammayn karo.

— *Satya Nadella*

Waxbarashadu ma aha hab looga baxsado saboolnimada, waa hab lagula dagaallamo iyada.

— *Julius Nyerere*

Macallinku waa in uu leeyahay maskax hal-abuur leh.

— *A. P. J. Abdul Kalam*

Weli lama aan kulmin ruux aqoon-darradiisu gaadhay heer aanan waxba ka faa'idin!

— *Galileo Galilei*

Dadka waxba ma bari karno, keliyaata waxa aynu ka caawin karnaa in ay aqoonta iyagu iska dhex raadiyaan!

— *Galileo Galilei*

Ninka yidhaahda, 'in igu filan waan bartay oo waxbarasho sii wadi mayo,' waa in loo arko in aanu wax garanayn.

— *Haile Selassie*

Qofka waxbarta laakiin aan ku dhaqmin wuxuu la mid yahay sida qof beer carro-rogay laakiin aan waxba ku beeran.

— *Saadi*

Maskaxaha u wanaagsan ee qaranku waxa laga yaabaa in ay ku jiraan safka u danbeeyay ee fasalka!

— *A.P.J. Abdul Kalam*

Natiijada ugu sarraysa ee waxbarashada ka dhalataa waa dulqaad.

— *Helen Keller*

Waxa aan hayaa saddex shay oo la iga barto: daacadnimo, dulqaad, naxariis. Saddexdani waa kaydkaaga maaliyadeed ee ugu weyn.

— Lao Tzu

Bulsho ma noolaato haddii afkeedu dhinto, af ummaddiisu nooshahayna ma dhinto! *— Mustafa Saadiq Ar-rafici*

Berri waxa ay inaga rejeynaysaa in aynu shalay wax ka soo baranay.

— John Wayne

Habka ugu wanaagsan ee argagixisada loola dagaallamaa waa in la maalgeliyo waxbarashada.

— Malala Yousafzai

Wax ma bari kartid nin, waxa keliya aad awooddaa in aad ka caawisid in uu isagu helo.

— Galileo Galilei

Baruhu wuxuu furaa albaabka, laakiin waa in aad adigu gashaa.

— Maahmaah Chinese ah

Waxbarashadu weligeedba waa furaha dhaqaalaha iyo kobcinta siyaasadda.

— Barbara Jordan

Geesinimadeeda iyo go'aanadaygeeda, **Malala** wuxuu tusay waxa ay argagixisadu aad ka uga cabsato: gabar buug wadata.

— Ban Ki-moon

Macallimiinta waxa aad ka heli kartaa caawimo, laakiin adiga ayaa naftaada wax badan bari kara, inta aad keligaa qol cidlo ah fadhiisato. *— Dr. Seuss*

Isu dhuldhigga dadka aqoonta idin baray, isuna dhuldhiga dadka aqoonta aad barteen. Hana ka mid noqonina kibraaniinta aqoonta, oo yaanu cilmigiinu ku taagnaan jahligiina!

— Omer bin Khaddaab

Aqoon yar oo hawl gasha ayaa ka waxtarsan aqoon badan oo fadhiid ah!

— Kahiil Gibran

Qaadhaan kasta oo lagu darsado aqoonta runta ahi waa mid lagu darsaday awoodda aadanaha!

— Horace Mann

Aqoontu waa helidda warcelintii saxda ahayd. Muddakarnimaduna waa wayddiinta su'aashii saxda ahayd!

— Qoraha lama yaqaan

Aqoontu waa nolosha garaadka!

— Abu Bakar As-siddiq

Qof kasta oo aad mar uun la kulantaayi waxa uu yaqaanaa wax aanad hore u aqoonin.

— Bill Nye

Haddii aqoontu dhibaato abuuri karto, ma aha aqoondarrada tan aynu u adeegsanayno xalku. *— Isaac Asimov*

Maalgelinta waxbarashada la geshaa waa tan ugu faa'idada badan.

— Benjamin Franklin

Ma jiro qof dhammeystirtay waxbarashadiisa isaga oo aan baran in lala noolaado dhibaatooyinka aan la xallin karin.

— Edmund J. Kiefer

Waxaa aad u adag… in aad ku dhex noqoto qof aqoon leh dal aan ku kalsoonayn maskaxda xorta ah.

— James Baldwin

Waxa aynu ku baranno si raaxo leh, weligeen ma hilmaamno.

— Alfred Mercier

Denbiyadu saamaynno taban oo badan ayay kugu leeyihiin. Mid ka mid ahi waa in ay kaa xadaan aqoonta!

— Ibn Al-Qayyim

Haddii dadku ogaan lahaayeen natiijada cuddoon ee dhex ceegaagta aqoonta, si dhab ah ayay u dalbi lahaayeen xataa haddii ay u qubayaan dhiigga wadnahooda una quusayaan gunta badweynta!

— Imam Zain-ul-Abideen

Haddii aan la doodo qof aqoon leh, aniga ayaa ka guulaysta; Haddii aan la doodo qof jaahil ahna, isaga ayaa guulaysta!

— Imam Shafici

Aqoonta waa la doontaa ee iyadu ma timaaddo!

— Imam Malik

Qofka aqoonta baadi doonaa waa qof xaqiiqada baadi doonaya. Qofkii xaqiiqada baadi doonaana xaqa ayuu jeclaadaa. Qofkii xaqa jeclaadaana runlow ayuu noqdaa. Qofka runlowga ahina waa geesi!

— Dr. Cali Mustafa

Macallinka u wanaagsani waa kan ku tusiya halka ay tahay in aad eegtid balse aan kuu sheegin waxa ay tahay in aad aragtid!

— Alexandra K.Trenfor

Aqoonta koowaadi waa aamusnida, ta labaadi waa dhegaysiga, ta saddexaadi waa qaybidda, ta afraadi waa hawlqabadka, ta shanaadina waa faafinteeda! *— Al-Asma'i*

Had iyo jeer doon in aad barato wax waxtar leh.

— *Sophocles*

Keliya aqoonyahannada ayaa xor ah.

— *Epictetus*

Waxbarashadu waa Hooyada hoggaaminta.

— *Wendell Willkie*

Baraha wanaagsani waa sida madadaaliye wanaagsan marka hore waa in uu qabsado dareenka dhageystayaasha, kadibna waxa uu baraa casharkiisa.

— *John Henrik Clarke*

Subax kasta nafteyda waxa aan xusuusiyaa: Ma jiraan wax aan maanta idhaahdo oo aan wax ka baran doono. Sidaa darteed haddii aan rabo in aan wax barto, waa in aan wax dhageystaa.

— *Larry King*

Aqoontu waa garashada wixii aad odhan lahayd, murtiduna waa garashada xilligii aad odhan lahayd!

— *Qoraha lama yaqaan*

Kan waxbarta laakiin aan fekerin, wuu qasaaray! Kan fekera laakiin aan waxba baranina, wuxuu ku jiraa khatar aad u weyn.

— Confucius

Kama xishoonayo in aan qirto in aan jaahil ka ahay wixii aanan aqoon.

— Cicero

Barashada sida wax loogu kalsoonaadu waa mid ka mida ah shaqooyinka nolosha ugu adag.

— Isaac Watts

Qofka albaabka dugsi fura, wuxuu xidhay xabsi.

— Victor Hugo

Waxbarashadu waa furaha lagu furo albaabka dahabka ah ee xorriyadda.

— George Washington Carver

Waxbarashadu ma aha barashada xaqiiqooyinka, laakiin waa u tababbarka maskaxda sidii ay u fekeri lahayd.

— Albert Einstein

Marka aynu dadka barayno fekerka waynu xoraynaynaa, markase aynu wax uun u yeedhinayno, waxa aynu ku daraynaa duur joogta.

— Ali Izzat Begovich

Waxa ay calaamad u tahay maskax aqoon leh in la awoodo soo dhaweeynta aragti aan la aqbalin.

— Aristotle

Kuma filna in la haysto maskax wanaagsan; waxa ugu weyn waa in iyada si fiican loo isticmaalo. *— Rene Descartes*

Haddii aanad doonayn in aad wax baratid, qofna kuma caawin karo. Haddii aad rabtose in aad wax baratid, ruuxna kuma hor istaagi karo.

— Qoraha lama yaqaan

Waxbarashadu ma aha barashada xaqiiqooyinka, balse waa ku tabobaridda maskaxda in ay fekerto.

— Albert Einsteina

Waxbarashadu waa waxa keliya ee ruuxa u soo hadha marka uu illaawo wixii uu dugsiga ku soo bartay!

— Albert Einstein

Waxbarashadu waxay ka dhigan tahay holcinta shamac, ee ma aha buuxinta weel!

— Socrates

Sirta waxbarashadu waa ixtiraamidda ardayga.

— Qoraha lama yaqaan

Haddii aynu rabno inaynu dunidan xasillooni dhab ah ka gaadhno, waa in aan ubadkeenna waxbarnaa.

— *Mahatma Gandhi*

Waxbarashadu waxa ay bixisaa hal-abuurnimo. Hal-abuurnimaduna waxa ay keensataa fekerrid. Fekeridduna aqoon. Aqoontuna waxa ay kaa dhigtaa mid sarreeya.

— *Abdul Kalam*

Xididdada waxbarashadu waa qadhaadh balse midhaheeda ayaa macaan ah!

— *Aristotle*

Qofku waa in uu shay uun wada yaqaannaa, shay kastana wax uun ka yaqaannaa.

— *Tawfiq Al-Hakim*

Waxa aan ummaddan uga cabsanayo waxa ugu weyn ruux afka aqoonyahan ka ah, qalbigana jaahil ka ah.

— *Omer Bin Khaddaab*

Waxbarashadu ma aha u diyaargarowga nolosha. Waxbarashadu waa nolosha laftarkeeda. — *John Dewey*

Weligay ardaydayda wax uma dhigin. Keliyaata waxa aan siinayay shuruudaha wax lagu barto.

— Albert Einstein

Bilaa waxbarasho, dunidan meelna uma dhaqaaqi kartid.

— Malcolm X.

Noqo arday isbeddel, waa waxa keliya ee aan isbeddeli doonin e.

— Anthony J. D'Angelo

Weligay waxba kuma baran hadal. Waxa aan wax bartay markii aan wax iswayddiiyay.

— Lou Holtz

Aqoonta waxaa ammaan ugu filan inuu sheegto qof aanba lahayn, haddii lagu sheegana uu ku farxo. Jaahilnimaddana waxaa xumaan ugu filan inuu iska diido qofkii ku sugnaa, haddii lagu sheegana uu ka xanaaqo.

— Imam Shafi

Iskajir aqoonta beenta ah, waa ka khatar badan tahay jaahilnimada.

— George Bernard Shaw

Ma ku baraa waxa ay aqoontu tahay? Marka aad garaneysid wax, sheeg in aad garaneysid; marka aanad garaneyn wax, oggolow in aanad garaneyn. Aqoontu waa taas.

— Confucius

Aqoonta aan ficil la socon waa wax aan waxba tarayn, ficil aan aqoon lahaynina waa waalli.

— *Imam Ghazali*

Ku Saabsan Bahda Xigasho

Kooxda “Xigasho” waa hormo dhallinyaro ah oo isu xil qaantay in ay odhaahyaha xikmaddu ceegaagto ee ay leeyihiin dadyawga dunidu, gaal iyo Muslimba, madow iyo caddaanba, ugu hal-tebiso bulshadeeda afka Soomaaliga si ay uga dheefaan wixii toosin iyo tusaale ay sidaan. Waa weedho dhisaya wacyiga iyo adduun-aragga dadkeenna, kalsooni-dhisidda nafaheenna, ku-dhiirrashada guusha iyo ka takhallusidda cabsida, u turaanturoonta xagga yoolku innaga xigo, isku hubaynta hubka ugu culus ee aqoonta, la-rafiiqidda saaxiib ina dhiirrigeliya.

Waa koox u diyaar ah in ay hawshan si hor ilaahay iyo habeen aakhiro ah u qabtaan, qarashna aan ka doonayn ee ka doonaya qalbi raadooba.

Haddii aad daneynneyso waxa aad toos farriin noogu soo diri ciwaankan info@xigasho.org.

Warqad Furan!

Ku: Cabdisalaan Macallin Xirsi Warsame
Ka: Bahda Xigasho

Lama oggola in aad cid kale la wadaagto ama aad si macshar ah u faafiso buuggan.

Mahadsanid.